85

SUUGAANTA CARRUURTA Qorayaal: Dahabo Faarax Xasan iyo
Axmed faarax Cali "Idaajaa".

QAYBTA I: SHEEKOOYIN HIDDE Qore: AXMED FAARAX CALI "Idaajaa".

QAYBTA II: SHEEKO CARRUUREED SOMAALIYEED; Qore: Dahabo Faarax Xasan.

QAYBTA III: SHEEKO XARIIR RUUSH AH (TARJIMAD)

Qore: Dahabo Faarax Xasan.

Xamar 1976.

3451

103

85

QAYBTA I

SHEEKOOYIN HIDDE

QORE: AXMED FAARAX "IDAAJAA".

Xamar 1976

cl maalik

SUUGAANTA CARRUURTA

Qorayaal: Dahabo Faarax Xasan iyo
Axmed faarax Cali "Idaajaa".

QAYBTA I: SHEEKOOYIN HIDDE Qore: AXMED FAARAX CALI "Idaajaa".

QAYBTA II: SHEEKO CARRUUREED SOMAALIYEED; Qore: Dahabo Faarax Xasan

QAYBTA III: SHEEKO XARIIR RUUSH AH (TARJIMAD)

Qore: Dahabo Faarax Xasan.

Xamar 1976.

# FOOLXUME IYO QURXOONE

Annagoo aqalka kaadkiisa fadhinna ayay hooyo xaawo sheekadaan iigu sheekaysay: Waxay tiri: 'waxaa la yiri labo nin ayaa labo gabdhood oo walaalo ah kala guursatay. Nin wuxuu ahaa nin qurux badan oo xoolo leh, golaha raggu joogo iyo sheekadana ku fiican; hase ahaatee fuley ahaa!

'Ninna wuxuu ahaa nin foolxun, hase ahaatee ragannimo ku duugan tahay, xikmaddiisuna dheer tahay. Wuxuu ahaa nin dagaalyaqaan ah, doodyaqaan ah, rag intii laga tilmaamo oo wanaag ah loo dhammeeyey, meel-ku-toosna ah, Waagaasna dhulku wuxuu ahaa dhul colaadeed oo habeen walba duullimaad loo toog hayn jirey.

Waxaa la yiri ninka quruxda badan ayaa ka kale aad looga jeclaa, Si aad ah ayay soddogii iyo soddohdiiba gaar ahaan ugu jeclaayeen, Si aad ah ayaa loo dhaqaalayn jirey oo aqalkiisa iyo waxtarkiisaba looga fekari jirey. Ninka kalena isaga iyo fadiisa oo fiican ayaa laysku dhaafay. Ninkaas aan loo roonayni wuxuu lahaa faras dheereeya oo uu reero kale ka soo dhacay. Faraskii ayuu inta mandiil soo qaatay dhogortii ka xiiray oo guudkii ka gooyey, sayntiina ka xumeeyey. Faraskii oo dhan ayuu dhaandhaan ka dhigay. Ninka kalena wuxuu lahaa faras qurux badan oo hannaan wanaagsan, guud dheer oo aaladdii loo dhammeeyeyna wuu lahaa. Labada gabdhood oo ay kala qabeenna way kala fiicnaayeen oo foolxume tiisa ayaa fiicnayd.

Maalintii dambe ayay labadii nin sahan ilaalo u kaceen. Hadday dhul soo mareen, casarkiina guryihii yimaadeen ayuu qurxoone yiri! Dhuul badan baannu marnay oo wax laga cabsado innaba maannu arag". Markaas buu aqalkiisii iska galay. Kii foosha ee faraskana xumaa ayaa wuxuu

yiri! Reerka ha la qaxiyoy caawa waa layna gelayaaye!! markii la yiri'Maxaad aragtay' ayuu yiri, "ax kale ma arage, deero qaxoonti ah ayaan arkay." Markaas baa la yiri: "war waxyahow nacaska ahi ee fuleyga ahi ninka kaleba wax ma arage maxaad adigu ka baqaysaa?";.. Oo dheg jalaq loo siin waayey. Lama qaxin. Dabadeedna foolxume ayaa naagtiisii ku yiri, "Naa faraska kooraha ii saar oo ii heensee, illeen caawa waa layna gelayaaye. Anigi dagaal baan u,darbanahay ee aabbahaa u sheeg oo waxaad ku tiraahdaa, "aroorta haddii layna galo kaa tegi maayee agtaada iga eeg".

Markii waagu dillaacay ayaa col ugu qabqabtay reerhii oo iska baraad la". Markaas baa geelii la dhacay, rag badanna la laayey, Ninkii nin-fiicnaha ahaa ee quruxda badnaa intuu ayda jeexay ayuu cagaha wax ka deyey,. Waa baxsaday. Foolxume faraskiisii xumaa intuu dusha uga baxay ayuu-sidii geesi yeeli jirey-colkii reerka galay barbar kaga dhuftay. Waa dagaal galay oo geelii soo dhacsaday. Odaygii soddogii ahaa oo ciriiri ku jireyna waa bixiyey. Haddii ciddii meel degtey oo nabad loo fariistay ayaa la iswaraystay. Markaas baa foolxume wuxuu belo dhigay lays kula wareegay. Maalintaas ka dib wixii qurxoone la siin jirey oo dhan ayaa foolxume loo wareejiyey.

Sidaas daraaddeed, ragannimo quruxda ma aha, nacastooyana foolxumada ma aha.

## TUSMADA


1. Foolxume iyo Qurxoone 2
2. Gabadhii Aabbahood iyo wiilkeedii midba mar guursatey. 4.
3. Shirwac qawsaar 4-5
4. Belaayo lug la' ............... 6
5. Oohintu orgiga ka wayn ....... 7
6. Saliilyoonney oo si kale noqonnay ...... 7-8
7. Qurbac Qoyan ......................... 8-9
8. Nin ugaarsato ah iyo naagtiis .......... 9
9. Dad ladnaan ma xejo .................. 9-10
10. Siini waa siin Ilaah .................. 11-13
11. Dhiishii Sama wada .................. 13-15
12. Kii aan dhalay kabihii baa ka lumay..... 15
13. Xidin Xiito .......................... 15-16
14. Rah iyo Wiilkiis 'waqaaf' ............ 16-17
15. Xasna Xeelad Badan .................. 17-20
16. Nin aan kibir jebin maroodi ma jebiyo .. 20-21
17. Waraabe iyo Wan ...................... 21-22
18. Libaax iyo Nin iyo Ri' ............... 22-23
19. Habartii Malkhado .................... 23-26
20. Bulbul-aayo ......................... 26-28
21. Raage Ugaas iyo Aabihiis .............. 29-
22. Naag iyo Ninkeed ..................... 30-
23. Gudi Khiyaamo ....................... 31-33
24. Kood-kerkeyr ........................ 34-36
25. Gabadhii dhursay .................... 36-37
26. Naagtii shaarubbo libaax soo goysey .... 37-39
27. Kaba-calaf iyo Huryo Ugaas ............ 39-49
28. Dawacadii iyo Libaaxii Lo'da lahaa ..... 50-
29. Tuuggii Faraska xaday ................ 51-53
31. Wiilaal iyo Wadaadadii dhiiranaa ....... 54-55
32. Gabadhii ragga Jirabtay .............. 56-59.

## 2GABADHII AABBAHEED IYO WIILKEEDII MIDBA MAR FUURSATEY.

Annagoo goor galab ah waxarihii soo rogayna, dhulkuna uu sayax yahay ayay hooyo Xaawo sheekadan iigu sheekaysay. Waxay tiri; Waxaa la yiri, nin baa gabar dhalay: Markaa buu xero uga guuray. Haweeney habar ah ayaa gabadhii inta heshay qaadatay oo korisay. Maalintii dambeeto ayaa ninkii dhaan soo kaxeeyey. Ceel biyo-yarood ah ayuu yimid. wuxuu ugu yimid inan qurxoon oo ceelkii ka dhaaminaysa. wuu haybsaday. Haddii cabbaar la wada joogey ayaa gabadhii hawo ka gashay. Arrin wuxuu wareegaba gabadhii buu guursaday. Waa uuraysatay!.

Gabadhu aabbaheed ma aqoon, ha yeeshee hooyadeed bay tiqiin. Waagii dambe ayaa hooyadeed maqashay in gabadheedii la guursaday, markaas bay u soo kacday. Markay timid ayay ogaatay ninka la sheegayaa inuu gabadhaba aabbaheed yahay. Gabadhii bay u sheegatay oo waxay ku tiri: "Naa hootooy! Ninka ku qabaa, waa aabbahaa". Gabadhii intay ceeb la joogi weydey ayay, iyadoo uur leh, isla habeenkii reerkii ka guuraysay. Waxay dhul martaba, iyadoo maraysa meel xeeb ah oo magaalo u dhow ayaa fooli qabatay. Wiil bay dhashay. Meeshiisii bay kaga dhaqaaqday. Nin carab ah oo taajir ah ayaa wiilkii helay. Wuu iska korsaday.

Muddo dhawr iyo labaatan sano ah hadday maqnayd, dad kalena ay carruur u soo dhashay ayay soo noqotay. Iyadoo garoob ah ayay xeebtii soo martay. Magaaladii inankeedu joogey ayay soo ballaysay. Inankii oo barbaar ah iyo carabkii oo magaalada taajir u ah gurigoodii ayay ku soo degtey. Inankii markii lays arkay ayuu jeclaystay inuu garoobtan iska guursado. Waa la heshiiyey, dabadeedna kolkii la aqal galay ayaa inankii-illeen waa hooyadiyey-u

himmoon waayey. Habeenkii haddii la kala fadhiyey ayaa la iswaraystay. Markaas buu wiilkii yiri, "Naa aabbahayna lama arag, hooyadayna lama arage, anigoo baddaas aal baa carabkani igala soo baxay!".

Hadalkaas markay maqashay ayay naagtii garatay inay haddana inankeedii guursatay. Markaas bay goosatay inay wiilka isu sheegto, illeen waa qof soo naxdin goysaye; dabadeedna waxay ku tiri:

"War ma ku dhalay, makuu dhaxay, hadda odayna mayna wada dhalay!

Halkaasuu wiilkiina ku ogaaday in qoftani mar hooyo u tahay, marna ay walaalo yihiin, marna ay naagtiisii tahay.

## 3SHIRWAC QOWSAAR.

Fiidkii annagoo waxarihii edegtii ku wadna, rahuna uu balli agtayada ka jiiq leeyahay, ayay hooyo Xaawo sheekadan iigu sheekaysay: Waxay tiri, Shirwac wuxuu ahaa nin diradiraale ah, Nin buu xoolaha u raaci jirey. Berigii dambe ayuu ka tegey. Nin kale ayuu u tegey. Kii baa yiri: Ninkii aad ala joogi jirey ayaan kaa soo waraysanayaa.. Ceebtaad leedahay haddaan kugu qaadan karo, aniga ayaad xoolaha ii raaci doontaa. Ninkii buu u tegey, markaas baa lagu yiri: Shirwac ceebi kale mallaha, waase nin diradiraale ah. Xoolaha si fiican ayuu kuugu dhaqaalaynayaa, Ninkii baa yiri: Ceebtaas markii aan ku ogaado waan iska ilaalin doonaa, haddase waan ciidan xumahayoo xoolahaan raacsanayaa.

Geelii buu raacsaday. Markaas buu si fiican ugu baylah tiray. Markaas baa ninkii shirwac jeclaaday. Wuxuu kula taliyey inuu diradiraynta iska daayo.

Berigii dambe ayaa ninkii meel u sodcaalay. Naagtiisii

ayaa shirwac u timid oo ku tiri: War waxaan u malaynayaa in ninkii naag kale guursaday oo inaan ogaado ayaan rabi lahaa. Shirwac baa,yiri: Haddaad rabto inuusan ninkaagu naaf kale guursan, markuu soocxdo, saanta uu ku hurdo, dhinaca madaxiisa ku abbaaran gooso, dabadeedna ku uunso.. weligii naag kale oon adiga ahayn ooqi maayo.

Naagtii baa inta jawaabtii la dhacday mindi sibib tumatay. Markuu ninkii yimid ayaa Shirwac u tegey. Wuxuu ku yiri: war ninyahow, aniga diradiraale ayaa ii taqaan. Haddaan wax kuu sheegi lahaana waxaan ka yaabayaa inaad iga hoos qaadi weydo..ha yeeshee nin wanaagsan oo aan jeclahay ayaad tahay..marka waxaan kuu sheegayaa, naagta aad qabto in belaayo ku didday intaad maqnayd, wax ku dhacayna garan maayo..intii oo dhan waxay ku dhaqranaysey inay mar ku disho..haddaad been iga moodeyso, ha hadlin, markaadse seexato is-ilaali..adaa wax arki doonee.

Ninkii baa iska tegey, isagoon hadalkii Shirwac rumaysan. Wuxuu isyiri:Bal jiraab oo ha la hadline sidii uu yiri iska yeel. Hadduu,wax yar hurday ayay,iyana istiri:Bal hadduu gam'aye, saanta uu ku hurdo, dhinaca madaxiisa xiga in yar ka soo gooso siduu Shirwac ugu tilmaamay. Markay mindidii la soo baxday ayuu isna isyiri: Wallaahi waa wixii shirwac sheegaayey oo way ku dili rabtaa! ; markaasuu isagoon waxba hubsan toorrey iska soo dhuftay oo naagtii labo u kala gooyey!.

Shirwac isna intuu orday ayuu u tegey nin ay naagta walaalo ahaayeen oo ku yiri:Walaashaa seeddigaa ayaa diley. Naagtii walaalkeed ayaa isna soo orday oo seeddigii oo halkaa taagan labo u kala gooyey!. Maalintii labadii qabiil oo naagtii iyo ninkeedu u kala dhasheen ayaa halkii isku dhammeeyey.

## 4. BELAAYO LUG LA'

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa, 'Belaayo ama lug la'ayd ama il la'ayd'. Belaayadu hadba reerkii guuraya aya dhinaca ka raaci jirtey, Kolkaa reerkii yiraa, 'belaayooy bayr, way ka bayri jirtey, reerkaan oranna way ku bayri jirtey. Habraha bay, iyagana, soomaalidu belaayo u tiqiin.

Habar baa, waxaa la yiri, naag u tagtay, isagoo reerku markaa degey, waxay ku tiri, "Naa waad gubatayo, kac oo soo qubayso oo soo uunso". Naagtii oo qubaysanaysa ayay habartii nin dumaashigeed ah u tagtay oo ku tiri: War heblaa kuu yeeraysa ee orod bal u tag" . Ninkii oo aan waxba ka war qabin ayaa u tegey dumaashidiis oo qubaysanaysa. Markaa buu inta naxay soo noqday. Habartii intuusan soo noqonba waxay u tagtay ninkii naagta qabey. Markaas bay ku tiri: "War heedhe, hooge, in naagta lagula qabo miyaadan ka war hayn?". Waxay raacisay, "Ninkii aad ilma-adeerka ahaydeen ee hebal ahaa waa kaa guriga kula jira ee bal orod soo eeg".

Ninkii baa soo ordey. Ilma-adeerkiis ahaa oo gurigii markaas ka soo noqday ayuu arkay. Kolkuu [illegible] oo u arkay naagtii oo qubaysanaysa ayuu dib isu soo rogey. Kii ay ilmo-adeerka ahaayeen oo halkaa taagan ayuu waran qaatay oo isaga tallaabiyey. Isagiina mid kale oo kaa la diley ay walaalo ahaayeen ayaa haanka ku dhuftay.

Halkii baa reerkii oo dhammii isku wada laayey oo birta lays r ruubiyey, wax meyd ah mooyee wax kalana la waayey.

## 5. OOHINTU ORGIGA KA WEYN

Nin baa gabadhiisii nin u meheriyey oo maal ka qaatay. Gabadhii ayaa ninkii aad u jeclaatay. Maalintii dambe ayaa dagaal xumi dhex maray reerkii uu ninkeedu ka dhashay iyo reer kale. Goor barqo ah ayaa gabadhii loo soo sheegay inuu ninkeedii dirirtii ku dhintay.

Gabadhii ayaa si weyn u naxday, si ay u ooydana way garan kari weydey. Waxaa dhacday inuu orgi yaru isla maalintaas ka dhintay. Markaas bay sidii wax orgigii u barooranaya oohin ku dhufatay, "Alla orgigaygiiyow...alla orgigaygiiyow".

Aabbaheed ayaa gartay oo ku yiri, "Aabbo oohintu orgiga ka weyn!"... oo raaciyey, "Aabbo ma ninkii baad u ooyeysaa ?". Markaas bay iyadoo xishoonaysa iska qiratay oo tiri, "Haa!".

## 6. SALIILYOONNEY OO SI KALE NOQONNAY!

Waxaa la yiri, waxaa jirey nin doobnimo ku weynaadey, nacasna ahaa. Geel badan ayaa aabbihii uga dhintay, markaas buu siduu u daba joogey caqligiisiiba sida xoolaha noqday. Weligiis wax baa la guursadaa muu maqal. Ninkaasi intuu xoog ka qabey, waxaa la yiri, guskiisa ayuu lafaha ku jebin jirey oo dhuuxa ugala soo bixi jirey! Markuu maradii xagsan waayey ayuu saanta idiinta ah hoos ka guntan jirey!

Berigii dambe ayaa dhallinyaradii ku kacday do dameeen inay naag u guuriyaan. Naagaha ayaa looga sheekeeyey waxa lagu yiri, "Wax macaan ayaa guurka laga helaa oo naaguhu leeyihiine naag guurso." Naag baa loo soo xodxoday oo la oggolaysiiyey, loona dhisay. Naagtii markay aragtay inuu nacas yahay ayay xagasheeda u dhigi jirtey markuu u galmoonaayo. Muddo wuxuu meeshaas wax ka doontaba maalintii dambe ayaa la weydiiyey oo la yiri, "War bal ka warran macaankii ?" Wuxuu yiri, "Weligeyba waxan oo kale maan arag! Maxaad awel

iigu sheegi weydeen ee aad iiga qarinayseen?". Markii la weydiiyey siduu naagta wax uga doonto ayuu xagashii tilmaamay.,Markaas baa la yiri, "war nacasyahow, naagtu way ku sirtaye, wixii macaanaa labada lugood dhexdooda ayuu ku jiraa..labada lugood ku abbaar oo horay ugu sii soco".

Habeenkii markii laysu soo hoydey ayuu yiri, "Wallee wax la ii sheeg..wallee wax la ii sheeg!".. oo in cabbaar ah ku celceliyey. Markaas buu, iyadoo yaabsan, gogoshii la kor fuulay oo hoos u galay halkii ay dhallinyaradu u soo tilmaameen.

Dhawr habeen markuu saa ku shaqaysanayey ayuu subax subaxyada ka mid ah reerkii guuray. Illeen waa nacas wax aanu arki jirin dhadhamiyaye, reerkii oo socod ku jira, ayuu naagtii ku dhegey;" Naa wax macaan sidatooy...naa wax macaan sidatooy,.naa wixii macaanaa i sii!". Markaasay inta garatay ku tiri, "war wixii macaanaa.xeradii baan ku soo illoobaye kac oo raaskii ka soo qaad!".

Halkii buu orod isdhigay. Markuu xeradii tegey ayuu arkay abeeso hog madaxa kala soo jeedda. Abeesadii oo afka kala haysa ayuu alaabtii moodey oo guskii afka u geliyey. Abeesadii raabsatay.,Markay suntii gaadhay oo uu xanuunsaday ayuu qylo ku dhuftay, "Saliilyoonnay oo si kale noqonnayeey!.. war hooy siilow na sii daa!. Siduu sidaas u lahaa ayuu meeshii ku naf baxay.

## 7. QURBAC QOYAN

Nin reer magaal ah ayaa, isagoo reerihii miyiga la jooga, qurbac yari ka lumay. Maalintaas qurbacu lumay maalintii ka horreyseyna roob baa inta da'ay wax wlba qooyey. Markaas,buu qurbicii baadi doonay. Geeljiruu u tegey oo ku yiri, "War waxba qurbac qoyan ma aragteen?". Inta la qoslay

ayaa lagu yiri, "War qurbaca hagaaf u tilmaamo". Markaas buu yiri, "Qurbacaygu tilmaan kale maleh..markii iigu dambeysey wuu qoyanaa oo keliya!".

Waa lagu qoslay oo waxaa la ogaaday inuu yahay reer-magaal aan tilmaanta xoolaha aqoonnin. Markaas baa qurbacii lala raadshey oo loo soo helay.

## 8. NIN UGAARSATO-AH IYO NAAGTIIS

Nin ugaarsato ah ayaa naagtiisii,oo uur lihi ku tiri, "Dacar baa i haysa". Markaas buu yiri, "Hadday dacari ku hayso, gubadkaan gubi doono, biciidka daaqi doona, ee aan dili dooho, sumkaan ka jeexi doono, sabeenta aan siisan doono, sumalkay dhali doonto, subaggiisa adaa dhalayee dhan". Markaas bay tiri, "war adigaa ganayey dhan", markaas buu yiri, "naa adaa dhalayee dhan". Markaas bay tiri, "war adaa ganaye dhan". Ninkii baa inta xanaaqay naagtii fallaar sumaysan ku dhejiyey oo yiri, "Sidee bay hadal iigu soo celin kartaa!".

## 9. DAD LADNAAN MA XEJO

Naag aabbaheed ugaas yahay ayaa ugaasnimadii qabsatay markuu aabbaheed dhintay. Guri dheer bay geli jirtey. Aqalkeeda duleedkiisa waxaa ku yiil geed laamo badan. Geedka shinbir baa degganayd. Shinbirtu laba siyood ayay u ciyi jirtey. Kol waxay oran jirtey, "Dad ladnaan ma xejo", kolna waxay oran jirtey, "Dhereg lama xejo".

Maalintii dambe ayaa waxaa meeshii soo maray nin aabbihiis ugaas ahaan jirey oo kaçay intay abaar xumi dhulka ku dhufatay. Ninkii baa yiri, "Allaylehe, anaa xejin lahaa dhereg haddaan maanta helo". Inantii ugaasadda ahayd ayaa maqashay, Markaas bay u yeedhay. Waxay tiri, "Haddaad ladnaan

heli lahayd ma xejin lahayd?". Markaas buu yiri, "si dhab ah ayaan u xejin lahaa", Gurigii bay soo gelisay, dhar fiican ayay u lebbistay, isla markiina wayba guursatay!. Alaabtiisii uu ku qarafaysan jirey intay ka qaadday ayay sanduuq meel yaal ku xirxirtay.,Waxay tiri, "Gurigii waa kaas.,waxaad rabto qaado oo eeg, laakiin sanduuqaas ha eegin, hana i weydiin waxa ku jira". "Waa tahay" ayuu yiri

Muddo h adday wada joogeen oo meeshii uu isagu xukunkeedii qabsaday, iyadiina ku ilbaxay ayuu yiri, "Naa maad i tustid sanduuqaas waxa aad ku qarinaysid". Markaas bay ku diiddday oo ku tiri, "Miyaanan ku oran sanduuqaas iska illow oo waxaan jirin ka dhig", Markaas bay tiri, "I sug waa tahaye".

Dibadda intay aqalkii uga baxday ayay afar askari oo xoogag waaweyn soo kaxaysatay. "Qabta oo dharka ka dhiga" ayay ku tiri. Markii dharkii laga dhigay ayay sanduuqii soo qaadday. Hortiisii bay ku furtay. Markaas bay ka soo bixisay dharkiisii hore ee calallada ahaa iyo saamihii uu dhaxanta ka huwan jirey ee dildillaacsanaa. Wixii bay inta sanduuqii ka soo saartay hortiisa dhigtay oo ku tiri, "Sanduuqaa i tusi iska deyn weydaye, waa kaase qaado, irriddana ka bax!!". Qoortaa inta la qabtay dibadda loo tuuray, Markuu geedkii hoos tegey ayuu maqlay shinbirtii oo leh, "Dad ladnaan ma xejo..dhereg lama xejo". Markaas buu yiri, "Wallee waa runtaa..marag baan kaaga ahay, saa haddii nin xejin la aamigaa xejin lahaa oo aan calalladaydii ku rooreene!!!.

10. Siini waa siin Ilaah

Nin boqor ah ayaa gabar dhalay. Gabadhaasi gabar iimaan le ayay ahayd. Wax alla wuxuu aabbaheed siinaayo markay ka qaadanayso waxay oran jirtey, "Aabbe siini waa siin Ilaah". Hadday wax bixinayso iyo hadday wax qaadanaysaba waxay oran jirtey sidaas. Boqorkii ayaa hadalkaas gabadhiisii kaga xanaaqay. Wuxuu yiri, "Gabadhan yar ee aad adigu dhashay ee wax alla waxaad siisaba ku leh 'siini waa siin Ilaah" Maxaad kaga ciil baxdaa?".

Nin cayr ah oo aan bar xoolaad lagu ogeyn ayuu u yeeray, gabadhiina wuu u yeeray. Wuxuu yiri, "Gabaryahay, ninkaas baan ku siiyey..waa inaad kolka ninkaaga raacdaa oo aad teerkayga iiga baxdaa". Gabadhii baa tiri, "Waa tahay aabbe.. siini waa siin Ilaahe". Markaas wuxuu boqorku rabaa intay ay iska dhaafto. Ninkeedii ayay gacanta isqabsadeen. Magaaladii aabbaheed ayay isaga baxeen. Waddan kale ayayna aaddeen. Halkii bay iska degeen, ninkiina maalin walba intuu suuqa galo ayuu wuxuu ka soo helo iyada ula imaan jirey.

Waxay sidaas ku noolaadaanba, iyana "siini waa siin Ilaah" ku haysaba, maalintii dambe ayuu ninkii safto wax ka kaxeeyey. Iyadii buu xoogaagii lacagta ahayd ee la siiyey wax uga tegey oo safarkii iska daba galay. Safarkii baa yimid ceel la har geli jirey, biyahana laga dhaansan jirey. markaas baa ceelkii inta isagii loo xiray la yiri, "Biyaha inaga soo waraabi". Markuu ceelkii isyiri "ka soo bax" ayuu helay saddex shay oo buurbuuran. Wuxuu moodey liin. Markaas buu labo xabbadood niman beladkey ka yimaadeen u jeeda naagtiisii ugu dhiibay. Isagu wuxuu isleeyahay, "waa liine, ha iska cuncunto".

Ina boqor markii labadii xabbadood loo keenay ayay mid furtay oo kala dilaacisay. Mise waxaa gudaha uga buuxa

dahab cascas. Farxad bay is-hayn weydey. Markaas bay tiri, "siini waa siin Ilaahoo, ilaah baa na siistay". Markii bay inta xabbaddii la orodday ninkii beledka boqorka u ahaa, u geysey. Waxay ku tiri, "Noo sarrif". Boqorkii baa yiri, "Baddaadan bar daaro iyo xoolo u qaadanayn, Ma sarrifi karo!" "Daaraan u qaadanayaa" ayay tiri. Markaas bay afar shan fookh oo cirka ku jaran qaadatay, lacagna sanaadiiq ka buuxsatay. Meeshii bay si wacan isaga degtey.

Maalmo ka dib ayaa ninkeedii soo laabtay. Sidii uu u soo socdey ayuu buulkii uu kaga tegey soo balleeyey, Mise, ma joogto. Naxdin ayaa beerkii kala go'ay oo wuxuu isyiri, "Naagtaadu way qurux badnayde, malah intaad maqnayd baa lagaa qaaday!" Deriskii buu weydiiyey, markaas baa lagu yiri, "Beledkaba bar bay leedahay!". Halkay ku jirtey ayaa la tusay. Markaasuu isagoo calalkii xumaa sidii u qaba isyiri, 'irridda ka gal'. Addoomadii baa celiyey oo u diiday. Isagoo quustay oo fookhii hoostiisa warwareegaya ayay ina-boqor aragtay. Intay soo orodday ayay dhunkasho ku waashay. Way kaxaysey oo gurigii bay geysey. Markaas bay tiri, labbadii xabbo ee aad ii soo dirtay ee aad liinta moodeysey ayaa wada dahab ahayd. Xabbadii labaad ayay inta meel ka soo bixisay tustay. Wax alla wixii boqor ahaa oo dhulka joogey ayay martisoor u sameeyeen. Halkii bay ku marti qaadeen oo hadba guri geeyeen, hadbana meel tuseen. Boqorra-daas waxaa ku jirey kii inanta dhalay oo aan markaas gara-nayn.

Dhawr toddobaad markii wax la cunaayey ayaa maalintii dambe boqorradii, oo meel fadhiyaa, sheekaysteen..kii inanta dhalay ayaa yiri, "war nimanyahow, gabar yar oo aan beri dhalay ayaa had iyo jeer oran jirtey, 'siini waa siin Ilaah'

..alla run badnaydaa;; bal dadkaan waxa uu Alla siiyey eega'.

Gabadhii oo maqlaysay oo meel agtooda ah fadhiday ayaa soo booddey oo tiri, "Aabbe waa aniga inantaadii!".

Halkii baa laysku gacan qaaday oo boqorkii soddogga ahaa maal iyo xoolo badan lagu siiyey.

11. DHIISHII SAMAWADA.

Waxaa la yiri: labo gabdhood ayaa wlaalo ahaa. Labadoodaba tii yarbaa qurux badnayd. Kolkaa tan weyn oo iyadube aan foolxumayn ayaa Samawada la oran jirey. Ninkii boqorka ahaa ayaa inuu guursado damcay. Labadii gabdhood tii yarayd ayuu guursaday. Caadaduna waxay ahayd inaan gabar walaasheed ka yar la dhaafinnin oo yar la hor guursannin. Maxaa yeelay marba haddii tan yar la hor guursado, gabadha weyn waa laga wada baryeelan jirey. Boqorkii caadadii buu khilaafay. Markaas bay tii weyneyd walaasheedii ka yarayd colaad uurka ugu qaadday.

Berigii dambe ayay tii boqorku qabey uur yeelatay. Waxana caado ahaa in naagtii dhalaysaba qof xigaa la joogo oo ka ummuliyo. Markaa labadii walaalaha ahayd ayaa laysu daayey oo Samawada ayaa la yiri: Walaashaa ilaali, kana dhali. Samawada waxay samaysatay dhiil; markaas bay ku soo ridatay dabagaalle iyo bisad. Meesha haweenka lagaga ummuliyaana waxaa weeye webi korkiis oo sidii guri ahaan loo dhisay, si madheerta iyo dhacaanka loogu rido, iyadana loogu mayro.

Gabadhii ayaa wiil dhashay. Samawada ayaa wiilkii webiga ku ridday, ileen walaasheed bay la collowdaye. Markaas bay soo qabsatay bahal amae la yiraahdo. Amihii ayay goyaan marmarisay. Boqorkii ayay u geysey oo ku tiri: Naagtaadii qof ma dhaline waxay dhashay ame.

Sannadkii dambe ayay haddana uuraysatay. Samawada ayaa loogu yeeray. Sidii bay yeeshay oo wiil kale ayay webigii ku tuurtay. Markaas bay bakayle ay sidatay boqorkii u geysey oo ku tiri, "Maantana waxaan bay dhashay!" Dadkii oo dhan ayaa yaabay. Sannadkii saddexaadna sidoo kale ayay Samawada yeeshay. Gabar bay ka ummulisay. Markaas bay webigii ku shalwisay, boqorkiina intay bahal dhido la yiraahdo u geysey ku tiri, "kanay dhashay!".

Boqorkii markaa wuu xanaaqay oo naagtiisii ayuu guri cidlo ah ku xirtay. Addoommo ayuu u diray oo ku yiri, "Halkaa wax ku siiya oo yaan cidina u soo gelin". Webigii ay samawada carruurta ku daadin jirtey meesha uu ku dhammaado waxaa degganaa nin taajir oo alla xoolo u dhiibay. Ninkaas oo ma-dhalays ahaa ayaa saddexdii carruur ahaaba qaatay oo korsaday. Carruurtii markay waaweynaatay ayaa odaygii iyo habartii ma-dhalayska ahaaba ka dhinteen. Caruurtii oo meeshii joogta ayaa waxaa u yimid boqorkii aabbahood ahaa oo aan garanaynin. Quruxdoodii ayuu la yaabay, markaas buu yiri, "anigaa saddexdiinnaba shaqo idin siine, ina keena". Markuu soo kaxeeyey oo la iswarasaday ayaa la yiri: War odaygii halkkaa degganaa wax ma dhali jirine, xaggee carruurtani ka timid. Waxaa loo maleeyey naagtii guriga cidlada ah la geeyey inay carruurtan dhashay. Markaas baa la yiri, "Caruurta aynu naagta u geyno..haddii jiirku u dhaqaaqo, waa carruurteedii oo bahalo ma aya dhali jirin". Sidii baa la yeelay. Mar alla markay carruurtii aragtay ayay naagtii iska wada jiriiricootay. Markaasaa indhihiina ilmo ka soo daadatay, naasihiina caano ku soo joogjoogsadeen. Halkii baa aqalkii cidlada ahaa laga soo waday oo loo mayray, ciddiyihii laga jaray, boqorkiina kula soo noqday. Waxaa la ogaaday inay samawada khiyaamada samayn jirtey. Markii la weydiiey ayay tiri, "Aniga oo

ka weyn markii la i dhaafshay ayaan col u qaaday, dabadeedna waan ka aar goosanayey". Samawadana waa la cafiyey oo nin baa isla maalintaa, loo guuriyey

## 12. KII AAN DHALAY KABIHIIII BAA KA LUMAY

Habar baa wiil keliya dad ka lahayd. Wiilkii baa duuley. Goobtii dagaalka ayaa lagu diley. Markaas bay inta is-adkaysay colkii soo laabtay ku tiri, "Aan gablamo aniguye, goobtii yaa joogey?"... oo waxay ka baqday in tolkii laga adkaaday.. markii dambena madinnimadii iyo gablannimadii ayaa qabatay oo iyadoo ooyeysa ayaa waxaa u timid habar kale oo aan wiilkeedii dagaalkaba tegin. Markaas bay tiri, "Naa heblaayo maxaa ku helay?". Markaas bay tiri, "Madigii keliyahaa ee aan dhalay ayaa dagaalkii lagu soo diley". Tii kale ayaa tiri, "Wallee madiley loo soo dhigay, anigana kii aan dhalay kabihii baa ka lumay!!!. Sow ma kala laxaw foga?.

## 13. XIDINXIITO.

Xidinxiito siyaalo badan ayay u eg tahay. Waddanba si gooniya ayay u eg tahay. Haadda kale way eryootaa oo sidii wax waxyeellayn kara ayay kolkay aragto ka hor tagtaa oo dabannaanaysaa.

Gaar bay u socotaa sida badan.Habeen oo dhanna ma seexato. Maxaa ugu wacan?.

Waa baa waxaa la yiri; waxa haalka leh oo dhammi oo haadku u madax yahay israaceen. "Aan hilib doonanno" ayaa laygu heshiiyey. Waxay qasheen neef gool ah. Hilibkii bay cuneen. Markaas baa la yiri, "hilibka bar aan dhiganno oo u qaybinno ilaalo bahalka inooga celisa". Sidii baa la yeelay. Iyadoo la

hurdo ayaa, xidixiito mooyaane, intii kale isu baaqday oo inta la istusiyey hilibkii la cunay. Markii la dhammaystay ayaa la arkay xidinxiito oo hurudda, Markaas baa la yiri, "kol haddaan hilibkii dhammaysannay, ha kicinnina ee inaga keena ha iska hueuddee". Waa laga tegey. Subaxdii ayay toostay, markaas bay haad oo dhan midnaba ka weydey. Hilibkii oo la dhammaystayna way aragtay. Markaas bay dhaar martay oo waxay ku dhaaratay:

Haddaan haadow ku raaco
Haddaan hurdooy ku seexdo
Haddaan hilibow ku doonto
Aabbahay xiid baan xarrago dhalin!!

Xidinxiito dhaartii way oogisay oo hadda haadda kale ma raacdo, hurdana ma seexato, hilibkana ma cunto.

## 14. RAH IYO WIILKIIS "WAQAAF"

Biyuhu balliyada, waraha iyo jidhaamaha markay ka guraan waxaa ku dhasha wax yaryar oo lunlumo la yiraahdo. Lunlumadaasi haddii ay wax yar joogto waxay noqotaa miro-xareedaad. Haddii ay ka weynaatana wuxuu noqdaa rah, markuu muddo joogana wuxuu noqdaa diin-biyood ama diin-ceeleed.

Soomaalidu, raha waxyaalo badan bay ka sheegtaa; Qolo waxay tiraahdaa, "Markuu rahu jiilaalkii biyo waayo ayuu deyn sii qaataa oo waa qaamoobaa. Ninka qaanta ku leh ayuu ku yiraahdaa, "marka barwaaqo timaaddo ii imow waxaagii baan ku siinayaaye". Misna markii roobku da'o oo uu biyo dhex dabaasho ayuu iska raaxaystaa oo wax walba halmaamaa. Ninkii qaanta ku lahaa markuu u yimaadana maba dhugto. Haddii ninku weydiiyo waxa helayna wuxuu yiraahdaa, 'reer tolkay ayaan la waashay'. Markaas buu iska ciyaa, 'dhaa.. dhaa..

Qolo kalena waxay tiraahdaa, "Rahu wiil buu dhalay. wiilkiisii ayuu waqaaf u bixiyey. Deynba ma qaatee wiilkiisa waqaaf ayuu jiilaalkii markuu dhoobada ku dhegsan yahay iska cunaa. Marka dambe ee roobku da'o oo uu biyo ka durduurto ayuu ismoodaa inuusan wiilkiisii cunin. Markaas buu inta xareeddiisa iyo aarankiisa dhex galo yiraahdaa wiilkaygii ayaan u yeeri. Markaasuu ku dhawaaqaa, "Waqaaf! waqaaf! Waqaaf! Waqaaf!..

## 15. XASNA-XEEL-bADAN

Sasna-xeel-badan waxay ahayd naagta tiri, "reer rag leh roob sidaas ma u galaa". Maxay u jeeddaa? Reerka ay sheegaysaa meel biyo-mareen ah ayuu degganaa. Waxay rabtey inuu raggu reerka biyaha ka duwo si aysan u qaadin. Raggiina way dhalliishay. Xasna waxay ahayd naagta,maahmaahdaa bixisay. Waxay kaloo caan ku tahay inay tiri, "ragga cad ceeriin iyo,caano xoor leh midna ha tusina, calafkiisana kala qariya, ciidankiisana isu geeya".

Xasna-xeel-badan waxay xeeli jirtey wax alla waxay samayso oo dhaar-dusmo waxa la yiraahdo ayay ku aqdaaman jirtey. Waxay tiqiin gogol-dhaafka oo ninkeedii ayaa tuhmay. Dadkii ay sebenkaas ku dhex jireenna waxay isku dhaarin jireen buur. Waxay oran jireen, "Ma tay buurtaasi ku qabataa baa?". Waxay rumaysnaayeen qofkii buurta been ugu dhaarta intay qabato inuu dhimanaayo!.

Nin bay xasna gogol-dhaafka wada samayn jireen. Markaasuu ninkii ogaaday in laga bartay. Wuxuu ku yiri: "Xasnooy, waan sodcaalayaa". Markaasuu baxay. Show ma tegine meel qolqol ah ayuu u galay. Ninkii kale ayaa soo galay. Xasna-xeel-badan baa waxay tiri, "War waxaan ka baqayaa

inuu ninkii meelaha ka dhowya, aye, caawa inoo ahaan maysee bal horta cuntadaan ka dhereg, dabadeedna habeen kale ha inoo ahaatee iska tag". Ninkii baa hunguri-xumo qaadday oo markuu dhergey ayuu yiri. "Naa maahee..ninkii ma dhowa ee aan iska heshiinno oo dhammaysannee naga daa hadalka tiradiisa". Hadalkii hadduu ku celceliyey, iyana ay wax yeeli weydey ayuu ninkeedii la soo istaagay oo ku yiri, "War ninyahow wax lagu sii oo wax aad cunto ayaa lagu siiyey, waxba laguu sheeg oo inaanan fogeyn, laguu sheeg, waxna laguu qaad oo waa laguu mohoro qaaday, waa dambe soo noqona lagu yiri. Haddaba ma mid wedkiisii galay baad tahay, maxaa meesha ku dhigay?".

Markaas buu ninkii intaan la aqoonsan iska fakaday. Xasna ninkeedii ayaa odayaashii dadka u garniqi jirey u tegey. Xasna -xeel-badan ayaa lagu yiri, "Waa inaad buurtaa ugu dhaaratаa inaadan waxba samayn. Ninkana aad tuhunkaba ka bi'isaa". Markaas bay xasna naxday oo waxay ka cabsatay hadday ku dhaarato buurta inay dhimato. Markaas bay waxay tiri, "aa yahaye, dameer ii soo kireeya". Ninkii ay la ninkii shaqaysan jirteyna hoosta ayay farriin uga dirtay oo waxay tiri, "Dameer lagaa i jaarto soo kaxayso". Markay dameerkii fuushay ayay tiri, "Ninka dameerka lihi waa inuu garka qabtaa oo kaxeeyaa". Markii buurtii loo soo dhowaaday, ayay dameerkii iska tuurtay oo cawradii bannaysay, Ninkeedii iyo kii kale ayaa ku soo wada orday oo maradii ku qabtay. Dameerkii inta mar labaad la saaray ayaa buurtii la geeyey. Markii dhaaro la yiri ayay tiri, "Inaan ku dhaaranayaa, waa tii buurtaasi i qabataa". Sidaas bay ku dhaar dusmaysey oo dhaartii buura kaga baxsatay.

Berigii dambe ayay wiil dhashay. Wiilkii ayaa

weynaaday oo naag guursaday. Wiilkii ayaa aabbihiis u yimi berigi yimid berigii dambe oo ku yiri, "Aabbow, naagtaydii waan furayaa!" furayaa!" "Maxaa dhacay" ayuu weydiiyey. Wuxuu yiri "Waa tuugo oo waa xoolo moog tahay oo waa dillo!". Markaas buu odaygii yiri, "Maandhow intaas oo dhan ayaan hooyadaa ku hayaye, naagtaada ha iska furin!". Wiilkii baa carooday oo yiri, "Maxaad aabbe hooyaday u caayaysaa?". Odaygii baa yiri, "Ina keen, anigaa ku tusiye".

Wiilkii buu soo kaxeeyey oo intuu xasna u yeeray , ku yiri, "Naa aniga iyo inanku geelaannu aroorinaynaaye, awrka halkaas ku dabran ee koorta leh ilaali". "Waa tahaye iskaga taga anigaa dhawriye" ayay tiri. Markaasuu odaygii inta markiiba awrkii u weydaaratey dabarkii ka ruray oo geelii ku daray. Koortii ayuu geed halkaan ah ku xiray. Maalintii oo dhan waxay maqnaadaanba fiidkii ayay gurigii yimaadeen. Markaasuu odaygii yiri, "Naa awrkii mee". Markaasi bay ku tiri, "War waaka halkii aad ku dabartay jooga oo maba uu dhaqaaqine, orod hooyo hebelow soo kaxee". Odaygii baa markaas inankii ku yiri, "Haddaba inay hooyadaa xoolo moog tahay sow maad arag?..ina keen anaa labada kalena ku tusiye".

Odaygii Xasna ayuu u yeeray. Wuxuu yiri, "Naa heedhe bal aniga iyo wiilka maanta oodkac noo samee oo meel noo dhig oo cid kale ha naga siin". Wiilkii buu ku yiri, "Oodkacaas cuni mayno..maalin walba inta dusha ah ayaynu ka burburinaynaa, dabadeedna waan ka tegeynaa". Sidii bay yeeleen. Maalin walba madaxa ayay burburiyaan sidii wax la cunay, markaas bay ka tagaan. Xasna-xeel-badan intay soo daba marto ayay inta googo'an iska cuntaa maalin walba. Wax yar ka dib ayay xeeradii dhammayd nag noqotay. Odaygii ayaa wiilkii yiri, "Haddaba ma innaga xeeradii cunnay, mise hooyadaa?". Wiilkii markaa wuu ogaadey in hooyadii

ay tuugo taqaan oo ay iyadu xeeradii nag ka dhigtay.

Maalintii dambe ayuu odaygii haddana wiilkii soo kaxeeyey. Mas bay soo dileen. Guriga duleedkiisa markay marayaan ayuu yiri, "Dhulka isku dhufo oo qayli sidii wax la qaniinay". Wiilkii baa sidii yeelay. Odaygii intuu maskii dhinac dhigay ayuu qaar la dhacay sidii wax uu hadda dilayo. Markaas baa aqalladii laga soo yaacay. Odaygii baa yiri, "Naagtii mar keliya nin aan ninkeeda ahayn taabatay hadday inanka taabato wuu dhimanayaa ee naagayna ha,u soo dhowaan, hooyadii mooyee". Xasna ayaa soo orodday, markaas bay tiri, "Alla mar wax ma leedahay?". Markaasuu yiri, "Labadaa daran mooyee, mar wax ma.laha adiga!". markaas bay tiri, 'laba wax ma leedahay'..ilaa ay toban gaarsiisay, siduu u lahaa, 'intaasi wax ma aha ee intaas baa daran'.

Halkaas buu odagii wiilkiisii kula taliyey oo yiri, 'waxaad sheegtay oo dhan hooyadaa baynu hadda ku haynaaye, kac oo naagtaadii iskaga noqo'.

## 16. NIN AAN KIBIR JEBIN MAROODI MA JEBIYO.

Reer baa guuray. Waxay ka guureen dameer iyo eey. Eygii oo habeenkii duleedka hurday iyo dameerkii oo duddada, jiifey ayaa subaxdii isu yimid. Markaas bay yiraahdeen, 'aan reerkii raadinno'. Waxay socdaanba duhurkii ayay biyo heleen. Markay cabbeen ayay casarkii doog heleen. Dameerkii baa yiri, "Anigoo aan dooggaan cunin ka tegi maayo". Markuu dhergey ayuu yiri, "war wax baa i haya?". Eeygii baa yiri, "Maxaa ku haya". "Waxaa i haya inaan ciyo". Eeygii baa yiri, "war goor habeen ah,ayaynu joog-n-aa. Bahal oo dhammina waa ina ag joogaaye, ha inagu ciyin".

Dameerkii baa maaro loo waayey. Markaas buu ci ku ci ku dhurtay. Hadduu cabbaar aamusnaa ayaa laba waraabe hareeraha kaga soo baxday. Dameerkii baa la qabtay. Eeygii baa la yiri, "Adiga waanhu iska kaa dhaafaynaaye, dameerka noo qal". "waa tahay".buu yiri...oo halkii buu saaxiibkii qalliin ugu dhaqaaqay.

Markuu eygii qalay dameerkii ayuu wadnihii u hungurooday. Wadnihii buu iska cuhay. Markuu waraabeyaashii hilibkii u keen-ay ayaa la yiri, "War wadnihii mee?". Eeygii baa yiri, "war dameerku wadnaba ma lahayn..inuusan wadne lahaynnna waxaa idiinkugu daliil ah; idiinma qayshadeen oo idiinma yeerteen isagoo dheregsan.

Halkaas baa eeygiina ku fakaday, dameerkiina lagu cunay, dabadeedna waxaa baxday maahmaahda lay yiraahdo: Nin aan kibir jebin maroodi ma jebiyo.

## 17. WARAAB E IYO WAN

Waxaa la yiri, waraabe aan weligiis hilbo fiican cunin ayaa maalin helay wan weyn oo baruur la dhaqaaqi waayey Markaas buu hilib iyo hargaba cunay oo uu lafihiina ruugay. Markaasuu inta kayn dhex galay oo damal hoos macaan lac yiri ayuu jirjirka isku legday, dabadeedna hurdo uusan weligiis seexan dhag la yiri.

Afar maalmood markuu hurday ayuu soo baraarugay isaga oo gaajaysan. Wuxuu isyiri, 'intaad kacdo maad wankii oo kale maantana soo cuntid. Waa oroday, isagoo ku dhawaaqaya "Wanow! Wanow! Wanow! ". Markaasuu wankii calooshiisa ku jirey yiri "Macaac!" . Wuxuu u qaatay inuu soo dhaafay. Dib buu u noqday. Waa orday oo orday oo orday. Wuxuu ordaba wuu istaagay. Markaas buu dhawaaqay"Wanow! Wanaw! Wanow!. Hadana wankii baa calooshiisa ka ciyey oo yiri, "Macaac".

Lib buu u cararay, Maalintii oo dhan wuxuu hadba gees u cararaba goortuu daaloy ayaa cirka lagala hadlay oo lagu yiri, "Waraabow, wankaad raadinaysaa, wuu ka calooshaada ku jira oo kala soo bax oo cun!", Markaas buu galgashay...oo galgashay... oo galgashay oo siduu u galgalanaayey naftii kaga baxday.

## 18. LIBAAX IYO NIN IYO RIi

Waxaa la yiri, nin baa rii watay. Goortii gabbalku u dhacay ayay ridii u socon waydey. waana gaadi waayey. Wuxuu helay mundul cidlo ah oo laga guuray, hase ahaatee irridkiisa iyo dhismihiisu hagaagsan yihiin.

Wuxuu ku tashaday inuu riida mundulka ula hoydo inta waagu ka beryaayo. Mundulkii buu galay. Ridii buu udubka ku xirtay. Intuu irridkii xiray ayuu iska seexday.

Waa ku dhowaad markay ahayd ayuu baraarugay. Wuxuu isyiri, 'soo kaadi'. Irridkii buu furay. Intuu baxay buu mundulkii gadaal kala wareegay oo kaadi u fariistay.

Intii uu maqnaa baa mundulkii libaax dalaq yiri. Ninkii oo aan ogeyn in libaax mundulka ku jiro ayaa galay, illeen waa mugdiye. Irridkii buu xirtay oo iska seexday. Gabbaar markuu jiifey buu libaaxii ridii qabsaday, markaas bay ridii qaylisay. Wuxuu u qaatay, inay ridu xariggii isku naafay. Intuu kacay buu isyiri, 'rida xarigga ka hagaaji', hase ahaatee isna libaaxii baa qabsaday!.

Libaaxii goortuu ridii iyo ninkiiba diley oo un hilbahoodii cunay dhiiggoodiina ka wabxay ayuu,isyiri. 'Meesha ka bax', hase ahaatee sidee buu u bixi, illeen irridkii wuu xiran yahayo. Labo beri markuu libaaxii mundulkii ku jirey ayuu maalintii saddexaad ciyey.

Dadkii dhulka joogey ayaa cidii maqlay. Qofba qof buu warsaday meesha uu libaaxu ka ciyaayo. Meel walba waa la baaray, ilaa la iska wada hor yimid. Goor dambe oo la daaley ayaa la ogaadey inuu libaaxu mundulka ku jiro, markaas, baa la hub doontay oo libaaxii dariishad laga toogtay, mundulkiina lagu dhex diley.

## 19. HABARTII MALKHADO

Malkhado haweenku guurka ayay kala tashan jireen, ragga ninkii naag doonayaana wuu la tashan jirey oo wax buu siin jirey. Ninka iyada soo mara oo wax siiya gabadha uu rabo ayay u keeni jirtey.

Nin baa u yimid malkhado iyo haween kale oo ay ku jirtey, markaas buu yiri, "Haweenow, maanta waxaan rabaa inaad i kaalisaan". "Maxaannu lugu kaalinnaa" ayaa la yiri. "Xoolo idinkama rabo" ayuu yiri. "Inanta ina heblaayo ayaan rabaa.. marka waxaad ii samaysaan, markaan= = idin ay maraayo ii ammaana oo waxaad tiraahdaan, 'alla haddaad ninkaa guursan lahayd maxaa barwaaqo dhex geki lahayd".. Gabadha iyo isaguna weligood isuma ay imaan. Haweenkii baa yiri, "Waa tahay". Gabadhaasina rag oo dhan bay intii muddo ah diidi jirtey.

Afar beri markay haweenkii inantii ninkii u ammaaneen ayay ninkii ku, waalatay oo iska jeclaatay. Malkhado ayaa isjeclaysiisay, sidii, bayna isku guursadeen. Sidaa oo kale ayay ragga oo idilu u soo mari jireen oo ula tashan jireen.

Nin baa yiri, "anigu haddaan wax isjeclaysiin waayo anigaaba nacas ah.. ee yaan Malkhado waxba i jeclaysiin.. Markaas bay tiri, 'bal waa tahaye guurso waxa kaa raaca'. Ninkii baa guursaday, Malkhadana wuu yasay. Malkhado ayaa, gurigiisii u daba martay. Naagtii bay u tagtay oo ku tiri,

"Naa heedhe! nacasyahay.. ma og tahay in ninku ku neceb yahay oo isagoo naag ka yimid uu habeen walba kuu yimaa-do?". Gabadhii baa cayday oo tiri, "Naa habar yahay xumi, aniga ninkayga wax ha ka sheegine, orod danahaaga qabso! ". Markaas bay malkhado tiri, "Jirtaayoo anigu waan iska tegi, haddaadse beentay mooddey, bal markuu caawa kuu gal-moodo waxaad tiraahdaa, 'igu noqo! Hadduu kugu noqdo aniga ayaa beenley ah, haddii kalena waa waxaan sheegayey". Markaas bay malkhado iska tagtay.

Naagtii yarayd ayaa hadalkii wax geliyey. Markuu ninkii habeenkii u galmooday ayay tiri, "War ku noqo". Ninkii baa yaabay oo yiri, "Waa waxyahay! malaha waa lagu falaye, mar dambe waxaas oo kale ha ku hadlin!". Naagtii subaxdii ayay ninkii ka carootay oo ka dudday. Ninkii wuxuu gartay inay Malkhado ku dirtay. Habartii buu ku yiri, "Waa heedhe waan heshiinaynaa oo wax baan ku siinayaaye, kac oo naagtii ii soo celi!". Habartii baa tiri, "Waa tahay".

Ninkii bay lacag ka qaadday, markaas bay u tagtay naagtiisii oo dudmo ku maqan. Naagtii bay kaxaysay oo u sheekaysay. Dibadda ayay u bixisay. Markii meel la marayo ayay tiri, "Naa bal halkaan fariiso oo kaadi". Markaa bay naagtii tiri, "Hadda kaadiyi ima hayso oo ilaa mar kale ay i qabto mooyee ka hor ma kaadshi karo". Habartii baa tiri, "Nacasyahay! ragguna waa sidaas oo kale.. mar hadduu dumarka u galmoodo, ilaa uu haddana u xiskimo kuma noqon karo. Marka cagligaagaan eegayey oo ninka waan kugu diraye orod ninkaagii iskaga noqo oo i cafi ku dheh". Halkaas bay naagtii ninkeedii ugu celisay oo ku oggolay-siisay.

Nin baa gabar yar guursaday. Gabadhii buu ninkii

isyiri, 'ha kuu korto'oo maba taaban jirin. Gabadhii baa Malkhado u timid oo ku tiri "Ninku imaba taabto oo iima tago oo wuu i ag seexdaa oo keliya.. Wuxuu isleeyahay ha kuu korto, anna khaati baan joogaa". Habartii baa tiri, "Naa naagi nin ma qaadi weydo e, neefka maanta la qali doono, sararta laga siin doono, (Gabdhaha sararta ayaa siin jirey) adoon kala googgoyn, dhaalka afka kaga magmaag marka uu ninku soo galo. Isagaa ku joojinaya oo ku oran doona, 'naa qaadi maayo oo maba, le'eka e maad ka deysid'. Markaas waxaad ku tiraahdaa, "Dheri iyo naago toona yaryaraysi ma leh.. halkaasuu wax wax ku qaadan doonaa oo wuu isbeddali doonaaye!".

Sidii bay yeeshay. Markuu soo galay ayay hilibkii oo iswata dhalkii afka kaga magmaagtay. Markaas buu yiri, "Naa ka daa ma qaado e.. marka hore kala googgoo". Markaas bay inta ku sii cabbaysay tiri, "Naago iyo dheri toona yaryaraysi ma leh!". Markaas baa ninkii gartay inay rabto in la naageeyo.

Nin maal badan ayaa jirey. Ninku wuu alaab weynaa oo ragga kale ayuu ka alaab weynaa. Gabdho oo dhan baa diiday. Mid waliba waxay tiri, 'ninkaas alaabtiisa anigu ma qaadi karo'. Mid baa isyar hubtay oo ninkii iska jeclaatay. Intay malkhado u tagtay ayay ku tiri, "Malkhadooy, waxaan rabaa ninkaas alaabta weyn leh inaan guursado e, bal ka warran alaabtiisu inay wax i yeeli doonto ma u malaynaysaa?". Malkhadaa waxay tiri, "Ma wax rag baa haween wax yeela?". Waxay ugu dartay oo gabadhii malkhado ku tiri, "Bal maddad soo qaad.. afka u kala bixi, dabadeedna gacanta geli". Markaas bay gacantii gudaha gaari weydey. Waxay tiri, "Naa

hoogto naaguhuna waa caynkaas oo ninku in kastuu ạlaab dheer yahay gudaha naagaha wax ma gaarsiin karo e, ninka iska guurso yuu ku dhaafine!".

## 20. BULBUL-AAYO

Bulbul-aayo wuxuu ahaa nin yaạbab badan. Kolba si ḅuu iska dhigi jirey. Kọl nin geesi ah, kolna nin culimo ah, kolna nin awliyo ah, kolna nin tuug ah.

Waxaa jirey geed dheer oo korka aad uga cufan oo buulal badan leh. Wax alla wixii korka ka fuula lama arki jirin. Habeenkii mar baa caẉeysin la isugu imaan jiray oo beeluhu ku shiri jireen, maalintiina shir-weynaha tolka ayaa lagu qabaṇ jirey.

Maalintii dambe ayaa Bulbul-iyo raggiisii la tuhmay oo rẹerihii ayaa hadba wax waaya. Markaaṣ baa la yiri, "Bulbul-aayo iyo colkiisa mooyaane, cid kale wax inagama xaddo". Waxaa la isku raacay in geedkii lagu hoos garnaqsado. Mạrkuu sidaas ogaadey ayuu raggiisii u yeeray. Wuxuu yiri, "War labo kọoxood inoo qaybsha. Kooxi intay faraqa dhagax ka buụxsato, geedka ha fuusho oo markaan iraahdo "Soo daa", dadka dhagxanta ha la dhaceen, kooxina garta wax ha ka dhegeysato".

Sidii baa la yeelay. Bulbul-aayo ayaa loo yeedhay. Geedkii ayaa la fariistay. Markaas baa la yịri, 'Bulbulow, adiga iyo colkaaga ayaa reerihii dhammeeyey, caawase, waxaạn ku leennahay wax kuu marag fura haddaad weydo, waa ḷagugu dhaarinayaa geedkaan. Marka waa inaad xaalka naga gar marisaa". "Waa tahay" ayuu yiri. Wax baa la sheegsheegay oo waxba wạa lagu caddayn waayey. Markaas baa la yiri, "Bulbullow, kolka noo dhaaro".

Wuxuu yiri, "war ma aniga weliga aha gyaad igu leedihiin, 'dhaaro wax baad naga xaddaye'.. haddaad geedkaa ka nabad kacdaan aniga i qabsada". Markaas buu gabyey oo yiri:

Cirkow soo dhac ciiddoy dhaqaaq caro allay kaalay
Waxba dhawran maynee allow dhagaxyo soo daadi!

Nimankiisii geedka fuushanaa ayaa maqlay. Markaas b ay dhagxantii kor ka soo qubeen. Dadkii ayaa meeshii ka wada yaacay. Halkaasaa gartii ku baabba'day, geedkiinka waa dambe lama hoos fariisan.

++ ++ ++

Waxaa kaloo jirey meel qabri ah oo la isku dhaarin jirey. Qabriga waxaa ku jirey shiikh la oran jirey shiikh Awoofle. Maalintii dambe ayaa la yiri, 'qabrigaas noogu dhaaro'. Bulbul-aayo intuu maalintii hore hog ka sii qoday ayuu rag badan gudaha sii geliyey. Wuxuu yiri, "Dhaarta dushu waxba tari maysee, ninkii run sheegayaa hoggaas uu shiikhu ka soo daahiray ha galo. Hadduu been sheegaayo, shiikha qaban doonee". Nimankii buu haddana ku yiri, "Idinkaa i dacweeyaye, horta gala hogga'. Afar nin baa lagu ridey. Markaas buu inta kor ka qayliyey yiri, "Sheekh Awooflow, hadday been sheegayaan qaar la dhac". Illeen awelba rag buu gudaha ugu sii ridaye, nimankii baa sidii qaar loogu wadey, feeraha laga jejebiyey. Markaas baa iyagoo wada dakhran ka soo baxeen. Halkaa bay taasina kaga fakatay oo qabrigii dib looguma noqon.

+ + +

Waa kalena waxaa jirtey abaar xumi inay dhacday. xoolana sac buu Bulbul-aayo ka lahaa. Markaasuu hadba

reerka neer qasha u tegi jirey. Wuxuu oran jirey, "Marka roobku da'o ayaan qaalin irmaan idin siin doonaaye, wax i siiya ". Dadka qaarkood waxay is-oran jireen, 'haddaad qaalin heleysaan, wax iska siiya', qaarna waxay is-oran jireen, 'miskiinkaan baahan wax siiya'. Sidaas ayuu dad oo dhan wax uga guran jirey. Markuu roobkii da'ay ayaa sacii u dhalay. Markaasuu, illeen waa sac abaari ka soo daashaye, weyshii ka qalay oo wuxuu u samaystay gandaal uu ku maalo.

Maalintii ayaa dad boqol ku dhowi u yimaadeen. Waxaa lagu yiri, "War keen qaalintii aad noogu ballan qaadday". Markaasuu inta warankii iyo gaashaankii soo dhoweystey sacii gandaalkii la hor orday oo ku weyrixiyey. Intaa ay isaga iyo sacu isdaba ordayaanna wuxuu leeyahay, "Wax ka salag ley! Wax ka salagley!.

Dadkii baa yaabay oo, waxaa la yiri, "War ninkaani sac keliya ayuu leeyahaye, innana boqol qof baynu nahaye ! Waana dhaaranayaa oo wax baa ka salag leh ayuu leeyahaye inaga keen-a saciisa aan uga tagnee".

+++ +++ +++

Waagii dambe ee uu gaboobey ayaa qaan loo qabsaday. Boqor baa loo geeyey oo la dacweeyey, Markaas buu intaan wax kale la orannin boqorkii ku yiri, "Boqorow, i dhegeyso. Horta aan kuu sheegee anigu nin weyn baan ahay, markaas labo waa i qubatay oo waa labada indhood (odayaashana, labada indhood ayaa ilmo ka qubataa markay gaboobaan), labana waa i qar beeshay oo waa guska iyo dabada; Midna kaadida ma ceshado, midna dhuusada, labana waa i qardartay oo waa labada gacmood, sibraarkii aan wax ku shubah jireyna waa i qombobay oo waa caloosha, Sidee baydun qaan iigu qabsan kartaan?". Markaas baa la iska daayey.

21. RAAGE Ugaas iyo Aabbihiis.

Waxaa la yiri Raage Ugaas ayaa xernimo u kacay. Xaggaa iyo galbeedka ayuu cilmi u doontay. Isaga oo sidaa xer u ah ayaa waxaa soo maray safro. Safrihii baa ku yiri, "Waxaannu u soconnaa reerihiinniiye, waxba farriin ma na sii taaranaysaa?". Wuxuu yiri, "Aabbahay haddaad aragtaan waxaad ku tiraahdaan, 'waan caafimaad qabaa, xertiina meel hebla ayaan la joogaa, shanta salaadoodna hal weyso ayaan ku wada tukadaa!".

Safrihii baa soo kacay. Ciddii Raagey arkeen, Raage aabbihiis ayay u yimaadeen oo waxay ku yiraahdeen, "Raage waannu aragnay, wuuna caafimaad qabey. meel hebla-na xertii buu la joogey. Waxsuu ku yiri, "Shanta salaa-dood weyso qura ayaan ku tukadaa!". Odaygii wuxuu yiri, "Kolkaad noqonaysaan i soo mara, wiilkaygii baahi buu sheegtay oo wax baan iddiinku sii dhiibayaaye". Safri-hii hadday muddo joogeen ayay maalintii dambe waxay u tageen Raage aabbihiis. Markaasuu u dhiibay qumbe subag ah iyo soddon cad oo saaf ah. Markaas buu yiri, "wiil-kaygii alaabtaa u geeya, waxaadna ku tiraahdaan, 'aabba-haa wuxuu ku yiri, 'bishu waa soddon, balliguna waa buuxaa, cidduna waa iska nabad qabtaa!"

Safrihii baa ambobaxay oo dhulkii Raage joogey u kacay. Hadday dhexda ku sii jiraan ayay alaabtii u hunguriyoodeen. Raage ayaa farriintii loo geeyey, alaab-tiina la siiyey. Raagaa yiri, "War aabahay qumbe buuxa iyo soddon cad ayuu iigu kiin soo dhiibaye, waxa iga maqan ha la ii qaandhabo". Markaasaa la yaabay oo la yiri, 'maxaad ku garatay'?. Wuxuu yiri, "waxaan ku gartay farriintii aabahay idin soo faray: Balligu waa buuxaa waa qumbuhu waa buuxaa, bishu waa soddonna waa cadku waa soddon.

## 22. Naag iyo Ninkeed.

Naagtu waxay ah ayd naag isku tirinaysay inay aad u caqli badan tahay, saygeeduna wuxuu ahaa nin yar liita oo nacas ah. Si kastaba ha ahaadee, wuxuu ahaa nin ay iyadu dhalliilayşey. Hooyadii madi buu ku ahaa, wax walbana way ka jeclayd, wuxuuna ahaa nin xoolo badan.

Beri baa rag uu ku jirey duullaan u baxay. Markaas baa dumarkii loo war keenay oo lagu yiri, 'raggii la laa'. Markii la gurmaday ayay naagtiisiina gurmadkii baal ka raacay. Haweenkii ragga fiicani qabeen ayaa baroorta oo ku qayliya, "Alla ninkaygiiyow! kii sidaa iyo sidaa ahaayow!" iyo wax la mid ah. Iyadu awelba n inkeeda way dhalliilaysaye, dadkii bay, baroor la'aan, iska dhex socotay. Dad baa u fiirsaday oo waxaa la yiri, "goftan ninkeedḍiina waa maqan yahay, sida haweenka kalena uma walbahaarsana e, maxaa helay?". Markii la yiri, 'naa waa siḍee miyaadan ninkaagii u barooranayn' ayay tiri, "Anigu ninkaygii, waayaana weer cad, heh helayaana hengef!", (labadubaa waa isla weer uun. Waxay ka waddaa, 'kolley haddaan helo ash iima ah oo waan iska hengefsanahay, haddaan waayo oo uu dhintana weer cad uun baanan u xiran)

Markaa waxaa meesha laga fartay inay ninkeeda dhalliilasan tahay. Islaantii dhashay baa la yiri, 'raggii oo nool ayaa la soo arkay'. Waxaa la damcay kaydkii ay haysey in laga boobo. Waxaa la yiri, 'wiilkaagii wuu dhintaye soo kac oo wax ka gurmo". Habar caqli badan bay ahayde waxay garatay in la khiyaamaynaayo. Waxay tiri, "iilkaygii hadduu nool yahayna wuu ii imaan, hadduu dhintayna waan ka samri karaa, dheeftaan yar ee aan halkaan ku hayase idiin huri maayo inaan ka quusto mooynaane".

## 23. GUDDI-KHIYAAMO

Markii ay dadku khiyaamadiisii ka yaabayeen ayaa Guddi-khiyaamo duurka loo eryey. Wuxuu duurka ku jiraba, waxay heshiiyeen wax alla wixii dugaag ah. waxay yiraahdeen, 'haddii beelihii lagaa soo eryey, annaga ayaa kaaga aargudayna e, noo tali oo na raac!'.

Sidii buu yeelay, Maalintii dambe ayaa reero lagu duuley. Habeennimo ayay beelo dhan weerar ugu caddeeyeen. wax alla wixii xoolo ahaa ayay ka dhaceen. Dadkiina waa ka baqday oo waxaa la yiri, 'Bal waagu ha inoo beryo, bahal oo dhan eryin kari maynee'.

Haddii meel fog xoolihii la marinayo, ayaa Guddi-khiyaamo yiri, "war dadkaan aqaannaa oo waa laynahayaaye, masow adigu dhammaantaa colka ka hor tag. Geedkii xananweyne u gal. Markuu gurmadku ku soo gaaro, gumaad". Mas baa sidii yeelay. Colkii oo yaacaaya, wax fardo fuushan iyo wax lug ahba ayaa mas ula gegey oo wuxuu laayo iyo wax dib u baqda ayuu ka dhigay.

Guddi-khiyaamo ayaa colkiisii shiriyey. Wuxuu yiri, "War bahalkii mas la oran jirey waad aragtaan sida uu beelahaas dhan u dhammeeyey. Hadduu mar inoo caroodo innana sidaas ayuu inoo dhammaynayaa, haddaynaan iska qaban inta goori goor tahay. Marka dabow, aadiga keliya ayaa ku aada o, intuusan cawska ka soo bixin xagga dabaysha ka mar oo meeshaba ku ololi". Dab baa sidii yeelay oo mas buu meeshii oo dhan ku dloliyey.

Guddi-khiyaamo ayaa haddana colkii shiriyey. Wuxuu yiri, "Bahalkii mas ahaa ee beelaha oo dhan gam ka siiyey ayaa qun yar dabna ololiyey. Marka maskiiba dabkaa inooga daran oo haddaynaan iska qaban berri ayuu meesha aan joogno oo dhan inagu gubayaa. Daadow, adigaannu dab

kugu qaybinnay!". Daad baa isna dab ula tegey oo digaandigaha ka smeeyey. Waa bakhtiiyey.

Guddi-khiyaamo ayaa haddana bahasha qarandi la yiraahdo u yeeray. Wuxuu yiri, "daad baa inoogu daran. Hadduu, dab ka adkaaday mid inaga reebi maayo. Marka qarandiyeey, buurkaas uu soo marayo hoosta ka jilci. Isugu taga oo hoosta ka qoda ilaa inta uu buurku ka nuglaanayo. Markaas daad markuu kor marayo, ha la go'o oo tog ha ka dillaaco meeshee, daadna markaas dib u soo noqon maayee". Qarandi baa sidaas yeeshay. Iyadoo qarandiyi buurkii hoosta kaga jirta ayaa daadna soo maray. Buurkii baa go'ay oo qarandi iyo daadba halkii bay isreeceen.

Markaas, buu guddi-khiyaamo haddana yiri, "War xoolaha aynu wadanno, wax inoogu qala oo halkeenna na, dejiya". Gool weyn baa la qashay. Waraabe ayaa la yiri, 'waxaaga waannu kuu dhigaynaaye, xoolaha raac'. Maalintii oo dhan ayaa waraabe xoolihii la joogey. Hilbihii ayaa la cunay, waraabena waa la illoobey. Casarkii ayaa la xusuustay; iyadoo hilbihii aan waxba ka ool. Waxaa la yiri, 'maxaan yeellaa?'. Guddi-khiyaamo ayaa yiri, "War daanyeerow, adigaa waraabe ka booddo dheer, Marka hilbaha sambabkoodii ayaannu dabada kuugu xiraynaaye, markuu waraabe ku eryoodo godkii dheeraa ee halkaas ku yiil uga bood. Isna, caqli uu isku , qabto ma laha oo waa kaa soo dabo boodiye, dan ha u galin, halkaas buu ku dhimane!"

Sidii baa la yeelay oo daanyeer baa sambabadii dabada loogu xiray. Hadda waaxaa la yiraahdaa, 'daanyeer sambabkii waagaas lagu xiray ayaa dabada ka oos'. Waraabe ayaa lagu yiri, "Qaybtaadii daanyeer ka doono". Markuu waraabe daayeer u tegey ayuu ka cararay, isagoo sambabkii dabada ugu xiran yahay. Godkii ayuu ugu boodey. Waraabe ayaa halkii iska

shubay. Intuusan dhiman ayuu yiri, "dad waa wax hilbo waayey iyo wax dabada ku warwartay". Halkaas bay daanyeer iyo waraabena isku raaceen.

Guddi-khiyaamo iyo dawaco iyo, libaax ayaa soo haray. Dawaco ayuu u yeeray oo wuxuu yiri, "Aniga iyo libaax degmadaan ilaalinaynaaye, xoolaha xaggaa u dareeri. Dabadeed moolaha kan ceel inooga soo fiirfiiri aynu xoolaha ka waraabinno e. Haddaad waraabin kari weydo, aniga iyo libaax noo yeer". Dawaco ayuu markaa hoos kala ballamay oo ku yiri, "Markaad ceelka isdul gaagto, biyaha ayaad iska dhex arki doontaa, markaasna noo soo qayli oo libaax baa ceelka ku jira oo biyahii ii diiday na dheh". Sidii bay yeeshay. Ceelkii, markay soo aragtay ayay qaylo ku dhufatay. Waxay tiri, "Bahal libaax ah ayaa ceelkii ku jira oo inaan geelii ka waraabiyo ii diidey". Libaax iyo Guddi-khiyaamo ayaa isa soo raacay. Markii ceelkii la yimid ayaa Guddi-khiyaamo yiri, "Annagu ceelka dul tegi mayno oo libaaxaan ka cabsanaynaaye, orod adigaa libaax ah oo libaax iska celin karayee, bahalka ceelka inooga soo saar". Halkii buu libaaxii tegey. Markuu isagu ceelkii dhexdiisii isaga muuqday ayuu qaylo iyo sawaxan isku daray. Biyihii ayuu isku tuuray, halkii buuna ku dhintay.

Guddi-khiyaamo ayaa dawaco ku yiri, "laba keliya ayaynu nahay, xoolahana celin kari mayno. Markaa waa inaynu dadka kula dhowaannaa. Anna reerahaan gelayaaa, adiguna dibaddaas iska wareeg oo kolba duddadaan cunto kuugu keeniye i sug". Sidii bay yeeleen oo xoolihii oo dhan ayuu reerahoodii ula tegey. Dawaco duddada yun bay meeraysataa ilaa maanta. Hadda waxaa la yiraahdaa, "Dawaco guddi-khiyaamo ayay weli duddada ka cegeegaysaa!!".

24. Kood-keyrkayr

Ninkaasi kolba siduu doono ayuu iska dhigi jirey sida Guddi-khiyaamo. Mar wuxuu iska dhigi jirey nin shiikh ah, marna nin dagaalyahan ah, marna nin tuug ah,

Maalintii dambe ayuu dhallinyaro badan kaxaystay oo yiri, "xer ii noqda, anna shiikh baan ahaye". Reer ayay u tageen, markaas bay u wadaaddeeyeen. Si wanaagsan ayaa loo soo dhoweeyey. Waxaa la yiri, "Diinka na bar". Shiikhii baa yiri, "Reer ayaan gabr ka doonay, markaasay reer xun igu noqdeen oo geel igu xireene wax iga soo bixiya". Reerkuu diinka yay aad u jeclaayeen. Markaas baa la yiri, "Gabadhii aad doontay annagaa kaaga yarad bixinaynee, diinka na bar". Markaas baa boqol halaad loo soo ururiyey. Markaasuu dhallinyaradisii u dhiibtay, oo yiri, 'inoo kaxeeya, waan idinka daba imaanayaaye, reerahaan cabbaar sii maaweelinayaaye".

Illeen nin waxyaqaan ma ahee, dhawr toddobaad ayuu reerihii beenbeen wax kaga cunaayey oo marba yiraahdaa, "Barri bilaabaynaa". Maalintii dambe ayaa nin carabiga wax ka yaqaani u yimid. Markaas buu yiri, "War ninkaani waxba ma yaqaane, bal ina keena anaa wax weydiinayee". Nalkiissii baa lagu soo shiray. Markaas baa la yiri, "Shiikhow, maanta ayaannu dooneynaa inaannu diinka bilawno". Ninkii baa markaas soo kacay oo yiri, "Shiikhow, bal horta laba beyd oo aan la yaabay ii macnee". Kood-keyrkeyr ayaa durba arkay in xaalkii xun yahay. Markaasuu wadaad-nimadii gees iska dhigay oo warankii iyo gaashaankii soo dhoweystey. Wuxuu yiri, "bal sheeg labada beyd ee aad hayso". Ninkii baa yiri, "Waxaa weeye: Qummi leyla yaa hadaa, lacallaka turshadu". Kood-keyrkeyr, illeen nin fasirka yaqaan ma ahee, khiyaamadiisiina u meel martay

oo geelii u galbaye, ninkii buu yiri, 'bal ku celi'. Markii loogu celiyey ayuu yiri, "Qum-kaagan goofgoofineyow; yaa haadaa-kaagan haadhaadayow; lacallaka turshadu-kaagan ii tarsheeganayow". Markaasuu inta warankii isla kala jiidey feeraha kaga aasay oo cagaha wax ka deyey. Nin dheereeya oo sida fardaha u duulana waa ahaa. Markaas baa cago lagu haweysan waayey. Halkaasuu geelna ku helay, reer-kiina nin kaga diley.

Beri kalena waxaa la yiri, nin shiikh ah ayuu reeri-hii ka garaaban waayey. Markaasuu yiri, 'War fiqi magan. ammaantiisu waa fiqi jooga caydiisee, ii geeya ninkaas'. Dadkii beelaha inta iska dhaadhiciyey ayuu kolkaa yiri, "Ninkaas aad leedihii waa shiikh, maanta ayaynu kala ogaanaynaa".. Wixii aan weydiiyaba hadduu 'haa' yiraahdo, wax ma yaqaano ogaada". Dadkii oo dhan ayaa soo daba kacay. Waxaa la rabey labada wadaad waxa ay ku hadlayaan in la ogaado. Markii loo yimid shiikhii iyo xertiisii ayaa la yiri, "Shiikh ninkaanuna waa shiikh kalee bal kutubta isla akhrista oo weydinkaas". Kood-keyrkeyrna alif ba' iyo wax la mid ah ayuu afka carabigaba ka yaqaan. Markaasuu shiikhii yiri, "Shiikh bal horta akhrisku ha dambeeyee, soo du kitaabkadaad akhriyayso".

Markuu shiikhii u dhiibay ayuu inta kitaabkii furay shiikhii la hor fariistay. Markaasuu yiri, "Shiikh waxaan ku weydiiyey, xarafkaani sow alif maaha?". "Haa" buu yiri shiikhii, illeen kood-keyrkeyr wuxuu soo samays-tay war kama hayo e. Markaasuu haddana ba' taabtay oo yiri, "kanna sow ba' maaha?". Siduu kolba xaraf u taabana-yey, shiikhuna u lahaa, 'haa' ayuu markii dambe dharbaaxo shiikhii indhaha kaga malqaasay. Wuxuu yiri, "Adigoon waxba aqoon yaad dadka leedahay, 'shiikh baan ahay'.. haddaad

wax taqaan waxaan iraahdaba maxaad, 'haa' ii leedahay?".

Dadkiina, illeen hore ayuu u soo dhisaye, labadii shiikh ayuun baa la kala qabtay. Markaasaa isagii la raacay oo shiikh weyn loo qiray.

Berigii dambe ee la ogaadey ayuu reerihii iskaga tegey. Saddex nin ayuu kaxaystay. Markay meel dheer maraysan ayaa golo kale soo raad goysey oo la yiri, "Tuug baa halka maraysa". Goladii raadinaysey markay is-arkeen ayaa sibraa-rradii iyo hilibkii geed la surtay oo kood-keyrkeyr iyo colkiisii la oryey. Markii meel fog la maray ayuu inta isa soo taagey yiri, "anigaad i oryaysaane, haddaad orod isku haysaan waa inoo sibraarradiinnii caanaha ahaa iyo i hilbihii". Halkaas baa alaabtii loo beretamey. Markaasuu alaabtii oo dhan ka qaatay oo iskala tegey, illeen nin la gaari karo ma ahayne.

## 25. Gabadhii dhutisay

Waxaa jirtey gabar aad u caqli badnayd. Gabadhu way dhutin jirtey. Berigii horena waxaa jiri jirtey dhallin-yaradu inay gabdhaha ka gooban jireen meelaha cawska ay ka gurtaan ama meyraxda laga diirto amaba miraha laga gurto. Ninkii guur doonaaba meelahaas ayuu u haasaawe tegi jirey.

Waxaa la yiri nin baa gabar mayrax diiranaysa arkay. Gabadhii buu ku leexday. Gabadhu show way dhutisa isna ma oga oo markay taagan tahay kama muuqato. Markuu u yimid ayay iyana socodkii deysey. Sheekaa la bilaabay. Haddii in door ah la haasaawayey, hadalkiina isugu dhacay ayay gabadhii damaceday inay iska tagto, ninkuna uusan ogaan inay dhutiso. Markaas bay tiri, 'way ninya-how, anigu hadalkaas oo kale waan ka dhutiyaaye, nabad-galyo'!. Markaas bay sideedii caadiga ahayd isaga soco-tay.

Ninkii wuxuu markaas isyiri, 'kajan bay waxaas u samaynaysaa oo ogaan bay u dhutinaysaa'. Maba uu malaysan inay lugaha middood wax ka qabtey.

Waxay ka soo wareegtaba, waa la isguursaday. Markaas buu arkay inay berigii hore isyeelyeelj jirtey oo ay dhabtii lug la'dahay. Markaas buu yiri, "Waa maxaad ii sirtay ee aad iigu sheegi weydey inaad lug wax ka qabtey?". Markaas bay tiri, "oo ma naces baan ahay, markaan isu kaa sheegaayo, Calaf-doon baan ahaa, markaa wixii raggu neceb yahay oo dhan waa inaan qariyaa, si aan yeelabaa!".

Markaasuu isna iska dhaafay oo si wanaagsan ayay isu dhaqdeen.

## 26. Naagtii shaarubbo libaax soo goysey

Waa baa naagi u timid wadaad caalin ah. Waxay ku tiri, "Shiikhow, ninkaaygii baa iga leexday oo naag kale ayuu jeclaaday, anigna waa i nacay. Marka, waxaan kaa doonayaa inaad ii qortid, qardhaas ninkaygii ii soo celisa". Wadaadkii baa ku yiri, "Waa tahae, waxaan ku irashdo ma yeelaysaa?". "Haa" bay tiri. Wuxu yiri, "Waxaad ii keentaa shaarubbo libaax, markaas baan kuu qoraayaa qardhaas uu ninkaagii kugu jeclaado!".

Bili hadday ka dambeysey ayuu reerkii degey meel libaaxyo badan. Naagtii baa goor galàb ah lax dibadda ku xirtay. Habeenkii buu libaax yimid oo laxdii daf siiyey. Habeenkii dambaa libaaxii soo noqday oo qaaray lax kale oo ay muska reerka ku xirtay. Habeen kalena intay muskii meel ka daloolisay ayay aqalka dabadiisa lax kale ku xirtay.

Habeenkaasna libaaxii waa soo galay, oo laxdas buu la tegey. Markaas bay habeenkii aftaad, dhigdhexaadda aqalkeeda intay lax ku xirtay, ayuu habeenkaana la tegey. Habeenkii shanaad, intay lax gashay, ayay laba saamood ... dhexdooda daloolisay, laxdiina laba u kala goysey. Laxdii bay barna dibadda dhigtay, barna aqalkii soo gelisey. Iyadna labadii saamood bay mid dhan iskaga laabtay oo mandiil soo dhoweysatay.

Libaaxii baa habeen-barkii soo dhacay. Markaasuu cunay barkii laxda ee dibadda yiil. Markuu dhammaystay ayuu aqalkii madaxa la soo galay oo barkii kale soo tiigsaday. Madaxii libaaxu markuu dhaafay ayay aayar shaarubbihii wejiga mandiishii kaga goysey. Libaaxiina laxdii buu la tegey.

Naagtii waxay waddaba shaarubbihii libaaxa ayay shiikhii u geysey. Waxay ku tiri, "shiikhow, waxaan wadaba libaaxii shaarubbo ka soo gooyey. Kolkaasuu shiikhii ku yiri, "sidaa baad uga soo goysey?". Markaas bay u sheegtay farsamadii ay libaaxa u gabatay iyo siday hadba lax meel ugu xiraysey ilaa ay ka soo gelisey aqalkeeda, shaarubbadana uga jartay.

Shiikhii baa markaas ku yiri, "Naag yahay, dugaagga oo dhan libaaxaa u daran. Dadkuna libaaxuu ka baqaa, libaaxuna dadkuu ka baqaa. Haddaba, farsamadii libaaxii caynkaas ahaa ee dad-cunka ahaa aad ku soo gelisey gurigaaga, maxaa kuu diidey inaad ninkaaga ku daydo?. Ninkaagu qardhaas kale uma baahna ee waxaa u qardhaas ah hadalka oo aad u macaaneyso iyo gacanta ood wax ka siiso. Qardhaasta aad u dooneysaana adigaa ninkaaga u hayee siiś".

Naagtii baa farsamadii yeeshay. Ninkeedii bay intay hadba u yeerto hadal macaan kula hadashaa oo kolba waxay naftiisu doontaba siisaa. Markaas buu dib u jeclaaday oo mar dambe aqalkiiba ka bixi waayey, kana magnaan waayey. Naagtii markay ninkeedii hantiday ayay wadaadkii u tagtay oo abaalgud siisay.

## 27. Kaba-calaf iyo Huryo Ugaas

Kaba-calaf iyo Huryo Ugaas waxay ahaayeen nin iyo naag isqaba oo soomaali ah. Kaba-calaf wuxuu ahaa nin aad u foolxun, hase ahaatee wuxuu ahaa nin fiican oo geesinnimo iyo aftahannimo isku darsaday oo wax yar mooyee aan nin ka sitaa jirin. Markay Huryo Ugaas gabadha ahayd, Kaba-calaf ma doonin ee waxaa doonay nin ay ilma-adeer ahaayeen oo ina-boqor ahaa. Huryana ina-boqor bay ahayd.

Kaba-calaf oo aan inanta aqoonnin ayuu wiilkii ina-boqor ahaa intuu kaba-calaf u yimid ku yiri, "Ina-adeer, gabar Huryo Ugaas la yiraahdo ayaan doonayaa oo aan la soo baxayaaye, kaalay oo ii raac". Markaasuu kaca-calaf raacay, Gabadhii bay u tageen. Way la hadleen oo la soo baxeen, dabadeedna isa soo raaceen.

Hadday jidka marayaan oo habeenkii oo dhan ay soo guuraynayeen ayaa subixii waagii u beryey. Markuu waagii beryey ayay Huryo tiri, "Aan nasanno". Markaasay geed hoos fariisteen. Haddii cabbaar la fadhiyey ayay Huryo tiri, "Maxaad keedihiin, ina nasiya!" Ina-boqorkii la soo baxay baa yiri, "Oo waaba fadhinnaaye, innagoo fadhinna sidee baynu u nasan!". Kaba-calaf oo ahaa nin aftahan ah ayaa gartay waxa ay huryo u jeeddo, maxaa yeelay wuxuu aad u yiqiin gabayga, maahmaahda iyo hadalka qafilan.

Markaas buu yiri,"War malaha waxay ina leedahay, aynu kabaha iska bixinno". Huryo Ugaas baa kolkaas intay il qoorka ka eegtay , Kaba-Calaf tustay in ay hadalkiisii u bogtey oo u gartay waxay u jeeddey. Kabihii bay markaas iska bixiyeen oo si wanaagsan u nasteen.

In door ah haddii ay fadhiyeen ayay inta kaceen socod bilaabeen. Markii cabbaar la socdey ayay Huryo tiri, "Oo maynu afurro!" Markaasna wax sahay ah ma ay haysan, haba yaraatee. Wiilkii ina boqor ahaa baa yiri, "Miyaad waalan tahay! Maxaynu ku afurraa, ma soor baynu haysannaa. Naa ina keen oo meesha ka soo soco"! Kaba -Calaf baa yiri, " War malaha aan cadayanno ayay leedahay"! Markaasna intay Kaba-Calaf eegtay bay tustay in ay u bogtey oo dhoollaha ka qososhay.

Wiilkii ina boqor ahaa ee gabadha watey, labadaa arrin ee meesha ka dhacay aad iyo aad ayuu uga xumaaday. In cabbaar ah oo kale haddii la socdey ayay Huryo mar kale tiri, "Cid baynu gallay"! . Wiilkii ina boqor ahaa baa intuu dhan walba eegay waxba arki waayay. Intuu is haysan kari waayay buu yiri,"War miyey waalatay? Oo waaba cidla^ ciirsila^ e ! " Kaba-Calaf baa intuu amusay yiri, "Mindhaa xuunshadaas bay aragtay, xuunshadaan laga waayin meel dad joogo oo had iyo jeer ku dhow e"!. Markaasay Huryo mar saddexaadkiina Kaba-Calaf u bogtey o o dhoollaha uga qososhay oo la is-af gartay. Inankii ina boqor ahaase aad buu u calool xumaaday.

Saddexdoodii waxay socdaanba, waxay nabad tageen degmadii ay ku socdeen. Degmadii markay yimaadeen ayaa, illeen waa ina boqor ina boqor wat e, loo soo dabbaaldegey oo laga hor yimid oo loo cayaaray oo la soo galbiyey.

Habeenkii oo dhanna waxaa lagu jirey cayaar iyo damaashaad. axnimadii markuu waagii beryey ayay Huryo tiri, "Waxaan rabaa in shir la qabto oo boqorradii iyo waayeelladiiba ii yimaada. Markaasaa la wada yaabay oo la yiri "war waa maxay tan belad ah oo durba iyadoo habeen qura joogtey boqorrada iyo waayeel u yeeranaysaa? Tolow, maxay soo waddaa?". Huryo Ugaas waxay gabar aad u qurux badan oo caqli badan oo fiiro dheer, joog haybadna leh. Markaas baa shirkii la qabtay.

Cabbaar haddii laysa salaamay oo hadallo wacan oo guurt imo ah lays dhaafsaday bay Huryo tiri, "Duqowday! waxaan idiinku yeeray hadal aydnaan filayn. Waad i taqaaniin oo Hur Ugaas baan ahay. Inanka Xirsi Boqor la yiraahdo ayaan la soo inaan ooridiisii noqdana waannu isu soo raacnay. Hase ahaate waxaa nasiibdarro ah oo inaan idiin sheego doonayaa arrintii si kale loo wado. Ninka Kaba-Calaf la yiraahdo waa in la ii guuriyaa. Xirsi Boqor anoo ku kalsoon inuu yahay wiil fiican geesi ah oo xarrago badan oo qurux badan oo dhalad ah, hadda waxay ila noqotay in oori wanaagsan oo idinka mid ah oo idii dhasha oo idiin dhaqanta oo fiican aan noqon lahaa haddii Ka Calaf laysu kaaya guuriyo. Ka shira! Ka tashada, waa in Kaba alaf la ii guuriyaa, Xirsi Boqorna waa inuu raalli ahaadaa. Waa nin gob ah, Kaba-Calafna waa ina-adeerkiis. Waa inuusan masayrin ama uusan uur xumaan!".

Waayeelkiibaa waxay ku hadlaan garan waayey oo yaabay. Markaasaa Huryo lala shiray oo lagu yidhi, "Maandhay, aan ku ducayno, duno naga hoo! yaanaan ku habaarin ee talo arrinka naga daa. Wiilkani waa ina boqor, waa xirsi, asagaa ku raba, asagaa ku doonay, Kaba -calaf ku lama soo tegin, kuma yaqaan ee wiilkan ina boqor aan kuu guurinno!" " Kute, arrinka sida aan idhi u wada".

Odayaashii baa maalmo badan arrintii shir u qabtay. Dhulkiibaa la xariiqay. Arrinkii baa muddo la wadey arrinkii baa ribadey. Hadday xaajadii ribatey, ayuun baa maalintii dambe, Kabacalaf iyo Xirsi boqor oo wada socda oo qosqoslaaya odayaashii u yimadeen oo ku yidhaahdeen,"Duqayey, arrinkii ma guddoomin kari weydeen?" Odayaashii baa yidhi, "Guddoomin kari weyney". Markaasuu Xirsi Boqor yidhi, "Haddaba annaga guddoominey, oo aniga inuu Kabacalaf Huuryo Ugaas guursadaa, anna faraskii Kabacalaf aan u qaataa xaal. Kabacalaf waa ina adeerkey; haddan anigu ahay Xirsi Boqor, Kabacalaf waan u huray gabadhii". Markaasaa, gacanta laysu dhiibay oo dib reerkii u wada damaashaaday. Huryo Ugaasna halkaasay ku noqotay ooridii Kabacalaf.

Haddaba, inkasta oo Huryo ay ahayd naag qurux badan, oo fiican oo aftahmada , oo geesiyad ah oo gaari ah, waxay noqotay naag belo ah oo raganimadeeda naag lahan karo aan ahayn. Soortana waxay ku cuni jirtay intii nin ka cuno, haddaynay kaba badsan jirin. Kabacalaf iyo Huryo waxay degenaayeen dhul qodaal ah oo beero badan leh. Halkaasna waxaa badanaaba lagu beeran jirey, Mesego (Arabikhi) dadka halkaa degenina waxay cuni jireen mesegada badanaaba. Xoolahana way dhaqan jireen oo caanahooda dhami jireen subagana kala bixi jireen.

Berigaas, soorta marka la kariyo, waxa lagu soo ridi jirey xeedho weyn, markaasaa inta fandhaallo la qaato la wadaagi jirey. Masegada marka xeedhada lagu rido waxaa lagu dari jirey, geedoadari, caano iyo subag. Haddaba, Huuryo Ugaas subag ugu may dari jirin Kabacalaf, ee caanaha uun bay ugu dari jirtey. Ayaduna subaggay ku qarsan jirtey. Kabacalafna Huuryo wuu ka biqi jirey, oo waxay siiso uun buu cuni jirey. Waxay sidii ahaatoba Kabacalaf baa macaluulay oo dhuubtay. Huuryana way cayishey oo naaxday. Maalin walba xeddhada dhankiisa waxay ku dartaa caanaha, dhankeedana waxay ku darsataa subagga.

Beri dambe, Huuryo Ugaas oo ka shaqaynaysa aqalkii ayuu Kabacalaf yidhi, "Huuryoy, maandhe inta aad shaqaynayso anigu mesegada maynoo iidaamaa?", Markaasay tidhi,"Haayoo, waad tagaa sida loo iidamee iidaan". Waxay moodeysey inuu sidii hore ayadana subagga ugu darayo, asag na caanaha ku darsanayo. Sidii ma yeeline ee ayadana caanihii buu ugu daray, asaguna subagii buu ku darsaday. Wuxuu sameeyey markay aragtay bay cadhootay. Haddaba Kabacalaf weligii subag ma dhadhamin. Markaasay is tidh "Haddii aad ku tidhaahdo,"Waar maxaad ugu darsatay subagga, wuu shakiyi, oo wuxuu garandoonaa maslaxad qarsoon oo macaan inaad ka qarsan jirtey. Markaa maxaad yeeshaa!".

Cabbaar intay aamustay ayay Huuryo waxay tidhi, Kabacalaf Illaahay wuxuu igu ogyahay, hadal maalin hore aad igu tidhi mark soo xusuustaba, beerkaa sidaa lay kala jeexaa! Markaasay, intay fandhaalkii geestiisii ku muddey soo xariiqday mesagadii, oo sub xageedii u soo dareeray, oo iska buuxiyey. Markaas Kabacalaf caanona ma haysto, subag.a ma haysto. Isha intuu cabaar aamusay oo cirka eegay buu yidhi,"Illaahay anna wuxuu igu ogyahay, hadal kaa ka horreeyey, oo aad i tidhi markaan xasuustaba aniganа beer sidaa lay cajiimaa!". Markaasuu mesegadii iyo caanihii iyo suba oo dhan isku walaaqay. Maalintaa intii ka dambeysey, waxaa caad noqotay, in mesegada caanahaha lagu daraa subaggana la u daraa dabeeto la cajiimaa. Markaasaa, Kabacalaf isna naaxay oo diifti ka ba^day.

Waa dambe ayay Huuryo ku tidhi Kabacalaf , "Waar horta, ad faras baad leedahee aniga maxaa ii diidey!", Markaasuu yidhi" N miyaad waalan tahay, naaguhu ma fardahay fuulaan", Waxay tidhi"I maxay u fuuli waayeen? " Wuxuu yidhi " Dee waauay fuulin...."Wa tidhi"Oo xeerka ka celinayaa , ee ka hor joogsanayaa waa maxay ?

Miyaanay ragga la sinnayn oonay dad ahayn sidooda? Iminkana adigoo faras i siiyaa maahane gurigaa soo gelimaayo !". Ina la wadaba, faraskii baa loo keenay oo la siiyey.

Beri dambe, ayay haddana Huuryo tidhi,"Kabacalafow , maandhe, adigu kadin geela ayaad leedahay, ee horta aniga maxaa ii diidey?". Kabacalaf baa yidhi" Naa naag kadin geel ah leh ma arag!" Markaasay tidhi " Maxaan u yeelan waayey? Xagaan geynayaa? Miyaanan reerka ahayn, amase kula gudbooneyn? anna naagtii baan ahay adna ninkii baad tahay, ee reerkan anna geestan baan hayaa adna geestaas. Markaas haddaad adigu kadin geel ah leedahay, maxaan anigu ku waayay, Markaasna intuu Kabacalaf wax uu sameeyo garan waayay, ayuu kadin geel ah Huuryo siiyey.

Beri dambe ayuu Kabacalaf duuley, oo geel soo dhacay, markaasu markhaati u dhigay inaan Huuryo Ugaas geelaa la soo helin. Geelii hadduu gurigii keenay ayay Huuryo tidhi, "Guddi ha naloo keeno geelana noo qaybisa". Markaasaa markhaatiyaashii yidhaahdeen "Naa geela asagaa soo dhacay ee miyaad la duushey, mise, waad la heshay?" . Waxay tidhi,"Oo soo reerka intiisii kale ku maan sii tacbayn! . Intuu soo xoojinaayey anaa reerkan dhaqayay. Markaa, wixii aan hayeyna wuu ila leeyahay, wuxuu keenayna waa in aan la yeeshaa". Dabeeto, sideedii baa gar noqotay, oo geelii waa loo qaybiyey ayada iyo Kabacalaf.

Maalintaas ayuu yidhi Kabacalaf, "Naa Huuryo, maandhe , hal na ku weydiiyaa waxay tidhi ,"Haa", wuxuu yidhi:- "Maandhe, gabadh-nimadaadii yarad kaama bixin, kuma doonin oo aabahaa kuma weydiisan, ee horta xageed iga soo gashay ? khaati baan kaa joogaaye ! ! ! !

Waxay tidhi" Maandhe, shaydaanka iska naar oo ha naceesoobin!!! Kol haddaan kuu dhaqayo oon kuu dhalayo xoolahana iyo reerka cid kale u geynnaayee". Markaasay halkii ku heshiiyeen oo beryo dhan bashbash iyo barwaaqo ku noolaayeen.

Waxay sidii ahaataba, Kabacalaf baa beri dambe sahan tegey, cidlâa ciirsila^ asagoo marayo, ayaa waxaa ku soo baxay nimanay col ahaayeen. Waxay ahaayeen saddex nin oo laba waaweyn tahay, midna dhalin yar yahay. Saddexdii nin baa Kabacalaf joojiyey oo ku yidhi, "Waar Kabacalaf, maanta max ad filaysaa inaan kugu samayno". Kabacalaf baa yidhi" Dee waxaan filanayaa wixii rag filan jirey" .Waxay yidhaahdeen,"Waa ku dileynaa, oo aad ogtahay waxa dhexeeya, oo ku bixin maynee, ma dardarmaysaa?". Wuxuu yidhi "Bal aan dardaarmee, saddex nin baad tihiin , dilkaygana ku maydaan soo tashanin, oo kedo uun baynu iskaga soo hor baxnay, ee bal isu tagoo inta faqdaan bal is weydiiya in dilkayga aad isku raacsan tihiin iyo in kale.

Saddexdii nin baa tâladii qaatay, oo halkeer ku faqay. Intay faqayeen ayaa **Kabacalafna tashaday. Saddexdii** oo tashanaya ayuu il qoodhka ka cogay oo wuxuu arkay, in labadaa nin ee waaweyni ay doonayaan in la dilo, ninka yarina madaxa ka ruxayo, oo uu ku diidan yahay. Ninkii yaraa wuxuu ku yidhi" Labadii nin ee doonayay Kabacalaf in la dilo, "Waar, dunida haddii ninkii waxoogaa loo tiriyaba aan laga maagaba la dilo nabadi jiri meyso, ee ninkan iska dhaafno oo nabadda hala dhowro." Ninkii yaraa hadalba, waa laga batay oo taladuu soo jeediyey waa lagu diidey. Waxaanay saddexdii nin ku tashadeen in ay dilaan Kabacalaf. Saddexdii baa Kabacalaf u yimi oo ku yidhi, "Waa ku dilaynaa" Wuxuu yidhi " Ma i dilaysaan oo waa goosteen " Waxay yidhaahdeen "Haayoo waan ku dilaynaa ee dardaaran".

Kabacalaf baa markuu ogaadey in la dilayo aanu sinaba u baxsan karayn, ku yidhi ninkii, "Haddaba wax aan wax i tara, idinna wax idin tara ma ii yeelaysaan?" Waxay yidhaahdeen" Waa kuu yeelaynaa ".

Kabacalaf baa dabcedto ku yidhi saddexdii nin, "Meel cidla ah oo halkaas ah reerkaygii baa yaal, Huuryo Ugaasna way joogtaa. Huuryo Ugaasna waa naqasheen oo waa naag fiican. Haddaa gurigeeda tagtaan, haddaynay awr gool ah idiin qalin waa bay idiin qalaysaa. Idinkuna waxa tihiin nimen dhowr habeen soo qaday oo gaajaysan sida idinka muuqata. Waxaan doonayaa inaad Huuryo Ugaas ii martaan oo ku tidhaahdaan, "Ninkii Kabacalaf la odhan jirey waxuu ku yidhi, waxa laga yaabaa inaan sahankii ku rasgeo, oon iska iyo dirracda naqnaadee waxaynan gaadhay degmadii galbeed jirtey ee hay sugina. Markaas, reerkii iyo caruurti na waa inaad si fiican u dhaqaalaysaa. Saddexdii awr ee qawaairta ahaa, ee aydun raran jirteen, awrka yari dhaqsha loogu haye laysta lab da awr oo waaweynaa caruurta jiilaalka kaga saar".

Mar alla markii uu Kabacalaf haddalkii dhammeeyey dardaaranka ayaa ayey dileen saddexdii nin, oo isa soo raaceen. Waxay soo socdaanba waxay yimaadeen gurigii Kabacalaf oo Huuryo Ugaas joogto, markaasay yidhaahdeen, Huuryo ma joogtaa? Huuryaa tidhi, "Haa oo waa aniga". Haddii laysa salaamay oo nimankii ay waraysatay inay socdaal yihiin, ayaa loo gogoldhigay. Markay waraabisay, ay cabbaar fadhiyeen bay Huuryo ku tidhi, " Kabacalaf oo naga shan tegey waxba meelahaa ma ku arakteen? Markaasay yidhaahdeen,"Haayoo araggnay, farriinna wuuna soo faray".

"Farriintii markay u sheegeen ayay Huuryo qososhay intay indhaha isku qabsatay, oo ay ku tidhi, farriin wanaagsan baa dumaashiyaal , ii keenteen, ee wan baan idiin qalayaa halkaa ii fadhiya", Huuryo Ugaas baa intay tagtay, wan weyn dhegta dhiigga u dartay markaasay habartii adhiga la joogtey ay ku tidhi, "Orod guriga tagoo hilbaha wanka aan qalay u kari ragga guriga jooga". Habartii baa karisay hilbihii oo u keentay raggii. Huuryose , waxay u tagtay oo isugu yeedhay, rag dhawr ah oo raggii reerkeeda ah, markaas ku tidhi, "Saddex nin ee gurigayga hilibka ku cunaya waxay soo dileen Kabacalaf. Markaa waxaan doonayaa inaa inta qabataan geedkaa iigu xidhaan oo aydaan iga dilin",. Waxay yidhaahdeen, "Waayahay". Saddexdii nin oo iska fadhfadhiya ayaa loo yimi oo la qabqabtay oo geed lagu xidhxidhay. Markaasay ayadoo waran baalxaaf ah sidata, saddexdii nin is hor taagtey oo ku tidhi, "Nimanyahow, Kabacalaf soo maydaan dilin?" Markaasay yidhaahdeen,"Naa xilhayo furan inaanan soo dilin". Waxay tidhi, "Waan idin ka war roonahay Markaasay raggeedii ku tidho, Ninka yar xadhigga ka fura, markii kii yaraa la soo furay ayay ku tidhi; "Adigu ii warr Markaasuu kii yaraa yidhi,"Maxaad ka ogtahay adigu, yaase wax kuu sheegay?" Waxay tidhi " Waxaan ogahay in Kabacalaf la dilay.

Oo saddediinan nin aad disheen adiguse maad dooneyn i la dilo, labadan nin ayaase kugu dirqiyey oo kaa talo diid oo kaa badiay waxaanad ku talisay in la bixiyo nasiibdarrose waa la diley"Hadalkaa aad sheegtay erey been ihi kuma jiro, oo sidaad aad u sheegtay baa arrinku u dhacay.

Si kastaba intaan yeelay , ayaa layga diidey in Kabacalaf la bixiyo, oo halkii lagu diley. Markaasey,Huuryo warranki baalxaafka ahaa intay qaaday labadii nin ee geedka ku xidhnaa beerka kaga taagtey, ooy halkii ku dishay. Ninkii dhalinta yaraase, way soortay oo u dambi dhaaftay.

Haddaba markii la weydiiyey Huuryo Ugaas, siday ku ogaatay in la diley Kabacalaf, waxay tidhi,
" Hadalkuu Kabacalaf nimanka soo faray baan ka gartay markaasaa Huuryo Ugaas aqoonteedii iyo caqli badnaanteedii lala sii yaabay ayadoo horeba loola yaabsanaa".

## 28. DAWACADII IYO LIBAAXII LO^DA LAHAA

Dacawo iyo libaax ayaa lo^ wada lahaa, maalinba mid baa raaci jirey lo^da ka kaleha wuxuu dooni jirey xabag. Waxay sidaa ahaadaanba casho dambe ayaa libaaxii raacay lo^dii oo dibigii ugu shilsanaa cunay.

Habeenkii markuu xoolihii kala soo xareeyey, ayay dawacadii lo^dii tirisay. Markaasay towday dibigii lo^da ugu shiilsanaa. Markaasay libaaxii u timi ooy ku tidhi:- "Abti Libaaxoow, dibigii lo^da ugu shiilsanaa mee?". Libaaxii baa yidhi "Malaa maantuu lumay".

Markaasay dawacadii tidhi,"Berrito aan dibigii doonee adigu raac lo^da.
Libaaxii baa yidhi "Waayahay".

Dawacadii baa aroortii tagtay oo dibigii doontay. Waxay socotaba waxay ku soo baxday meeshii libaaxu dibi ku cunay lafihii oo yaalla. Lafaha agtoodana waxay ku aragtay raadkii Libaaxa. Markaa waxay garatay in Libaax dibigii cunay. Waxay is tidhi: Maxaad samaysaa! Waxay soo qaaday dhagax, markaasay xabag marmarisay, oo gurig ku soo noqotay.

Markay gurigii timi ayay libaaxii ku tidhi" Dibigii waan waayey hase ahaatee, meel xabag badan ayaan maanta arkqy , libaaxii ba yidhi, "Maxaad xabag iigu keeni wey Dawacadii baa tidhi, "Xabag waan kuu sidaa. Xabagtuse w xabag cadadeed, oo markaa la cunayo lama calaliyo!".

Libaaxii baa xabagtii is yidhi liq, markaasuu ku margaday oo xabagtii cunaha iskaga taagtay oo dhintay. Dawacadiise, halkan bay farxad la boodbooday oo qosol kala joojin weydey, lo^dii oo dhanna keligeed bay u hartay.

## 29. Tuuggii Faraska Xaday

Waxaa la yiri nin baa faras wanaagsan lahaa, si aad ahana faraska wuu u jeclaa. Beri dambe goor saq dhexe ah ayaa tuug faraskii ka xaday.

Markuu waagii beryey ayuu ninkii faraskii tebey. Isaga oo faraskii guriga agtiisa ka baadigoobaaya ayuu raadkiisi helay. Markaas buu gurigii ku soo laabtay oo sibraar caano ah sahay u qaatay. Faraskii raadkiisii buu ku soo noqday oo raadceeyey. Wuxuu socdaba habeen bay noqotay oo waxba wuu arki waayay. Markaas buu raadkii agtiisa iska seexday.

Waagii hadduu beryey ayuu ku dhacay raadkii. Siduu u socdey ayuu ku soo baxay reer ay xidid yihiin oo walaashiis lagu qabo. Walaashiis baa ku soo baxday oo intay salaantay ku tiri, " Walaal bal warran?", wuxuu yiri,"Walaalay faraskaygii baa la iga xaday". Waxay tiri,"Waa goor dambee caawa iska joog reeraha, ninkaygiina ha inoo yimaadee". Wuxuu yiri "Waa yahay".

Tuuggii faraska xaday wuxuu socdaba waxay kulmeen ninkii faraska lahaa, seeddigiis! . Ninkii baa gartay faraskii. Markaas buu tuggii ku yiri,"Faraska ma iga iibinaysaa?". Tuuggii ba yiri"Haa , laakiin immisaad iga siisanaysaa?". Wuxuu yiri,"Shan halaad!". Tuuggii baa yiri,"Kaa siiyey". Markaas buu ku yiri,"Haddaba faraska soo kaxee ilaa iyo gurigayga!". Tuuggii baa yiri,"Waa tahay". Markaas bay isa soo raaceen.

Reerkii markay yimaadeen ayuu ninkii faraska iibsa seeddigiis aqalkii ku arkay. Markaas buu ku yiri,"Seedd maxaad u socotey?". Ninkii baa ku yiri seeddigii,"Faras-kaygii bad la iga xadey". Ninkii baa ku yiri seedigii, "Faraskaagii mid u eg anigaa shan halaad soo siistey!".

Ninkii baa faraskii eegay, markaas buu gartay inuu faraskiisii yahay. Ninkii faraska lahaa ayaa seeddigii ku yiri,"Faraskaani waa faraskaygii, subaxdii haddii a idmo ayaannu ku garrami doonnaa aniga iyo tuuggu". See giis baa yiri,"Waa yahay". Markaas buu u tegey tuugii o ku yiri,"Ninyahow beerri baan shantii halaad ku siinaya caawa meeshaada bari!". Wuxuu yiri,"Waa yahay". Tuuggu markaas ma oga in ninkii faraska lahaa uu reerka joogo.

Markuu waagii berydey ayuu ninkii faraska lahaa tuu u yimid oo ku yiri ,"Tuugyahow ,faraskaad ninkaas ka gadanaysaa waa faraskaygii". Tuuggii baa yiri "Been baa sheegaysaaye farasku waa faraskaygii, anigaana kooreeye oo jare baray!".

Arrintii bay duqowdii ula yimaadeen oo u sheegeen. Duqowdii markay maqleen xaajadii ayay guddi u saareen. Guddigii waxay ku taliyeen in la dhaariyo ninka la yiri faras buu soo xaday". Guddigii baa nimankii u yeeray oo kii faraska laga xaday ku tiri,"Waxaannu ku goddoominnay inuu ninku dhaarto oo ku dhaarto inuusan faraska soo xadin". Tuuggii baa yiri,"Waan dhaaranayaa". Markaasuu ninkii faraska laga soo xaday guddigii ku yiri,"Gartiinna yeelay, laakiin horta waxaan doonayaa inaan tuugga su^aal keliya weydiiyo". Tuuggii baa yiri "Waxaad rabto i weydii".

Ninkii baa seeddigiis ku yiri,"Faraska shirka ka fogee". Markuu seeddigii farskii kaxeeyey ayuu ku yiri tuuggii,"Faraskaagu ceebtiisa ma taqaan?..?.'haddii aad taqaanse faraskaagu labada indhood ayuu mid la^yahaye ma midda midigtaa, mise midda bidixda?". Markaasuu tuuggii aamusay oo hadalka ka soo bixi waayey. Duqowdii baa markaa ku tiri,"Hadal oo noo sheeg ceebta faraskaaga!". Markaasuu tuuggii yiri,"Isha midig buu la^yahay ". Ninkii faraska laga soo x day baa yiri, "Ma maqlaysaan wuxuu yiri?". Markaa buu tuuggii isrogey oo yiri,"Isha bidix buu ls^yahay!". Ninkii baa yiri,"Hubso". Tuuggii baa yiri ,"Waxaan hubaa inuu faraskaygu isha bidix la^yahay".

Markaas buu ninkii faraska laga soo xaday intuu qoslay odayaashii ku yiri,"Aniga faraskaygu labada indhood ilna ax kama qabo !!" . Odayaashii ba faraskii eegay, mise ilna wax kama qabo oo waa fayow yahay. Meeshii baa tuuggii -na xaal lagu saaray, ninkii faraska lahaanna faraskiisii la siiyey.

## 30. WIILWAL IYO WADAADADII DHIIRANAA

Ninka Wiilwaal la oran jirey, saddex wax uu lahaa rag ma wada lahayn, baa la yiri. Mid weeyaane horta geesi buu ahaa, ta labaad deeqsi buu ahaa, ta saddexaad wuxuu ahaanin fardo-fuulka aad u yaqaan. Wiilwaal waxa la yidhi wuu dagaal badnaa, dad badanna wuu dili jirey niman wadaado ah oo nabad jecel ayaa u yimi Wiilwaal, maalin waalmaha ka mid ah markay ka yaabeen siduu wax u galayey iyo siduu wax u dilayey. Markaasay ku yiraahdeen Wiilwaal ,"Ilaahay mooyaane nin laga baqaa ma jiro?". Wiilwaal baa wadaadadii u jawaabay oo ku yiri,"Malaa ninka biqimaynno, Illaahay mooyaane nin laga baqaana ma

Muddo bil ihi hadday ka dambeysey , ayay wadaadadii u yimaadeen haddana, markaasuu ku yiri,"Bal warrama". Waxay yiraahdeen"Halkii baannu ku adkaysanay oo nin laga baqaa ma jiro illaahay mooye". Markaas buu yiri "Wa hagaage orda oo iska taga".

Maalin dambe ayuu raggiisii u yeeray oo ku yiri xero weyn oo adag ii dhisa, markaasay u dhiseen. Dabeec wuxuu ku yiri"Wadaado dhan u yeera meel ay joogaanba", Illinka xeradana wuxuu ka dhisay aqal weyn oo isu dalol Markaasuu dhawr wan aqalka gudihiisa ku xiray.

Markay wadaadadii yimaadeen ayuu xeradii ku ooday. Markaasuu golxob isla soo hor taagey wadaadadii, markaa nimankiisii ku yiri,"Wadaadka u horreeya u yeera, "Waa yeeray". Markaasuu billaawihiisii wan dhegta dhiiga u daray! . Markaasuu yiri wadaadka ku xigana soo qabta,

"Markii wadaadkii kale loo yeedhay ayaa dabsi weyni gashay, oo wadaadadii kalena argagaxeen laakiinse xaggay u carari! waxay ku jireen xero adag, rag adagina way hor taagnaayeen oo nin iyo waran iyo gaashaan u sida, intii markaa la qaadan jirey hubka.

Markuu kii labaad mariyey ee kii seddexaad uu mariyey kii afaraad wadaadadii u adkaysan waayeen markaasay ooddii jiidheen, Wiilwaal baa markaa intuu qoslay yiri, "Wadaadow kolkii hore waxa i tiraahdeen "Illaahay mooye nin laga baqaa ma jiro, iminkana waxaan idin tusay inaydaan haliini ku adkaysan, oo cabsi weyni idin gashay. Afartii wadaad ee aad moodayseen inaan dileyna waa kuwan! Se waxaan dooneyey anigu, bal inaan ogaado halka aad qabsataan inaad ku adkaysanaysaan oo hal adag u noqonayo. Eegase waxaa iiga kiin muuqaneysey cabsi. Haddaba weligiiniyo allihiin, waxa aad odhaneysaan dhab uga fiirsada"! Buu yiri Wiilwaal.

## 31.GABADHII RAGGA JIRABTAY

Soomaalidu berigii hore way is jirrebi jirtay marka nin gabadh is doonaan markay hadalka isla gartaan, ayay is guursan jireen. Sidaas caado ayay u ahayd berigii hore

Haddaba, gugii marla roobku da^o ayaa dhallinyarada mid waliba timaha soo cadaysan jirey oo cayaar gudi jirey Markay gabdhaha u yimaadaan ee ay la cayaar baxaan, ayey la haasaawi jireen. Cayaarta dabadeed, ayaa mid waliba gabadha ishiisu qabato ku oran jirey "Inaan ku guursadaan doonayaa". W

Waxay sidaa ku socotaba, gabadh baa is tidhi, bal ragga jirrab ninka kuu habboon ee ku guursan kara aad ogaatid, Markaasaa nin u yimo oo ku yiri, "Gabadhyahay waxaan doonayaa inaan ku guurso". Waxay ku tiri, "Waa tahay , ee waanku ogolahaye ee xoolahaagu waa maxay?". Wuxuu yiri,"Anigu xoolo riyaan hodan ka ahay". Waxay tiri " Anigaa mar kuu imaan doonee reerkaaga igu sug ".

Markaasaa waxaa u yimi nin kale oo ku yiri, "Inaan ku guursadaan doonayaa". Waxay ku tiri "Waa yahaye, oo waan ku ogolahaye waxaad ii sheegtaa xoolahaaga". Maxaa ku bohoro ah? wuxuu ku yiri, "Anigu lo^da ayaan hodan ka ahay". Waxay tiri, "Anigaa reerkaaga kuugu imaan ee igu sug".

Markaasuu mid kale u yimi oo ku yiri, inaan ku guursadaan doonayaa, waxay tiri; Waa tahay ee waa maxay xoolahaagu? Waan ku ogolahe wuxuu yiri Ido ayaan anigu hodan ka ahay, waxay tiri waan kuu imane reerkgaga igu sug. Markaasaa nin kale u yimi oo ku yiri: "Inaan ku guursadaan doonayaa, waxay tiri: Waa maxay xoolahaagu? Wuxuu yiri: "Geel ayaan anigu hodan ka ahay waxay tiri: "Anigaa kuu iman ee reerkaaga igu sug.

Gabadhaasina waxay doonaysay waqtiga Jilaalka inay u tagto raggaas oo ay jirrebto iyaga iyo xoolohoodaba.

Kolkii Jiilaalkii soo galay bay gabadhii ninkii Riyaha lahaa u tagtay oo ay ku tiri: "Iminkaan diyaar ahay inaad i guursato ee maxaad ka leedahay? " Wuxuu yiri: "Gabadhyahay, sow arkimaysid dhibta i haysata imika riyahay ayaan qaaraab meel u kala duwaa; aniga imika uma jeedo inaan wax guursado".

Gabadhii baa u tagtay ninkii lo'da lahaa oo ku tiri, waadigii gu'ga ila hadlay; ee inaad imika i guursataa baan doonayaa! wuxuu ku yiri: Gabadhyahay, adigaaba hadalkaasi ku haysaa sow arkimaysid lo'dii inaan qaar ceelkii u arooriyey; qaarna an caws u soo guray qaarna imika halkan lagu marayo. Hadaba, dhib badan baa i haysata; oo ma ihi nin imika u jeeda inuu guursado, markaa wixii lo'da noolaada iyo arageed; ee orod iga soco imika.

Markaasay gabadhii u tagtay ninkii Idaha lahaa. Waxay u timi ninkii idaha lahaa oo wanankii shishlaa iibiyey; timir iyo bariisna soo qaaday; idihiina la soo waraabiyey shalay; wan shilisna qalay oo subagiisii la shiilayo; oo timirtii caddeyd la cunayo.

Dadkii reerkiisuna uu ladan yahay. Markaasay ku tiri: "Ninyohow, waa taad gu'ga ila hadashay ee inaan ku guursado ayaan doonayaa,oo sidii aan kuu sheegay, waxaan ahay nin lada oo hodan ah, waxaasaana Ilaahay xdrada ii geliyey. Waxay ku tidhi: "Bal beritaan kugu soo noqon ee i sug."

Markaasay u tagtay ninkii geela lahaa oo ay ku tiri,: "Waa taynu gu'ga balllannay; ee imikaan u diyaar ahay guur ee diyaar ma u tahay adigu?"
Wuxuu ku yiri: " Waan ku doonayey; inaan ku guursadona diyaar baan u ahay; waxay aragtay gabadhii,geelisii oo badh jiilaal dhalay oo ramadkii la lisayo badhna rimeyan yihiin. Reerkiisu sidii gu'ga oo kale u ladan yahay. Kolkaasay ka soo noqotay; oo reerkoodii ay timi.

Markay reerkoodii ku soo noqotay ayaa aabeheed ku yiri, "Bal warran" Waxay ku tiri, Warramay; ee riyoole rag ma aha, Lo'ina reer maaha; aabbo geel lax ku; idaa se ka soo rogey".

Inantaasi waxay soo ogaatay in xoolaha la dhaqdo geela iyo iduhu ugu wanaagsan yihiin. Waxa kale oo ay soo ogaatay; gu'gii raggu inuu isku wada mid yahay; oo mid waliba is yir-aahdo waad guursan kartaysaa asaanay qaarkood guursan kareyn markaas iyo mar kale toona; Jiilaalka iyo gu'guna aanay iskugu mid ahayn;.
Sidaasay aabbeheed ugu warrantay inantaasi.

QAYBTA II

# S H E E K A   C A R R U U R E E D

# S O O M A A L I Y E E D

Dahabo Faarax Xasan

Xamar, Disember 1976

TUSMADA SHEEKOOYINKA

1. CATIR CAANA KU NUUGE........................ 1 - 21

2. ABEESO IYO SAGAARO........................ 22 - 31

3. SHIMBIR GARABLA';;........................ 32 - 43

4. WALAALO ISJECEL........................... 44 - 60

5. QAYB LIBAAX ................................ 61 - 68

6. TAKARA FAW FAW ............................ 69 - 83

CATIR CAANA KU NUUGE

Waa baa waxaa meel hawd ah ku noolaa reer sabool ah oo xoolo ka leh soddomeeye ari ah iyo rati ay ku guuraan. Xaasku wuxuu ka koobnaa oday, habar iyo saddex gabdhood oo ay dhaleen.

Odayga reerku wuxuu caan ku ahaa oo geyigoo dhan laga ogaa inuu catirta uu ku dhuuqo caanaha.

Taasi waxay ahayd arrin yaab leh oo dadkoo dhammi la amakaagsanaa. Iyada keliyana ma ahayn astaamaha goonida u ahaan ninkaas. Sidaas darteed baana loogu magacaabay CATIR CAANA KU NUUGE. Waxyaabaha kale oo uu ku caan baxay waxa ka mid ahaa inuu ciddi dheer oo sida ciddiyaha libaaxa u soo qoolaaban ku lahaa cagta bidix suulkeeda.

Waxyaabahaas ka sokow, Catir Caana ku Nuuge wuxuu ahaa nin sansaankiisa laga baqo oo markuu ku dhugto indhihiisu dareen xun iyo qamandhaco ku gelinayaan. Wuxuu lahaa timo cirro ku dhafan tahay oo raamoobey oo aan weligood shanlo la dhex marin. Weji ballaaran oo ay ka dhex muuqdaan laba indhood ood mooddo inay baalashoodu kala sarreeyaan buu lahaa. In kasto

oo uu ku dadaali jirey inuu raamaha wejiga ku soo daatay ka xaydo, misana raan dheer baa had iyo jeer ka lalmanaan jirtey dusha dhafoorkiisa midig.

Dhererka Catir Caana ku Nuuge wuxuu ahaa meel-dhexaad, luguhu waxay lahaayeen qaabka laba qaanso oo aad loo soo godey? Haddii uusan hogfahaas lahaan lahayn, waxaa lagu tirin lahaa ragga dhaadheer. Dhar wuxuu ka lahaa laba go' oo uu mid inta guntado xaglaha ku joojin jirey, midna garbaha saaran jirey. Waxa iyana hubkiisa ka mid ahaa ubbo, tusbax madow oo qoorta u suran iyo masalle saan ah oo intuu labanlaabo garabka saaran jirey. Intaa waxaa raacay ul uu inta garbaha gudub u saaro dabadeed labada gacmood ka kala ridan jirey sidii uu cuskanayo.

Xoolaha waxaa reerka uga irmaanaa shan riyood oo dhammaantood odayga loo liso iyo saddex laxaad oo gabdhuhu finnaaqsadaan, labaentoodana ku subkadaan kuna dhaashadaan.
Haddaba waxaa jirtey, in Catir Caana ku Nuuge tuhunsanaa oo had iyo jeer iskula hadli jirey in naagtiisu gabdhaha wax u buriso wejiyadooda dhalaalahaya dartood. Sidaas aawadeed buu odaygu wuxuu ku tashaday inuu gab-

dhaha hayjad cidla' ah habaabiyo si uu keligi ugu dheef-sado xoolaha yar.

Si uu go'aankaas u meel mariyo wuxuu markii hore la hadlay naagtiisa oo ku yiri:
"Gabdhaha wejiyadoodu had iyo jeer waa dhalaalayaan, anigana waxa dhaffoorradayda ka muuqda jiilaalka jir-rabkiisa! Maxay arrintaas u dhacday? Ma wax baad gab-dhahaaga u qarisaa?".
"War waxaan u buriyaa ma jiraane, gabdhuhu idaha caa-nohooda bay inta dhigtaan labeentooda ku dhaashadaan, Caiimaankana ku qabaan", bay habartii ugu jawaabtey. Ca-tir Caano ku Nuuge hadalkaas ma garaysan kuma qancin ee wuxuu yiri:
"Jiilaalkaan xoolaha caanohoodu inama wada deeqaane waa inaan gabdhaha habaabinnaa si aynaan gaajo isugu kor dhiman. Maxay kula tahay arrintaasi? Sheeg haddaad talo dhaanta hayso!".

Habarta oo aan weligeed ra'yi ka diidin nin-keeda, qaadanla'se in gabdhaheeda la habaabiyo baa u jawaabtey iyadoo iska dhawraysa inay ka hortimaaddo hadalka saygeeda:

" Dhawaan jiilaalkaan xumi waa dhammaan doonaa, maxaa yeelay, kicin baa cirka galay oo goor ilma la habaabiyo ma joogno", bay ku tiri.

" Awalba waa tuhunsanaa inaad gabdhaha iiga roon tahay, haatanna daboolkaad ka qaadday oo shaku dambe iigama jiro taas. Anigaase talo i jirtaa sidaan ka yeeli lahaa"; buu Catir Caana ku Nuuge hadalkiisii ku soo gabagabeeyey.

Habartii waxaa ku dhashay welmel iyo baqdin, aqoon ay ulahayd tabaha ninkeedu isku daafaco aawadeed. Waxyaluhuu samayn karey hadday ka fekertey, waxaa ula dhibaato yaraatay in gabdhaha la habaabiyo, iyadoo nafteeda ku sasabaysa rajo yar oo ahayd in abdhuhu heli kareen meel ay u ciirsadaan, haddii la habaabiyo iyadoon wax kale la yeelin. Habartu waxay ka warhaysey in ninkeedu ahaa tafaafulow khatar ah oo buuraha guuriya, qofkuu doonana kadab gooya isagoon far u fidin.

" Catirow weligaaba waad iga fiira dheerayde aan gabdhaha habaabinno, jid baad iga leedahayo, waxaan xoolo ka haysannaana waa xoogaaga ariga ah oo ma wada manaafacaadsan karno sidaad adiguba sheegtay,bay tiri habartii.

" I garan ogidaa, walloe inaad xilajanno ku bannaan tahay baan hubaa! Ka xilli'id adigu tabtii gabdha lagu fogayn lahaa,..... Waa hawl maskax iyo fiiro rag u baahan. Ii daa aniga,........, ii daa aniga! Waa hawl xirrib u baahan.........", buu ugu war celiyay.

Catir Caana ku Nuuge wuxuu habeenkaas seexday isagoo ku hadaaqaya: waa hawl fiiro iyo xirrib u baahan!. Markii waagu beryey buu inta ratigii reerka soo qabsaday, raray, gabdhihiina, fuuliyey oo waagu intuusan beryin la guureeyey isagoo leh:
"Maandhooyin, maanta waxaan aadaynaa berrin gocoso leh, waa la arki doonaa tiinnii fiicnaata oo gocoso badan soo qodda, beretan baa jira ee ogaada".

Wuxuu afka u saaray hayjad cidla' ah oo aan isaga ma ahane cid kale aqoon. Wuxuu buuro ka dhaco; wuxuu kaymo dhex xulo, wuxuu dooxooyin dhaafo, ugu dambaystii wuxuu ku soo dhacay dhul roobla'aantii iyo abaartii inta ka bateen aan geed qoyani ku harin.Qaawanaanta iyo qallaylka geeduhu wuxuu degaankii u ekay-

siiyey ciirwaamo aan kal go' lahayn. Geedohoo dhan laamihii baa ka daatay, mid mid dhifa oo hal adayg lagu yiqiin ma ahano, sida quraca iyo bilcilka.

Maalin gelinkeed hadday dhulka caynkaas ah sii dhex xulayeen buu Catir Caana ku Nuuge gabdhihii ratiga ka dejiyey oo inta geed qurac ah oon hoos fiican lahayn go'iisii ku dallaallimeeyey hoos jiifsaday isagoo leh:

"Berrinkaas ku faafa oo gocosada inooga soo qoda.Anigu halkaan baan seexanayaa oo idinku dhaawrayaaye, orda maandhooyin, ducadaydaad qabtaane".

Gabdhihii tartan bay bilaabeen iyadoo mid waliba ku dadaalayso inay labada kale ka gocoso badiso, sidaana aabbeheed ku raalli geliso, ducadiisana ku galabsato.

"Goonow, garrow, gocosooy ku mee, goonow, garrow gocosooy kun mee", bayna ku heesayeen.

Intii gabdhihii gocosada ku maqnaayeen buu odaygii koortii ratiga ka soo lulay geed qurac ah laantiis dabayshu markay ruxdaba la moodayo in ratigii meelaha ka dhow yahay, go'ii balanballada ahaa hoostiisana wuxuu qotomiyey xaar uu wax ku akhriyey oo markii gabdhuhu "aabbe" yiraahdaanba "hee" dhahaya. Markuu sidaa yeelay buu ratigii hogaanka qabsaday oo gabdhihii uga dhuuntay hayjad cidla' iyo abaar ah, oo gurigiisii ku noqday isagoo raadgadanaya.

Markay casarliiqii tahay, oo qorraxdu baalka sii dhiganayso, ayaa gabdhihii oo kolayadoodii gocoso ka soo buuxshey sidii wax dareen galay isku soo urureen iyadoo boor iyo habaas timihii iyo indhihii ka buuxsameen. Waxay ku orondeen meeshii ay odayga ku ogaayeen. Inkastoo ay qorrax dhac ahayd misana go'ii odaygu geedkii buu ka bilig bilig lahaa. Gabdhaha tii ugu yarayd, Samayo, ayaa geedkii ku soo hormartay iyadoo danteedu ahayd inay ku faanto gocosaday soo qodday tiradeeda.

"Aabbe, aabbe," intay lahayd waxay maqlaysey cod leh "hee" oo ay garan weydey meesha odaygu kala hadlayo. Geedkii bay xagga iyo xagga u dhaaftay, kuna warwareegtey, har haddii ay garatay in codka la hadlayaa uusan dhaafsanayn agaggaarka geedka. Intay Samayo warwareegga iyo doondoonista odayga ku jirtey baa waxaa soo gaarey labadii kale oo mid waliba doonayso inay ku faanto badnaanta gocosaday keentay, sidaana ku mudato ammaanta iyo ducada aabbeheed.
Mid baa waxay ku joogsatey xaarkii odaygu dhigay markuu aah yirina jaanta kala booddey maxaayeelay, waxay u malaysay inay odaygii beerka cag ka saartay.
Markay hoos u eegeen bay garteen waxa la hadlayey maanto dhan inuu xaarkaas ahaa. Naxdin, qarracan iyo baroor bay iskula walaahoobeen markay ogaadeen in aabbohood meeshaas cidlada ah uga tegey.

Gabdhihii iyagoo aad mooddo in qabri ku dumey bay

odayga raadkiisii raaceen intii weli iftiinku jirey. Wuxuu raadkii la aadey hayjad ka duwan meeshii ay markii hore ka yimaadeen.
Nasiib darro, raadkii wuxuu la galay meel dhagxan badan oo buur gaaban dacalkeeda hoose ku taal aaskiina waa madoobaaday.

Intay socodkii hayeen bay ka soo kordheceen jees laba qar meel u dhaxaysa yaal. Aqalka hortiisa waxaa daadsanaa lafo inta sika batay meelaha qaarkood buuro yaryar sameeyey. Waxaa kaloo gabdhahu la yaabeen inayan xera xoolaad guriga ku ag ool, sidii la arki jirey.

Saxarla', oo ahayd gabdhaha tan ugu weyni waxay iskula hadashay in reerka aabaarihii dartood xoolihii dhaafeen ama wada qasheen markay caano ka waayeen.

Markay guriga irriddiisa soo istaageen baa waxaa ku soo baxday inan yar oo aragtideeda wanaagsani gabdhihii rajo iyo niyadsami ku abuurtay. Saxarlaa markaas hadashay oo tiri:

"Abbaaye na waraabi, asqaa naftu nooga dhacaysaaye".

Gabadhii markay biyo ka dhergisey bay ku tiri: "Maxaa meeshaan idin keenay ood ka soo doonteen? Miyaadnnaan ogeyn in dalkaanu yahay dal dadqalato, ummad oo dhammina uga qaxday daraaddeed? "Isaga taga halakan inta goori goor tahay".

"Aabbahayo ayaa na keenay halkan oo dabadeed nooga dhuuntay, sidaas aawadeed meel aan aadno iyo si aan gurigayagii ugu noqonno midna ma naqaan, ee waa ku baryaynaaye caawa keliya na hoyaadi, nana badbaadi, berriba wayska tegaynaaye", bay ugu jawaabeen gabdhihii.

"Haddii ay taladaydu ku xiran tahay oo aan awoodo, waxba idinma gaareen, cidla'na idiin ma direen; laakiin guriga kan waxaa iska leh habar dadqalato ah oo magaceeda la yiraahdo DHEGDHEER; aniguna gabadheedii baan ahay; inkastoo aanan dadka hilibkiisa cunin, raallina aanan ka ahayn waxa hooyaday ku kacayso. Balse haddii aydnaan aqoon meel aad caawa aaddaan, waa idin hoyaadinayaa badbaadadiinnana waa ku dadaalayaa caawa keliya. Wixii caawa ka dambeeyase ballan kuma qaadi karo in aad ka baxsan doontaan Dhegdheer", bay tiri.

Markii gabadhii Dhegdheer intaa tiri bay gabdhihii isugu sheegtay in magaceeda la yiraahdo Faadumo, dabadeedna ku sooryeysey hilib solan. Kolkay waajiyadooda ka dareentay inay gabdhuhu ka didsan yihiin hilibka la siiyey bay waxay hadalkeedii ku dartay:

"Waxba ha ka biqina, hilib dad ma ahane, waa hilib ugaareed oo habartu ii soo dabtay mar haddii ay ogtahay inaanan hilib dadeed cunahayn".

Gabdhuhu markay hilibihii laysteen bay Faadumo

aqalka duleedkiisa dambe ku qarisay dabadeedna raar ku dadabtay. Intey halkaa ku jireen baa Saxarla' waxay soo xusuusatay sheekooyin ayan run moodi jirin oo Dhegdheer ku saabsan. Cabbaar hadday halkaa ku jireen baa waxaa soo dhigatay Dhegdheer oo wiil timacad oo mayd ah sidata.

Wiilkii bay aqalka hortiisa batalaq ku siisay. Intayan hadal kale ku tiraabin bay waxay tiri iyadoo sanka taagaysa:

" Naa Faadumo, naas hablood baa ii urayee yaa dabaday guriga yimid?".

Faadumo: "Hooyo waa kayga naaska kuu urayaa, weligaa ima baratid oo had iyo jeer waxaan jirin baad malaysaa. Mise waxaa doonaysaa inaad anigana i qalato? Markaad islaan oo dhan dhashiisii soo dhammaysatay!".

Dhegdheer: "Naa dad aan qasho waayi mahayo inta aadanuhu ifka ku nool yahaye, runta ii sheeg oo soo saar uunka aad qarinayso".

Faadumo: " Hooyo aan runta kuu sheegge iga ballanqaad horta inaadan u hunguriyoonayn dadkaan qarinayo!".

Dhegdheer oo aan weligeed gabadheeda wax ku diidin baa ballankii qaadday iyadoo ka xun kana ciilqabta inay ka qaaddo naasaha urkooda dhareerku uga soo daatay.

Faadumo gabdhihii bay soo saartay oo magacyadoodii duqda u sheegtay, iyadoo leh:
"Hooyo, wax badan baan adiga iyo dadkaad qalanayso u adkaystay, oo waxaan kaa baryahayaa inaad ii badbaadiso gabdhaha aan doonayo inay saaxiibbaday noqdaan oon wehel ka dhigto".

Dhegdheer oo ku dhaygagtay gabdhaha dhabannadooda dhalaalahaya baa inta calyo dib u liqday waxay anar ku bixisay in gabdhaha midii qoryo soo gurto, midinadabka shiddo, midina wiilka qasho midda hartayna injirta ka gurto.

Dhegdheer waxay ahayd naag dheer oo soo godan midabkeeduna maarriin casaan xiga yahay. Markeedii hore waxay u dhalatay qurux inkastoo bahalnimada iyo dugaagnimadu dhalan rogeen. Haddii ayan dhegi dhegta kale ka dheerayn waxaa lagu tirin lahaa dumarka quruxda badan. Dadka qaarki waxuu qabey in dhegta dheeri sal u ahayd sababta ay dadqalato la noqotay oo dabeecad kan dadka kale ka duwan ula soo baxday. Waxay lahayd maji dhuuban oo uu ka taagan yahay san dhererkiisu geel dhexaad yahay iyo dhabanno shuba, midabkooduse gahayroobey. Markii laga joogo dhanka aan dhegta dheer lahayn, wax dareen ah ama baqdin ay dadka gelisaa ma jirin. Aragtida dhegta dheerise dareenla'aan ma dhici jirin. Gacanta bidix cududdeeda waxaa uga jirtey dugaagad hilibka ceejinaysa oo ayan weligeed iska bixin, meelaha qaarkood oy ka soo durkisayna haaro ku reebtay.
Hilibka da'du jilcisay dartiis bay xanuunkii iyo lahankii badnaa ka soo yaraadeen.

Dadyow kale waxay sheegi jireen inay Dhegdheer ahayd naag intay ummulnimo ku gaajootay, weydeyna wax u diiqa, dadqalato noqotay, dabadeedna ku tagtay dabeecaddaas xun oo iska soo qabanweysey. Waxaase la yaab leh inayan qalan gabadhii ay ummusheeda ku gaajootay. Waxaa kaloo iyana lagu tilmaami jirey inay rag u badnaayeen dadkay qalan jirtey oo mar dhif ah, oo ay ka maarmi weydo ma ahane, ay dumarka cuniddooda aalaaba ka maadsan jirtey, iyadoo taas sabab looga dhigayo necayb ay ragga u qaadday, kaddib markii iyadoo ummul ah ninkeedii xera uga guurey? Markii ka guuraeyey wuxuu ku marmarsooday inaan ratigoodu aqalka iyo ummusha wada qaadi karin, sidaas aawadeedna loo soo gaadiid celin doono? Dib dambese ugu ma soo laaban iyada iyo gabadhiiba.

Dhegdeeda dheer waxay ku fasiri jireen, in markay uurkeeda lahayd, hooyadeed ay jamatay sac guduudan oo madinnimadiisa darteed haan weyn keligi laga lisi jirey. Fekerkii sacaas laabteeda ku daabacnaa dartii bay gabar dhegi dhegta kale ka dheer tahay oo la moodo dheg weyleed dhashay, bay oran jireen, dad badanina rumaysnaayeen.

Gabdhihii hawshii Dhegdheer u dirtay bay isu qaybsheen.

Faaduno inta dab oogtey bay digsi weyn oo biyo ka buuxaan saartay? Markay aragtay in biyihii karayaan bay gabdhihii isugu yeertay oo ku tiri:

"Hooyaday mar dhow way gami' doontaa, waxaana lagu gartaa inay seexatay waa dhegta dheer oo balaq dhabanka ku tiraahda. Aynu dilno oo biyahaas karkaraya madaxa u gelinno. Mar dambe dadqalato agteed inaan ku noolaado dooni mahayo, umana adkaysan karo? Haddaan la sii joogo waxaan ka baqahayaa inaan aniguba dadqalato noqdo".

Gabdhihii way ku farxeen taladaas Faadumo soo jeedisey, inkastoo shaki iyo baqdini indhohooda ka muuqdeen.

Dhegdheer sidii injirta looga gurayey baa dhegtii markii hore taagnayd soo dabacdey, iyadoo tartiib tartiib dhabanka xaggiisa u soo liicaysa. Markay sidii ay dareenla' dhegtiis ruuxii ka idlaaday, oo ay dhabankii habarta dushiisa isku biliqday, bay gabdhihii digsigii karayey inta soo qaadeen, dhegdheer madaxa u gesheen, iyagoo xooggooda oo dhan isugu geeynaya inay ku hayaan biyaha kulul ilaa ay ka bislaatay oo halkaa ku ruux beeshay.

Markay hubsadeen in habartii talagtey, bay gabdhihii farax daraadii is wada qabsadeen, oo qosol gariir la daateen. Dalka dhegdheer degganayd weligeed dhibic roob ahi tifiq kuma oran, aadanahay dhiiggiisa daadsisay inkaartii ay ka galabsatay aawadeed. Gabdhihii intay geed hoostiis fariisteen bay cayaar roobdoon ah qabsadeen iyagoo leh:

" Allow roone roobeey!
Dhegdheer dhimatay roobeey!

gabdhihiisii la guursadey oo carruur dhaleen baa hunguri galay, oo uu is yiri gabdhahaaga xoolo u doono.

Kaddib markuu soo ogaadey meelaha ay kala deggan yihiin buu hortii waxuu isku sii daayey guriga gabadhii weynayd, Saxarla'.

Wuxuu gurigeeda ku soo beegmay goor ay makhrib dumey tahay oon geed iyo geel la kala garan karin, iswaraysigoodiina sidatan buu u dhacay:

Catir Caana ku Nuuge (markuu cido hale ka soo tilmaan qaatay buu soo hor istaagayaa Saxarla' oo dhiil ku culanaysa aqalka hortiisa) suuye: "War nabad ma la sheegay?".

Saxarla': (oo is dhaafinaysa inkastoo ay garatay inuu aabbeheed yahay) "Belaayo ma jirto intaaannu ogənahay ee adigu xaggee naga salaantay, adeer?".

Catir Caana ku Nuuge: " Allow nimaan wax ogeyn ha cadaabin, Saxarla' sow i aqoon maysid? Aabbahaa baan ahay, goortii isugu keen dambayseyna weynu kala dhunnay oo isweyney. Laba sano ayaan idin baadi goobahayey, ugu dambeystiise waa samrey oo waxaan is iri bahal baa cunay gabdhahaagii ama hayjad cidla' ah bay

asqo iyo gaajo ugu dhinteen. Naxdintaan qaadey waayo badan baanan oomati dhadhamin. Aniga iyo hooyadiinna cayr baannu nahay oo isla waagii baa xoogaagii ariga ahaa naga baxsaday. Laabi laab u la', intan idinka habawgiinna ka walwelsanayn buu arigii dacdarroobey oo iska baxsaday. Intaa waxaan ku soo gaarney deeqda iyo gargaarka muslinka kale....... Waa deeq Eebbe haddaad idinkiiba nooshihiin oo aan idiin baxsanno.

Allow ha noo diidin cid aan u baxsanno"

Saxarla': "Aabbahay haddaad tahay, burco[1] "hee" leh ma ogeyd? Maro bilig leh ma ogayd? Koor balow leh ma ogayd?".

Catir Caano ku Nuuge:" Haa maandhe, waa xasuustaa oo waa koortii ratiga oo geedka ii surrayd iyo go'aygii aan meesha uga tagooday ee aan islahaa ku soo noqo markaan awrkii arkiwaayey oo aan doonay. Dabadeedse meel aan ka imid iyo meel aan ku socdey baan garan waayey; sidaas baynuna ku kala dhunnay oo isku weyney".

Saxarla': Ina kala wad haddaba, agab iyo ixsaan

1) Waa saxaradii odaygu geedka hoostiisa dhigay inta wax ku akhriyey.

toona ina kama dhexeeyo oo ilmihiis
caasi baad tahaye".

Catir Caano ku Nuuge meeshaasuu ka sii qaataabsadey, sidaana kuma samrine aadey meeshii gabadhii dhexe, Suubban, loogu tilmaamay. Goor ay subax tahay oo xooluhu ayan weli sopfin buu gurigeedii ku soo beegmay. Suubban oo markaas ninkeedii socdaal ku maqan yahay baa markay ogaatay aabbeheed, si fiican oo kal iyo laab ah u soo dhowaysey oo ardaaga guriga gogol u dhigtay. Haruub weyn oo caano ah bay siisay dabadeedna ariga xeradiisa bay ku noqotay.

Catir Caano ku Nuuge: "Suubban, Alla dhowryeey, ducadeydaad qabtaaye, catiri sii aan caanaha ku dhuuqo, waa oday iyo camalkiise".

Suubban: "Aabbe, waxaad ka soo qaadataa haanta aqalka taal gadaankeeda, hana iiga joogsan wiilka yar oo hurda".

Odaygii isagoo guriga sii gelaya buu wuxuu isha ku dhuftay wan baraar ah oo haruubkuu ardaaga qotonsaday afka ku ritey oo qurqurinahaya caanihii. Bur buu haleelay, tallaabadii u horreysey buu wiilkii ciddiddii qoolaabanayd caloosha ka suray. Wankii buu ku boodey oo sanbacaraarka burkii kaga jebshey, qayladii iyo qalalaasihii baa xoolihii dideen oo oodda soo jebsheen halkaana hali bowdada ka jabtay.

Odaygii oo habaartamahaya una qaba in tuug dhacay baa waji saaray xaggii loogu tilmaamay degmada gabadhii yarayd, Samayo.

Wuxuu socdo iyo wuxuu socdaba, laba maalmood kaddib buu, goor ay galab dheer tahay; wuxuu ku soo baxay cidihii Samayo u dhaxdey oo ahaa cido xoolo Eebbe ugu roonaaday. Samayo iyadoon waraysi kale hadal ku lumin baay aabbeheed si fiican u soo dhoweysey. Markii lays waraystay kaddib, waxay u tagtay ninkeedii oo kala tashatay sidii odeyga loo sooryayn lahaa; iyadoo isla mar ahaantaas xusuusinaysa sidii odaygu carruurtiisa u habaabiyey.

Cabbaar hadduu aammusnaa buu markii dambe ra'yigaan soo jeediyey:

"Samayo, aabbihiin waxaa idinku diray, oo uu idiin fogeeyey waa hunguri kuno ay waxla'aanta iyo saboolnimadu sal u ahaayeen.
Waa waalid oo wuxuu mudan yahay lama marin karo lagumana dayan karo ee waxaan ku talin lahaa in cunno uusan weligii cunin oo uusan filahayn in lagu harqiyo, isagaa dabadeed is waansan doona kana qoomamayn doona wixii uu gabdhihiisa ku sameeyey.

"Waa kugu raacsanahay ra'yigaas, waxaynu u qaleynaa wankeenna shan jirka ah, geela sidigta ahna waa loo lisi doonaa, ilaa iyo inta uu ka baansanayo", bay Samayo tiri.

"Subagga sixinka ahna hadba koob ka sii, si uu durbadiiba ku baansado oo midabkiisu u soo noqdo, aad buu u diifaysan yahay", buu Samayo ninkeedii ku daray.

Odaygii ardaa baa loo ooday, oo sar jarco geel ah loogu goglay. Waxaa dabadeed laysu soo daba dhigay cunnadii loo qorsheeyey.

Catir Caana ku Nuuge nin dhibaal iyo gaajo ku raagtey buu ahaaye, wuxuu markii hore isku waalay hilibkii baruurta lahaa: sarar, bari iyo jeeni buu mariyey. Wuxuu ku xijiyey qaafiri fuud ah oo heenku ka sarreeyo. Ugu dambaystii haruubgaal caano ah buu hiririf ka siiyey.

Cawaysinkii markay tahay baa oodafada loo dheereeyey dabadeedna la kala seexday.

Saqda dhexe markay tahay buu odeygii calool fuur iyo wadnabaab la soo boodey.

Wuxuu damcay inuu oodda iska rogo oo dibadda saxaro u tago. Intuu isku simi waayey buu hor iyo daba noqday oo gogoshii afkaa mariyey. Markuu kac is yiraahdaba jaantii buu ku simbiriiqdaa. Wuxuu arkaas bilaabat habaartan iyo calaacal:

ALLO SAMAYOOY AN LAGU DHALIN

ALLOW SUMALOW AN LAGU QALAN

ALLOW SARAREEY AAN LAGU CUNIN

ALLOW SUBAGOW AN LAGU GADAN
ALLOW SIDIGEEY AAN LAGU DHAQAN

Subixii dambe ayaa loo yimid isagoo suuxsan oo dhex jiifa gal shuban ah.

sinnaa, wadajir ayaa looga hortegi jirey, oo laysaga qaban jirey; si nabadgelyadu u waarto, wax wada qabsiga iyo midnimaduna u xoogoobaan, barwaaqada iyo sareedadana loogu wada sinnaado.

Ma ogtahay in khayaanada, mardadabada iyo xaasidnimadu ay ka soo jeedaan, mabda'a hantibursigu?

Ma ogtahayse goortuu bilowday hantibursigu? Yaase bilaabay baad u malaynaysaa?

Waa sheeko dheer, maandhe, oo kaaga baahan inaad dhug u yeelato, si aad ku ogaato runta kaa daahan. Bal dhegeyso.

Waa hore, hore oo aan dhoweyn, baa waxaa meel ku wada noolaa abeeso iyo sagaaro, saaxiibtinnimo gaar ahi ka dhexeyso waxna wada qaraabta.
Waxay kala haysteen, wiil ay abeesadu dhashay iyo gabar sagaaradu leedahay.

Sagaarada ayaa inta badan qaraabashada loo dirri jirey, fudayd iyo orod dheeri la biday daraaddeed, abeesaduna

carruurta ayay la joogi jirtey. Waxaa dhacdayse in mar dambe sagaaradu abeesada cadaaladarri ku tuhuntay, waxyaabo badan oo ka yaabiyey daraadeed. Sagaaradu waxay aragtay in gabadheedu maalinba maalinta ka dambaysa ay sii caatoobayso, meesha abeesada wiilkeedu maalinba maalinta ka dambaysa sii naaxayo oo sii quruxoonaanayo.

Astaamaha kale oo iyana tuhunkeeda sii xoojiyey waxaa ka mid ahaa, iyadoo maalin ay qaraabasho ka soo noqotay, inay sagaaradu aragtay gabadheedii oo afka uus ku leh, iyo wiilkii abeesada oo afka dufan ku leh, sababtoo ah, waxaa jirtey inay habeen sii horreeyey wan buuran qashoen, hilibkiisii oo kumbis (la shiilay) laga dhigayna carruurta in maalinba in laga siiyo lagu heshiiyey. Abeesadu inta sagaaradu maqan tahay ayay hilbaha fiicfiican wiilkeeda siisan jirtey, gabadha sagaaradana uuskii la fogeeyey bay cunno uga dhigi jirtey, oo caloosha uga buuxin jirtey. Waxaase dhacdey, inayan markaan dambe si fiican uuskii afkeeda uga tirtirin, illowdeyna inay baruur ayan cunin afka u marmariso sidii ay weligeedba yeeli jirtey, oo sagaarada ku khatali jirtey.

Maalintii dambe baa abeesadii waxay tiri:
" Naayaa sagaaro, kacoo inoo soo qaraabo, aan carruurta inoo hayee".

Sagaaradiina "waa yahay" bay tiri oo labadoodii kiish qaaday, iyadoo aad u walaacsan oo ciil u dhimanaysa. Waxay kiishkii abeesada ka soo buuxisay mire barde oo ceeriin dabadeedna afka ka saar saartey dhowr hal oo bixil, kiishkeediina waxay ka buu-xisay miro bixil kaddibna kuwa ceeriin afka ka saartay.
Abeesadii markay ku garatey khayaamadii bay inta carootay gabadhii sagaarada mar keliya liqday oo ka soo jeensatey.
Sagaaradii markay garatay, in abbesadu maaggan tahay, inay iyadan liqdo bay baxsatay oo jaha cidla' ah afka saartay.
Say u baydadaysey bay waxay u timid, tuke buul dhisanaya.
Tuke:"war yaa buulka iga hoosaasinaya?".
Sagaaro:"waa sagaaro bisley, bootin dheer kaadi buur maanta
ba'doo, hoogtoo, beerkeedii weydey!".
Tuke:" oo yaa kala baxay beerkaagii?".
Sagaaro:" Abeeso Il giir".
Tuke:" Naa oradoo iga tag waxba kaalama qaban karee".

Sagaaradii iyadoo qarraacansan bay horteeda u roortay, dabadeed waxay ka soo kordhacday xuunsho xaar faganaysa.

Xuunsho:" War yaa igu soo socda?".

Sagaaro:" Waa sagaaro bisley bootin dheer kaadi buur oo beerkeedii lala baxay".

Xuunsho:" oo yaa kaala baxay?".

Sagaaro:" Abeeso il giir.

Xuunsho:" Naa oradoo iga tag, waxba kuuma qaban karee".

Sagaaradii horteeda ayay u oroddey. Say u ordeysey bey waxay mar dambe u timid libaax geel la jooga.

Libaax:" War yaa ba'oo geela iga didshey?".

Sagaaro:" Abtiyow waa sagaaro bisley, bootin dheer, kaadi buur oo maanta ba'doo hoogtoo beerkeedii laga inkiray".

Libaax:" oo yaa ka inkiray?".

Sagaaro:" Abeeso il giir".

Libaax:(oo soo fuulaya qaalin rakuub ah) Naa bal ii gee, naa bal ii gee................"

Sagaaradii libaaxii bay abeesadii u geeysey.

Libaax:"Naa yaa abeeso, haddaad dooneyso inaad naftaada

badbaadiso, sagaarada gabadheedii u celi".

Abeeso:" War wallee haddaadan iga tegin, ilkahayga soofay-
san oo sag mandiileed leh baan sag iyo sag kugu
siin, sullaankiis alla cadaabyahow?".

Libaax:"(oo baqa dhabarka la dhigaya) Naa bal iga gee, na
bal iga gee.................".

Sagaaradii markay aragtey libaaxii oo cabsi darteed cagaha wax ka dayeya bay iyadoo quusatay, iska carartay. Dabadeed waxay u timid dhurwaa lo' la jooga.

Dhurwaa:"(oo madaxa kor u taagaya) war yaa ba'oo baarkiis
Alla cadaabey oo lo'dayda iga didshey?".

Sagaaro:" Waa bisley bootin dheer, kaadi buur maanta ba'doo
beerkeedii la cunay".

Dhurwaa:" oo yaa ka cunay?".

Sagaaro:" Abeeso il giir".

Dhurwaa:"(oo dibi' soo fuulaya) Naa bal ii gee, naa bal
ii gee.........".

Markii abeesadii loo geeyey buu wuxuu yiri:

Dhurwaa:" Naa yaa abeeso, sagaarada gabadheeda dib ugu celi, haddaad rabto inaan ciddiyahayga kala xishoodo calooshaada balliga aad mooddo".

Abeeso:" Huuraaloow, wallee haddii aadan iga tegin, ilkahayga soofeysan oo sag mandiileed leh baan sag iyo sag [illegible] kugu siin".

Dhurwaa:" Naa bal iga gee.... naa bal iga gee.......".

Sagaaradii oo muragaysan baa horteeda u roortay, iyadoo ka qoomamaynaysa saaxiibnimaday abeeso la xiratay, isla mar ahaantaasna qaadan la' khayaanada iyo dhagarta si lama filaan ah dunida uga dhacay, oon welina si cad looga hortegin. Yaase ku dhaca inuu wax ka qabto xaasidnimadaas iyo hororniimadaas abeesadu, si lama filaan ah u la soo baxday, haddiiba libaaxii nafleyda boqorkeeda ahaa ka baqay?

Iyadoo maankeeda figradaasu walaaqayso, bay waxay ka soo kor dhacday shabeel ari la jooga. Waxay soo xasuusatey dabeecad xumada shabeelka lagu yiqiin, taasoo in yar oo rajo ah gelisay qalbigeeda.

Shabeel:" war yaa ariga iga didshey?".

Sagaaro:" Abtiyow waa sagaaro bisley, bootin dheer, kaadi buur oo maanta beerkeedii lala baxay".

Shabeel:" oo yaa kaala baxay?".

Sagaaro:" Abeeso il giir".

Shabeel:"(oo soo fuulaya orgi sogob ah) Naa bal ii gee naa bal ii gee.....". Abeesadii markii loo yimid:

Shabeel:" Naa yaa abeeso, sagaarada gabadheedii sii, haddaadan doonayn inaan xayrtaada baa bi'yo".

Abeeso:"(oo indha kulul ku deyaysa) wallee haddaadan iga tegin ilkahayga sag mandiileed leh baan sag iyo sag kugu siin".

Shabeel:"(oo indheheeda aan libiqsanayn ka yaabban) Naa bal iga gee, naa bal iga gee...........".

Sagaaradii iyadoo si fiican u quusatay buuerkuna halwanayo bay iska tagtay.
Say isaga ordeysey bay waxay maqashay:
"War yaa quullahayga ciidda iigaga rogey?". Way eegtey, mise waa dabagaalle quulle dhilqanahaya!

Sagaaro:" Waa sagaaro bisley bootin dheer kaadi buur oo ba'doo

beerkeedii laga inkiray".

Dabagaalle:"(oo qaarka sare kor u taagahaya qaadan la'na waxa dhegihiisu maqlayaan) oo yaa kaa inkiray, oo ku xad gudbey, jebsheyna, xeerkii nafley oo dhan u degsanaa?".

Sagaaro:" Waa abeeso il giir".

Dabagaalle:"(oo laba quulle qooraha ku soo laabtay) Naa bal ii gee, baa bal ii gee. Markii abeesadii loo yimid buu yiri:

Dabagaalle:" Naa yaa abeeso, haddaadan doonayn in lagaa jaaseeyo xeerarkii inoo yiiil ee aad ku xadgudubtey, sii sagaarada gabadheeda".

Abeeso:"(oo quursaneysa yaraantiisa) war libaax iyo shabeelba la arag macadalla dabagaalle, ee horteyda ka dhaqaaq, haddaadan doonayn inaan ilkahayga sag iyo sag kugu siiyo sullankiis Alla cadaabyahow".

Dabagaalle:"(oo indho aan baqdin ka muuqan ku gubahaya) Naa iga wallee haddaadan miskiinta gabadheeda siin, qoorahayga bal ballaaran baan rug iyo rug kaaga siin", dhuuntana ka galay abeesadii, isagoo muujinaya inuusan

hadalkiisa dib uga noqonahayn.

Abeesadii kolkay ka yaabtay waabasho la'aantiisa ayay qabadhii sagaarada mar keliya soo matagtay, dabadeedna tartiib tartiib dib u guratay.

SHIMBIR GARABLA'I WAX MA GARATO

Beri baa waxaa miyi ku noolaa nin inanlayaal ah, oo had iyo jeer ku taahi jirey, inuu cidduu ka dhashay, xaaskiisa ula guuro, maxaa yeelay, Soomaalidii hore waxay jeclaayeen, oo ku dadaali jireen, inay xididkooda ka fogaadaan; "xidid inuu isu soo xiisuu ku fiican yahay" baa la oran jirey, lana aamminsanaa.

Naagtiisa ayaase badanaa ka baajin jirtey guuridda, iyadoo ku marmarsoonaysa inaan waalidkeed ka maarmi karin ciidankooda.

Waxay gabadhu tegiddooda dib u dhigtaba, maalintii dambe ayaa soddoggii fasaxay oo u oggolaaday inuu ninku reerkiisa la guuro, oo ciddiisa ula wareego, wuxuuse odaygu ka codsaday inuu markii ugu dambaysay u soo dhaansho reerka, dabadeedna guuro.

Ninkii wuu yeelay ra'yigaas oo awrtii oo haamihii lagu raray buu isku daba xirtay oo la dhaqaaqay. Intuu sii socdey buu maqlay dhurwaa gurxamaya oo aad codkiisa mooddo lo' insaaraxaysa. Meeshii dhurwaagu ka ciyahayey buu dhaankii

afka u saaray, isagoo iskula hadlaya, inay lo'dii reer abtigi oo uu meelaha ku malaynayey tahay waxa ciyayaa.

Wuxuu is yiraahdo haddaad gaaraysa ciddii, ugu dambaystii wuxuu gartay inaan cidi aydaas degganayn. Wuxuu sii guureeyaba, wuxuu ku waaberiistey ceelashii uu ka dhaamin lahaa, oon cidina ka cabbayn. Waa siduu rabeye dhaankii buu furay oo haamihii buuxshey awrtiina waraabiyey. Markuu cabbaar nastay buu dhaankii raray. Intuusan dhaqaajin awrtii baa waxaa u yimid dhurwaa qori ismaris ah oo qof iska soo dhigay. Wuxuu dhurwaagaasi ahaa kii habeenkii uu ninku codkiisa moodey lo' ciyeysa.

Habeenkii oo dhan buu isagoo is qarinaya dhaanka soo daba socday. Dabadeed wuxuu ku soo baxay markii uu hubsaday in haamihii la dhaanshey oo awrtii lagu raray.

Halkii baa isaga iyo ninkii isku waraysteen, hawraartii dhex marteyna waa tan:

Qorismaris:" War nabad ma la sheegay?".

Ninkii: " Nabad iyo dareen la'aan baan sheegay, intaannu ognahay, ee adigu maxaad sheegtay, xaggeese

naga salaantay?".

Qorismaris: "Nabad iyo dareen la'aan kaddib, waxaan ahay nin socdaal ah oo dalal badan soo maray, waxaan goobahayaa nin asaagyay ah oo aan ka adkaado, si aan ku beeniyo karaamada abtiga".

Ninkii: "Waxaa ku dabageshey karaamada abtiga runteeda iyo beenteeda aad u salgaaraysaa?".

Qorismaris: " Waxaa lay sheegay inaan habaar abtigey ka galabsaday, kaddib markaan meel shir ah ka sheegay ceebo uu ku kacay".
Wuxuu markaas igu habaaray oo yiri:
"Asaaggaa ka har oo wax ha la qaybsan, Idin Allaan kuu maraye". Waxaa haddaba dhacday in qof kastoo aan ka hor imaado talo iyo tabarba iigaga adkaado, aniguse ma samrin oo weli waxaan goobayaa qof aan ka adkaado ee isu diyaari in aad iska kay dhiciso".

Ninkii: "Maansha la yiri duco abti dhagax bay daloolisaa, habaarkiina waa la cerib".

Ninkii iyo qorismariskii halkaa bay isku haleeleen, oo dirirtoodii legdan ku bilaabeen, marka isku soo boodeen, baa qorismariskii hor loo qaaday oo dhulka lala galay, markaasuu wuxuu yiri:

"Gacan baad i dheer tahaye iska goo".
Ninkiina waa ka yeelay oo gacan buu iska gooyey.
Waa laysku soo boodey oo misana qorismariskii dhulka la dhigay. Suueye:" lug baad i dheer tahaye iska goo".
Ninkii markii lug iyo gacani u soo hareen baa laga adkaaday oo halkaas lagu cunay.

Qorismarikii markuu ninkii cunay buu dharkiisii xirtay oo dhaankii ciddii la qabtay.

Dabadeed wuxuu ku furay oo u geeyey dhaankii reerkii isagoo iska dhigaya ninkoodii.
Markii uu awrtii wax ka furay buu wuxuu galay aqalkii ninku, lahaa kaddib kolkuu ka tilmaan qaatay sansaanka cidda oo aqoonsaday midka uu yahay.

Markii xoogaa la joogey baa naagtii(ninku qabey) waxay u geysey dhiil caano ah, suuye:
"Oontu oontay ma aha", inta gafuurka dhinac u dadbay.

Naagtii markay ka yaabtay dhaqanka cusub oo ninkeedii la soo baxay oo aayan ku aqoon jirin, bay hooyadeed u tagtay oo ku tiri:

"Hooyo, ninku ninkaygii ilama aha oo waan ka shakiyey".

"Naa edeb yeelo caano cunto uma noqdaan nin dhaan laba dhax ah keenaye, neef uga qal ariga oo ka sii leg iyo jeeni", bay habartu ku canaanatey gabadheeda.

Neef baa loo qalay oo leggii iyo jeeni karsan loo geeyey, suuye misana:

"Oontu oontey ma aha ee xagga iiga duw".

Gabadhii oo mar hore dareentey inaan ninku ninkeedii ahayn baa inta hooyadeed isku hallayn weydey, odaygii aabbeheed ahaa, u tallaabsatay, oo u sheegtay inuusan ninku ninkeedii ahayn.

Odaygii markuu gabadhii hadalkeedii dhuuxay buu isagoo iska dhowraya inuu meel uga dhaco nin ku xille, wuxuu yiri:

"Maandhe, is celi; ilaa iyo inta aan kahubsanayno inuu ninku yahay ninkii. Waa tii ninkaagu ku tallami jirey inuu ciddiisa kuula guuro, haddii uu ra'yigaas la yimaado, waa

ninkaagiiye is qabooji, haddii kalese waynu ka tashan doonnaa sidaan ula dhaqmi lahayn".

Qorismariskii oo dareemay mar hore dhiillada gabadha baa meel kastoy aaddo ka daba taga oo dhegeysta waxyaabaha layskula hadlayo. Markuu ogaadey ra'yigii odayga ayuu wuxuu u sheegay ciddii inuu dhowaan xaaskiisa la guurayo.

Sidaas ayaa gabadhii lagu aamusiyey iyadoo weli shakigeedii qabta.

Dhowr beri kaddib ayuu qorismariskii ratigiisa soo qabsaday oo reerkiisii rartay, oo la guuray markuu ciddii nabadaadiyey. Gabadhii oo waalidkeed xaqdhowraysa baa caga jiid ninkii ku raacday iyadoo innaba aan shaki ka qabin inaan ninku ninkeedii ahayn.

Arigoodii iyo ratigoodii bay kaxaysteen, hadday meel dhexe marayaan baa qorismariskii wuxuu soo jeediyey inuu isagu ariga soo kexeeyo iyaduna ratiga ku hor waddo. Arigii intuu soo wadey buu ridii irmaanba qarunfey, markuu caanahii ka dhammeeyana naasaha ka goostay inta bahalnimadiisii qarsan waayey.

Markay meel degeen oo arigii la xereeyey bay waxay naagtii damacday inay ariga soo listo, mise maxaad ii dhiibatay, neef la dhiijiyo oo naas u fayow yahay ma jiro!

Oogga waaberi ayaa reerkii guuray, isagoo jarmaado ah. Waagii markuu si fiican u baryey oo shucaaca iyo fallaaraha qorraxda cirka isku dhildhileen baa qorismariskii wuxuu yiri:

" Naa waa daallanahay oo ratigaan fuulayaaye, ariga soo kexee; hadhow baan isbeddeli doonnaa oo markaaga aan kaa nasin doonaaye".

Dhurwaagii halkaas buu ratigii ku fuulay, dabadeedna reeryada meesha kuruska ku beegan billaawe ku jarjaray oo kurusku markuu u soo bannaan baxay hadba cantuugo ku dhuftaa.

Mar alla markuu qaniinay ayaa ratigii cabaaday, kolkaasay waxay tiri:

"Biya qaboobe maxaa ku helay?".
Naa ratigu go'aaga bilig biligtiisuu diiddan yahaye iska

tuur". Say waa turtay.

Ratigii baa misana cabaaday, sayte naagtii:
" Biya qaboobe maxaad qensetey go'ii tuuraye?".

Qorismaris:" Naa ratigu hilqadahaaga sharqantooduu ka di- daye iska tuur", sey waa turtay.

Mar saddexaad baa ratigii cabaaday, sayte iyana:" Biya qa- boobe maxaa ku helay?".

Qorismaris:" Naa ratigu kabahaaga kabax kabaxdooduu ka di- dayaaye kabaha iska xoor".

Kabihii markay tuurtay buu awrkii misana caac yiri.

Qorismaris:" Naa ratigu gambadaada madoobaanteeda ayuu dii- ddan yahaye iska tuur".

Markay naagtii wax walba xoortay oo ratigii cabaadkii deyn waayey buu wuxuu yiri:

" Waa is beddelaynaaye kaalay adigu ratiga fuul aan kugu wadee, hana iga dhugan meesha xaarinku ku daboolan yahay".

Gabadhii markay ratigii fuushey bay isla mar ahaantii xaarinkii hor u feydey oo eegtay, mise ratiga

qaaxadii baa daloosha, kuruskiina waa cunan yahay.

Awalba iyadoo dhiillo iyo dareenba qabtey bay haatan xaqiiqsatay waxa uu yahay ninka ninkeedii iska dhigahaya.

Tebbed oodkac iyo subag ka buuxeen bay furatay, oo dabadeed qabsatay oo ku hartey geed weyn oo ratigu hoos marayey laantiis. Dhurwaagii wuxuu reerkii ula tegey dhurwaayo kale oo saaxibbadiis ah. Waxay markii hore weerar ku d dhufteen oo baab' ka dhigeen arigii. Markay laysteenna waxay u soo jeesteen naagtii iyo ratigii. Misc maxaad ii dhiibatey, naagitii lama hayo.

Dabadeed ratigii kolkay hilbihiisii ku kala keceen bay raatkii reerka geeddiga dib ugu soo noqdeen, iyagoo naagtii baadi goobkeeda haya.

Waxay socdaan iyo waxay socdaanba, ugu dambaystii waxay yimaadeen geedkii gabadhu saarreyd.

Inkastoo geedka hoostiisa xaskul caarado dhaadheeri ku tiil, misana dhurwaayadii intay hareeraha ka galeen bay salkii qodid ku bilaabeen si ay xididdaha ugu saaraan.

Gabadhii markay garay in xaal ku xun yahay bay waxay soo jeedisay ra'yigaan:

"Ha isku lyggoynina qodista geedka, xarig baan idiin soo laalladdinayaa ee midkiinaba mar ha soo qabsado". Dhurwaayadii ra'yigaas bay la dheceen, dabadeedna mid mid bay u laaceen xariggii loo soo ridey? Mid waliba markuu meel dhexe marayo ayay gabadhu xarigga u sii daysaa dabadeedna xaskusha fiiq fiiqan dhexda u maraa. Dhurwaayadii badidood halkaas bay ku geeriyoodeen; dhowrkii u dambeeyey markay garteen khatasha loo dhigay bay baqo dhabarka la dhigeen oo ka fogaadeen gabdhii iyo agagaarkeeda.

Gabadhii waxay geedkeeda saarnaataba, maalin dambe ayaa waxaa u yimid tuke, kolkaas bay waxay ku tiri:"Tukoow aan oodkac ku siiyee ciddaydii iiga war gee". Suuye:"Haye" Markay dherjisay buu tukihii ku ballan furay.

Dabadeed waxaa soo ag degtey shimbir, markaas bay gabadhii tiri:"Shimbirey, aan kuu subkoo oodkac ku siiyee ciddeydii ma iiga war gayn?
Shimbir:" Ma qaadi karo ballan aanan oofin karin ee maad iga deysid, dhib bey igu tahaye".

Gabadhii siday u baryeeysey bay shimbirtii oggolaysiisay inay ka war geyso.

Waxay sii duusho iyo waxay sii duushaba, shimbirtii waxay maalintii dambe u timid gabadha hooyadeed oo dhiil culanaysa, markaasay tiri:
"Dhiil baas culatoy, gabadhaadii Faaduma fiican bahallaa feentay". Habartii markay ka yaabtay saadaala xumada shimbirta bay qori ku tuurtay iyadoo leh:
" Naa oradoo iga tag, shuruggaa ku raacye"!".
Way ka carartay shimbirtii, dabadeedna waxay u tagtay gabadha aabbeheed oo shir ka hadlaya.
"Shir baas joogow, gabadhaadii Faaduma fiican bahallaa feentay".
"Naa hadal xumadaada igala tag", buu yiri odaygii inta dhagax ku kaynaanshey oo baal ka jebiyey.

Shimbirtii oo baalkii jabnaa jiidaysa baa waxay u timid gabadha walaasheed oo ari la joogta, markaasay ku tiri:
"Ari baas la joogtoy, walaashaa Faaduma fiican, kaba faygooda bahallaa feentay!".

Walaashii intey u bogi weydey hadalka shimbirta bay tuur-yeeysay oo iska cayrisay.

Ugu dambeystii shimbirtii waxay u timid gabadha walaalkeed oo geel la jooga, kolkasay waxay ku tiri: "Geel baas la joogow, walaashaa Faaduma fiican,(kaba fay-gooda) bahallaa feentey ee ma u loogey?".

Walaalkii:" Naa haddaan ku raaco, ma i geynaysaa walaashay meeshay joogto?".
Shimbir:" Haa, ee, ina keen".

Halkaasaa shimbirtii iyo gabadha walaalkeed iska raaceen oo hor kacday iyadoo shimbirtii leedahay: "Shimbir garabli'i wax ma garatee, bal xagga u gudub, shim-bir garabli'i wax ma garatee, bal xagga u duw".
Waxay sii waddo iyo waxay sii waddaba, ugu dambaustii waxay yimaadeen geedkii gabadhu fuushanayd oo ka soo dejiyeen dabadeedna ciddeedii ku soo celiyeen.

## W A L A A L O   I S J E C E L

Waa baa waxaa jiri jirey laba wiil, oo walaalo ah, aan isku hooyase ahayn. Aabbohood wuxuu ahaa nin ka mid ah ganacsatada magaalada. Labada wiil mid baa hooyadi joogtey, midina rajay buu ahaa. Waxayse ahaayeen laba aad iyo aad isu jecel isuna eg oo aan la kala aqoon.
Waxaa la kala oran jirey Maxamed oo ah kan rajaygaa ah iyo Muuse.

Waxaa haddaba dhacday in Muuse hooyadi ay kala garan weydey oo markii ay istiraahdo wiilkaaga u roonow oo wax u buri, si ay yeesho garan weydo.
Markay meel ay wax u dhaqaajiso garan weydey, bay waxay u tagtay, habar faaliso ah oo ku tiri:
"Wiil aan dhalay iyo mid ay isku aabbe yihiin, isku da'na yihiin, isku cod iyo socodba yihiin baan kala saari kari waayey ee sidee wax yeelaa? Ma ii sheegi kartaa sidaan ku kala saari lahaa?".

Habartii faalisada ahayd waxay ugu jawaabtey:
"Waa fududdahay sida lagu kala gartaa labada wiil.

Waxaad yeeshaa, kolkii wiilashu dugsiga ka soo laabtaan, dharka iska tuur oo isqaawi. Kaad dhashay markuu arko adoo qaawan buu kugu soo ordi oo dharka kugu qaban, kaadan dhalinna waa ka sii jeensandoonaa".

"Waa hagaag", bay tiri naagtii oo iska tagtay.

Haddaba islaantii dharkii bay iska tuurtay, mar alla markii wiilashii dugsiga ka soo noqdeen.
Waxaa dhacday in sidii faalisadu sheegtay, wiilashii mid inta ku soo orday maradii ku celiyey, kii kalena ka sii jeensaday. Sidaa ayay naagtii ku garaty midka uu yahay wiilkeedu. Dadabeed waxay wiilkeeda u samaysatay calaamad ay ku aqoonsato.

Waxaa iyana jirtey in Maxamed iyo Muuse kala lahaayeen geenyo uurkubbaalle ah iyo faras ay soo fuulaan kolkay dugsiga ka soo laabanayaan.
Geenyada waxa laha wiilka rajayga ah, faraskana kay naagtu dhashay.

Naagtii welwel iyo shaki ayaa ku dhashay.
Waxay baqdin ka qabtey in wiilkeeda laga fiicnaado.

Sidaas aawadeed bay waxay ku tashatay inay Maxamed sun ku disho, arrintaasna waa ay la socodsiisay faalisadii ay sirteeda ku qarsan jirtey.
Mar alla markii wiilashu dugsiga ka soo bexeen oo damceen inay fardohoodii soo fuulaan bay geenyadii uur ku baallaha ahayd waxay cod insaan ku tiri:
"Maxamedow kolkaad maanta qadaynayso, dhinaca walaalkaa xeerada ka cunayo kala cun, dhinacaaga sun baa lagu dari doonaaye".

Markii ay geenyadu hadlaysey labada wiilba way wada maqlayeen.

Kolkii wiilashii gurigoodii tageen baa naagtii qadadii u soo dhigtay. Dabadeed Muuse wuxuu walaalkiis Maxamed ku yiri:
"Walaalle xeerada dhinacayga igala cun, waxaa suurawda in dhinacaagu sumaysan yahay, sidii geenyadu inoogu baaqday".

Maalintii xigtey Maxamed oo keligi geenyadii fuushan bay waxay ku tiri misana:" Maxamed gogoshaada caawa ha ku seexan, irbado sumaysan ayaa laguu gelin doonaaye".

Maxamed oo walwal iyo walbahaar u dhimanaya baa walaalki sariirtii kula seexday inta tiisii ka cararay.

Naagtii markay dabinkay dhigtaaba la go'ay oo ay Maxamed dili weydey, bay habartii Faalisada ahayd ku noqotay oo ku tiri:

"Wiilkii jinni la tegga ahaa waan dili kari waayey. Wuxuu had iyo jeer ku dadaalayaa inuu wilkaan dhalay ka fiicnaado, anigana taasi waa i dhibaysaa ee sidee wax yeelaa? Bal ilatali."

Faaliso:" Naa wiilku ma geenyo uur ku baalle ah buu leeyahay?".

Naagtii:" Haa, oo wuxuu leeyahay mid uusan ka degin, markuu dugsiga jiro iyo markuu hurdo ma ahane".

Faaliso:" Haddaba intay geenyadaasi nooshahay kuu suuroobi mayso inaad wiilkaas wax yeeshid ama dishid".

Naagtii:" Geenyada iyada sidee baan ku dilaa?".

Faaliso:" Carruurta abbohood mar alla markuu guriga yimaado, inta sariirta isku xoorto beerka is kala goo. Kolkuu ku weydiiyo waxaad qabto, waxaad ku tiraahdaa waa cudur i qaban jirey, markii aan guriga aabbahay joogey, daawadiisuna waa geenyo uur ku baalle

ah beerkeed kulul oo keeliya".

Naagtii gurigeedii bay ku noqotay. Dabadeed markii odaygii yimid bay sidii habartu fartay, inta dhulka isku tuurtay, lugaha ku rafatay oo aah, aah waxaan a ayh laga waayey.
Odaygii intuu naxay buu wuxuu weydiiyey waxay qabto; iyana intii faalisadu u sheegtay bay ku celisay.

Odaygii wuxuu yiri:"Waa hagaag, Waxaa laguu qali doonaa geenyada Maxamed, maxaayeelay, wax uur ku baalle ah iyada iyo tayda baan ka haysannaa".

Maalintaas markii wiilashii dugsigii ka soo baxeen, oo fardohoodii soo kala fuuleen baa geenyadii Maxamed hadashay oo tiri:" Maxamed, maanta waxaa la goostay in aniga la i qalo oo beerkayga lagu furdaamiyo aayadaa oo wax cudur ah oo ay qabtaa uusan jirin. Haddaba waxaan ku ogeysiinayaa inaadan wqti dheer iga dambaynayn mar haddii aan anigu dhinto".

Maxamed wuxuu sameeyo markuu garan waayey, buu wuxuu ku tashaday inuu geenyadiisa la fakado, si uu uga badbaado

badbaado khatarta aayadiis. Dabadeed walaalki buu u tegey oo ku yiri:" Abboowe, anigu waan iska tegayaa. Waxaad yeeshaa, subax walba intaan maqnahay ku soo jarmaad geedka gurigeenna hortiisa ku yaal, Haddii uu geedku si fiican u baxayo, ha iga walwalin waan ladanahaye, hadduu qallalose iso gaar waa ahoo dhintaye".

Markuu intaas kula dardaarmay walaalkii buu labada dhaban ka dhunkaday oo macsalaameeyey. Intuusan tegin buu wuxuu sii maray gurigii si uu aabbihi u arko markii ugu dambaysey. Aabbihi oo aan garan in Maxamed safar dheer isu diyaariyey baa u yeeray oo ku yiri:
"Maandhe, soo kexee geenyadaada, waxaa lagu furdaaminahayaa aayadaa oo bugta e".
"Waa yahay, aabbe", buu Maxamed ku jawaabey, "Waxaad ii oggolaataa inaan laba goor ku soo wareego oo soo rogo,si aan ku illoobo, kolley haddii aad qalaysid".

Odaygii markuu ka yeelay inuu geenyada soo rogo, baa Maxamed inta koorihii saaray xakamihii u dhuujiyey ciribta ku dhuftay, saa waa uur ku baallee waa la buubtay oo samadq iyo dhuhka dhexdooda la martay. Waxay hawada kula

maqnaataba waxay ugu dambaystii la degtey daar weyn horteed oo meel cidla' ah ku taal. Dhir badan oo dhaadheer ayaa ku meegaarsanayd. Horteedana waxaa ku tiil beer ubax kala jaad ahi ku beeran yahay iyo geedo gaaggaaban oo aad mooddo in loo qoor jaray oo la wada simay. Beerta waxaa ku dhex tiil berked wareegsan oo mammar la xardhay ka dhisan. Sanamyo libaax oo afarteeda gees kadalooba afkooda waxaa ka soo daadanayey biyo ku qubanaya berkedda gudeheeda. Dhexdeedana waxaa ka taagnaa oo libaaxyada ka sareeyey nin gacanta midig ku haysta seef bir biraysa oo aad mooddo inuu gilgilayo, gacanta bidixna wuxuu ku haystey faynuus dhalaalaysa.

Maxamed markuu waxaa oo dhan isha mariyey, baa waxaa daartii ka soo baxday gabar aan quruxdeeda, wax lala simo la arag. Timaheedu dahab bay u ekaayeen, indheheeduna waxay ahaayeenkuwa deeradoo kale.

Waxay la noqotay inuu riyoonayo oo waa rumaysan waayey muuqaalka indhihiisu qabteen. Gabadhii intay usoo dhowaatay Maxamed bay waxay tiri:
"War maxaa meeshaan ku keenay oo aad doonaysey?".

"Maxay qabtaa meeshu oo loo imaan waayey?", Buu yiri "Halakani waa hooy nin cirfiid ah oo belaayo qabe ahi lee-yahay ee ka fogow inta goori goor tahay, bay tiri. Suuye: "Adigu ma cirfiid baad tahay? Sidee baad gurigiisa ku joog-taa, maxaadse isu tihiin cirfiidka?".

"Aabbahay oo Suldaan ah baa i siiyey ninka oo xilihiisii baan ahay. Haddaan la ii guurinna beledkayagii buu kharribi lahaa, dadkoo idilla wuu layn lahaa". Bay ugu war celisey.

"Haatan xaggee buu jiraa cirfiidku, ma guriguu ku jiraa mise waa maqan yahay?, buu yiri.

"Haatan guriga kuma jiro, makhribkii buuse soo hoydaa ee yuusan ku diline isaga tag, intuusan imaan".

"Gabar quruxdaadoo kale leh cirfiid iyo nin kale toona loo-gama tago. Halkan baan ku sugin oo dilin, adigana waan kaa badbaadinayaa belaayadiisa. Aqalku ma leeyahay meel lagu dhuunto?".

"Waxaan kuu shegayaa inaan laga jiba keeni karin Cirfiid-ka, haddaadse aadan taladayda oggolayn, waxaan kaaga diga-yaa inaadan nabar ka badan ku dhufan, maxaayeelay, habar wixii ka badani nolol bay u tahay oo waa soo labakaclayn. Waxaad ku dhuuman kartaa suuli ii gooni ah oo uusan weligi cagta soo gelin.

"Kolkuu yimaado, dhabtayda ayuu ku seexan doonaa.
Markuu gam'o ayaan kuu baaqayaaye soo bax oo dil".

Markii gabadhii intaa tiri bay Maxamed gacanta qabatay oo gurigii la gashay. Daartu waxay ku koobnayd shan boqol oo qawladood. Alaabta qayb walba taali waxay ahayd wax aan indhaha loo dhammayn karin qurux intay ka qabto. Waxaa darbiyada midkood ku dhegganaa hubka lagu dagaallamo:seefo iyo billaaweyaal isdhaaf lo dhigay, gaashaamo, qulux,qaanso iyo fallaaro iwm.

Markay dhawr qaybood iyo fadhiyadooda ka gudbeen bay waxay tageen dhinacii gabadhu degganayd oo guriga bar-barkiisa waqooyi ku taal.
Gabadhu musqusheedii bay albaabkeeda u furtay oo tiri:
"Albaabka shishadiisa isku qari, hadbana isoo eeg, kursi-gaas ballaaran baan ku fariisanayaa oon kaaga baaqi doo-naaye".

Wax yar kaddib baa Cirfiidkii xiin ku soo galay daartii,isagoo dabayl baqdin lihi ka soo horrayso. Wuxuu ahaa nin dherer iyo dhumucba loo dhammeeyey. Kolkuu guriga

soo galay buu sidii wax didsan inta sanka taagey yiri:
"Shuruf insi baa ii uraya ee yaa yimid guriga intaan maqnaa?"
"Waa aniga insiga kuu urayaa. Cidina halakan ma timaaddo aan adiga ahayn".
Cirfiidkii intuu gabadha dhabteeda barkaday buu iska jiif-saday. Mar alla markuu gam'ay bay Maxamed u baaqday.
Maxamed intuu kabihii iska bixiyey buu galka kala soo ba-xay seef berbiga surnayd. Wuxuu isa soo dul taagey gabadhii oo yiri:
"Lagahaaga kala bax, kurkaan ka goynayaaye".
Kolkay lugihii kala baxday madaxa Cirfiidka hoostiisa ayaa Maxamed inta seeftii isla kala jiiday unuunka hor dhigay.
Madaxii Cirfiidka oo halkoo kankoonsan baa wuxuu Maxamed ku yiri:
"Mar kale igu dhufo seefta haddaad doonayso inaan dhinto!".
"Hooyaday mar keliya bay i dhashay", baa Maxamed ugu ja-waabey.
"Candhuufo igu tuf?".
"Afkaygu waa engegan yahay oo candhuufo ma leh".
"Haraati igu dhufo?".
"Lugtaydu waa gaaban tahay oo kuma soo gaarto; wadkii ku dili lahaa baa kuu yimide hadal tirada iska daa".

Cirfiidkii meeshaasuu ku dhintay. Maxamedna ugu haray gabadhii quruxda badnayd iyo nicmadii Cirfiidku lahaa oo ka tegey.

Maxamed iyo gabadha oo magaceedu ahaa Xaliimo, waxay nicmo iyo sareedo ku noolaadaanba, maalin maalmaha ka mid ah ayay gabadhu dibadda u baxday, oo tog yar oo daarta dhinaceeda waqooyi mara, inta dharkii meel dhigatay, ku mayratay.
Intii ay ku mayranaysey baa waxaa ka go'ay tin, biyihii toggu horay u qaadeen. Toggaasu wuxuu kaloo mari jirey magaalo Suldaan u taliyo.

Haddaba waxaa dhacday in habar togga biyihiisa dhar ku mayranaysey ay aragtay tinkii Xaliimo oo biyuhu wadaan. Habari waa belaayee, tinkii bay inta soo qaadday, u geysey Suldaankii magaalada. Suldaanku markuu in cabbaar ah indha indheeyey tinkii, buu wuxuu waydiiyey habartii, haddii ay ogtahay meesha gabadhii tinka lahaydi joogto.
"Waba ilama aha taasi oo waa sahal sidaan ku ogaan lahaa", bay jawaabtii habartu ahayd.
"Haddii aad soo ogaato meesha gabadhaasi joogto, waxaan

ku siinayaa kiish dahab ah, waxaanse ku rumaysanayaa, haddii aad tin kale ku soo go'yso ood i soo tusto. Kan marag ahaan baan u haysanayaa". Buu yiri Suldaankii.

"Waxaad iga filataaba waa anigoo tin tinkaan u eg tuu keena". Kolkay intaa tiri bay habartii aqalkii Suldaanka ka baxday oo togga biyihiisu meeshay ka soo qulqulayeen dib u raacday.

Wax ay socoto iyo waxay socotaba, maalintii lixaad bay waxay meel dheer ka aragtay, daartii caddayd oo ay horteeda beerta dhex fadhiyaan Maxamed iyo Xaliimo oo sheekaysanaya. Habartii kolkay u timid baa la isa salaamay oo habartii si gacaltooyo iyo xushmad leh loo soo dhaweeyey.

Habartii maalin markay la joogtey bay Xaliimo oo timaha shanlaysanaysa inta u soo dhowaatey tiri:" Maandhe keen madaxaaga aan timaha kuu hagaajiyee", gabadhiina way ka yeeshay oo madaxa u dhiibatay. Habartii oo danteedu ahayd inay oofiso ballaankii ay boqorka ka soo qaadday, baa iyadoon Xaliimo dareensiin, timo soo raacay shanlada inta kala baxday, habasta gashatay oo ku qarsatay.

Duhurkii kolkay ahayd bay habartii waxay tiri:

"Maandhooyinow soo nabad ahaada waan carraabayaa oo jid dheer baa iga dambeeyee".

Markay magaaladeedii timid, habartii iyadoon meel kale joosan bay gurigii Suldaanka timihii Xaliimo geysey, ugana warrantay sida ay u eg tahay iyo meesha joogto. Sulugaanka warrantay sida ay u eg tahay iyo meesha joogto. Suldaanki intaas keliya kuma qancine wuxuu sii waraystay habartii si ay faah faahin kale uga bixiso gabadha.

Suldaan:"Yaa la jooga gabadha oo ay la nooshahay?"

Habar :"Inan yar oo miskiin ah bay wada joogaan".

Suldaan:" Rag waa belaayo lama yaraysan karo ee hagar ma ku dili kartaa? Kiish kale oo dahab ah baan ku siin doonaa haddii aad arrintaanna oofiso".

Habar :" Waan isku dayayaa, waxaanse kaaga baahnahay inaad rag ciidankaaga ka mid ah igu darto".

Suldaankii col dhan buu habartii ku daray.

Qalab ahaan waxay habartu u qaadatay afkeedu sumaysan yahay jaadka lagu xiirto ah.

Habartii iyo colkii suldaanku, waxay socdaan iyo

waxay socdaanba, markii daartii loo soo dhowaaday, bay habartii waxay tiri:" Idinku geedahaas shishadooda baad iigu dhuumanaysaan, aniguna guriga ayaan gelayaa; mar alla markaad qayladayda maqashaan i soo gaara xaalku waa xun yahaye".

Markay wiilkii iyo gabadhii u timid bay habartii inta salaantay oo gacmaha ka shummisay bay u sheegyay inay magaaladii ay markii hore ka timid, ku noqonayso kaddib markii socdaalkii ay ku jirtey u dhammaaday.
Maxamed iyo Xaliimo sidii hore oo kale bay kal iyo laab u soo dhoweeyeen, In cabbaar ah hadday sheekaysanayeen bay duqdii inta madaxa Maxamed fiirisay waxay tiri:" Maandhow timihii ayaa kugu baxaye aan kuu xiiro, waayeel wax lagama waayoo af badan baan sitaaye".
"Eeddo ii xiir waan u baahnahaye", oo madaxa u soo qoystey Maxamed.

Habartii markay timihii u dambeeyey xiirtay buu wiilkii sumooday oo naftii ka bacday. Duqdii kolkii ay ogaatay in Maxamed dhintay bay qaylo afka ku dhufatay oo ciidankii u qarsoonaa u baaqday, iyagiina intay durbadiiba soo yaaceen bay gabadhii qabteen. Xaliimo markay garatay

inayan sina uga fakan karin habarta iyo colkeeda bay waxay weydiisatay in loo oggolaado inay wiilka maydkiisa asturto iyana way ka yeeleen.

Xaliimo intay maydkii sanduuq ku riddey bay maqsin gelisay oo u soo xirtay albaabkii. Dabadeed daarta albaabkeeda weyn bay waxay ku kor qortay meesha maydku ku jiro iyo halkay furihii dhigtay, kaddibna isu dhiibtey habartii iyo colkeedii oo magaaladoodii la aadey.

Subaxii dambe ayaa Maxamed walaalki Muuse ku soo kallahay geedkii ay isku ogaayeen. Wuxuu arkay caleemihii geedka oo duudduubmay iyo laamihii oo dhaday sidii ay ka baxeen geed salka laga gooyey. Intuu Muuse orday buu geenyo uur ku baalle ah oo aabbihi laha koorays̈tay oo fuulay isagoo leh:" Geenyooy i gee hala walaalkay maydkiisu yaal".

Geenyadii samada iyo dhulka dhexdooday la martay Muuse. Siday ula buubaysey bay waxay kula soo degtey daartii maydku yiil oo horteeda ay hoganayso geenyadii Maxamed. Albaabka korkiisa buu farriintii gabadhu ku qortay ka akhriyey, dabadeedna galay qolkii maydku yiil, oo kolkaas dibadda ula soo baxay,Wuxuu la fariistay berkeddii agteeda

isagoo madaxa dhabta ku haya oo ku dul booyey.

Intuu Muuse walaalkiis ku dul booyayey baa waxaa soo degey laba shimbirood oo isla socdey. Biyihii berkedda ayay ka cabbeen; markay dhergeen bay is dirireen oo afka isla dheceen. Mid baa dhimatay dagaalkii dabadi. Waxaa dhacday in shimbirtii wax dishey inta soo qaadday tii dhimatay saddex jeer madaxa u gelisey biyihii berkedda, dabadeedna dhulka dhigtay oo sugtay intii cabbaar ah. Xoogaa markii la joogey baa shimbirtii dhimatay sarakacday oo gilgilatay dabadeedna isla buubeen iyada iyo saaxiibteed.

Muuse oo yaabban baa sidii shimbirtu yeeshay oo kale saddex goor walaalki madaxa biyaha u geliyey kaddibna dhawray in yar, isagoo faataxada akhriyaya. Maxaa dhacay bay kula tahay? Maxamed sidii wax oo baraarugaya buu indhihii kala qaaday oo yiri:" Alla macaanaa hurda aan seexday!". "War maad hurdine mayd baad ahayd markaan kuu imid, waxaan filayaa in lagu sumeeyey ama lagu falay ee bal ii sheeg sidii wax u dheceen iyo sidaad meeshaan ku timid"; buu yiri Muuse.

Maxamed markuu Muuse u warramay bay waxay u duuleen Suldaankii iyo habartii oo weerar ku qaadeen. Inkasta oo ay laba qura ahaayeen misana seeftay qaadanba nin bay ku dhacaysey oo kurka ka goyneysey. Markay mayd badan daadiyeen baa suldaankii cararay, wax yar kaddibna ciidankiisii baa baqa dhabarka la dhigay. Xaliimo iyadu waxaan habartii ahayn ma raadsan; intay heshay bay billaawe ruub ruubtay oo markay dhulka ku dhacday calyo indhaha ka ga tuftay.

Ilaaliyeyaashii iyo adeegeyaashii iyaguna daartii ayay ka qaxeen. Qofka keliya oon isdhaqaajin waxay ahayd gabar Suldaanku dhalay oo isku darsatay qurux iyo toolmoonaan sida Xaliimo. Muuse markuu qolkeedii soo galay buu gabadhii indhaha ka qaadi waayey. Cabbaar haddii ay is fiirinayeen bay labadooduba garteen inay isjecel yihiin.

Ugu dambaystii Maxamed, Xaliimo, Muuse iyo gabadhii Suldaanku meeshaasay iska raaceen. Markii ay guurigoodii tageen bay Maxamed iyo Muuse labadii gabdhood kala guursadeen oo aabbohood u aqal dhisay. Maalintaas iyo intii ka dambaysey waxay ku noolaayeen sareedo aan kala go'lahayn.

QAYB LIBAAX

Waa baa waxaa habar dugaag dhexmaray, qaalin rati ah. Libaax baa wuxuu ku dooday, in isagu qaalinka leeyahay, mar haddii uu yahay boqorkoodii. Haddii uu qiyaasay in qaalinka hilbihiisu ayan dhawr maalmood ka badnaan karin, buu wuxuu soo rogey hindise uu dugaaga midba maalin ku cuno.

Dawaco oo ahayd gacanyarehiisa, buu wuxuu faray inay habar dugaag isugu yeerto, si qaalinka hilbihiisa loo wada qaybsado. Dawacadii buun bay u yeerisay dugaaggii duurka ku jirey, oo halkaas jaha walba ka soo qamaamay, iyagoo jaad walba leh: dhurwaa, shabeel, haramcad, guduudane, weer, calaakud iwm.

Markay soo wada bannaan bexeen, baa libaaxii inta iskala jiiday halaaqooday, oo jimirricay dabadeedna yiri: " Waxaan idiinku yeeray inaad ila qaybsataan qaalinkaan hilbihiisa, si aad iila qabtaan wixii aan qabo, dhereg iyo gaajo". Dabadeed intuu malabsaday oo xaruumay buu dhurwaa u yeeray oo ku yiri:" Dhurwaa, adaa bahallada ugu curadsane inoo qaybi qaalinka hilbihiisa".

Dhurwaagii oo xilkaas loo doortay aad uga walaacsan, iskulana hadlaya inuu libaaxa uga baalmariyo curadnimadiisa uu meeshaas fagaaraha ah ka sheegay, baa eegay mar habar dugaag oo ay indhohooda ka muuqato yaab iyo filasho, marna eegay libaaxii oo indha kulul ku gubaya. Halkaa kolkuu marayo ayaa arrini ka murugtay, oo uu garanwaayey sidii uu labada dhinacba ku raalli gelin lahaa.

Markii intii cabbaar ah uu fekerayey, buu is yiri cadaaladda ha ka fogaan, meeshay doonto ha cuskatee." War qaalinka bar mise bar, bar libaaxaa leh, barka kale bahallow booba". Kolkuu intaas yiri baa libaax inta is yareeyey isagoon dareensiin dhurwaaga waxa uu la maagган yahay, dharbaaxo il iyo dhabankeed kaga qaaday.

Dabadeed intuu iskala bixiyey oo si ay ka muuqato dhaar iyo digniini raafka dhulka ugu jeexjeexay xaruumay, kaddibna dhugtey habar dugaag oo daawaysa waxa meesha ka soo socda, dhafoorka midkood kastana ay ka muuqato quussasho iyo dhiillo. Libaaxii intuu raafka ku tilmaamay dawacadii buu yiri:"Daawo, adigu neefka inoo qaybi".

Dawacadii oo mar hore goosatay siday wax yeeli lahayd, baa iyadoo ay la tahay in arrintu sida loo malaynayo ka fududdahay waxay tiri:
"War qaalinku bar mise bar, bar libaaxaa leh" oo eegtay libaaxii oo shaaribbada miiqahaya indhihiisuna bir birayaan, kaddibna qaybteeddii wadatay. "Barka kale, waax mise waax, waax libaaxaa leh," Markay halkaas marayso, baa libaaxii inta dawacadii ku soo gaafwareegay, raafka shulka ku jiidjiiday. Dawacadii iyadoo ilqooraadda ka daawanaysa digniinta iyo cagajuglaynta libaaxa bay hore u socotay," waaxda kale fallar mise fallar, fallar libaaxaa leh".

Kolkay halkaa joogto bay libaaxii si fiican u eegtay, isagoo dhoollaha ka qoslaya ayna ka muuqato farax iyo bogaadin. Markaas bay inta kalsooni iska dareentay qaybtii sidatan ku dhammaysay:" fallarka haray rimic mise rimic, rimic libaaxaa leh, rimica haray bahallow booba".

Dawacadii iyadoo aad mooddo inay tijaabo culus ka baxday, bay qunyar u kadalloobsatay bahallada dhexdoodii, oo dhawrtay sida arrini ku dhammanayso, iyadoo aan farax iyo shallayto midna dareensanayn, isla markaana iska

" Qiyaasow libaax baa dhurwaa qaybi yiri neefka.
Wuxuu yiri hilbaha jeex dhan qabo qoon dhan baan nahaye.
Qababaaladii buu markaas qoonsadoo kacaye.
Dharbaaxuu il kaga qaadayoo hoor ka soo qubaye.
Af qashuushele goortuu dhintuu sii qataabsadaye.
Aniguu markaas ii qabsaday sida qisaaseede.
Wuxuu yiri qanjaafula xumey tali qiyaastaada.

Waxaan iri:

"Adeer gacalle qaar iyo dalool qaaxo iyo feero,
Qummudkiyo baruurtiyo,leggiyo qawdhihii kuruska,
Kuu wada qorsheeyaye Islow neefka wada qaado.
Qudhaydaan u yaabaye miyaan ina qasaartoeyey?
Qorshihii qismada waa wuxuu eeday qaar yare e,
Duqii noo qabweynaa wakaas qooqa loo dilaye,
Bal innagoo quruun dhan ah maxaa qado inoo diiday?
...............................................?

Dhurwaagii waxaa aad u saameeyey tixihii gabayga dawacada ugu dambeeyey "Duqii noo qabweynaa wakaas qooqa loo dilaye". Ciil iyo tiiraanyo aan marna laga baxayn cawa daranaa! Habar dugaag tira badanaa oo taya daranaa. Ma waxaa loo abuuray in libaaxu weligood gumaysto?

"Bal innagoo quruun dhan ah maxaa qado inoo diiday?" baa madaxiisa ka guuxday. Talo waxay kaga dhammaatay inaan arrintu dib u dhigasho dambe lahayn. Geeri iyo nolol wixii u dhexeeyaa waa dulli aan la dhawran karin. Wuxuu xasuustay tixahaan gabayga ah oo uusan garwaaqsanayn ciddii tirisay "Haddaad dhimato geeridu mar bay nolosha dhaantaye, dhashaaday sugtaa xaajadaad dhawrataa abade".

Markii uu dhurwaagu go'aankaas gaarey buu inta dugaaggii meesha tubnaa raafka u haatiyey hortooda u rooray, iyo kobtii libaaxu ratiga hilbihiisa la aday. Intuu orodka ku jirey waxaa maankiisa walaaqayey oo sidii film u daawanayo oo kale isu tusaaleeyey dugaaggii oo inta libaaxii hareereeyey, ciilkii qarniyada biiray kula dhacay dabadeedna intay kala fiiqeen lafihiisa feenanaya.

Waxay ordaanba, waxay u yimaadeen libaaxii oo dhereg daraaddeed laba geed dhexdood, inta labada jeeni fidsaday barkan, hilbihiina intii uga hartay shillal halkaan ah u saaran yihiin iyagoo diqsi ku maw leeyahay. Libaaxii markuu arkay in lagu meegaarsan yahay baa dareen galay oo uu gartay in arrini dhanaanaatay. Si uusan dugaagga u dareen-

siin in baqdini gashay buu iladayg iyo inuu qaan hor leh u sheegto isku daray. Wuxuu bilaabay caradhabasho iyo cartan sidii wax caraysan oo kale. Dabadeed intaan cid kale tiraabin buu isagoo aad mooddo in caro aawadeed cunihii la bararay hadalkii ku hormaray oo yiri:" Waxaan idinka doonayaa inaad degdeg iigu soo guddaan qaybtii aan idinka siiyey qaalinka hilbihiisa haddii kale nabadi inaka dhexayn mayso, sababtoo ah waxna ma guddaan abaalna ma qoysaan".

Kaaf iyo kala dheeri iyo kaan u dhigtayba naaha baa meeshii ka dhacday. Dugaaggii iyagu u soo qalab qaatay inay dhacsadaan wax laga bursaday baa qaan loo sheegtay! Jahawareer iyo yaab iyo in daafacaad hor leh la isu diyaariyo bay ula ekoonaatay dugaaggii. Badidood waxay hadal ka sugayeen dhurwaagii abaanduullaha isaga dhigay oo arrintooda heerka gaarsiiyey. Markii la wada eegay dhurwaagii wuxuu meeshii ka jeediyey tixahaan gabayga ah isagoo raacaya jidkii ay dawaco furtay:

" War tuurtee haddaan tago haddaan toban ka soo qaado;
Teer kale kaddii aan tagoo toban ka soo qaado,
Qorraxay hadaan tago haddaan labada qayd xooro,
Oon qoordheerayaashii reer abtigay qaylo ku ekeeyo,

Boqorrada Dhurwaayada haddaan gabay ku qayraansho,
Shabeel iyo qareenkiis haddaan qaylo maqashiiyo,
Duulkii halyeeyada haddaan subax qamaansiiyo,
Qalbilaawihiiyow markaas yaa na qaban doona
Oo sow qaalinkaagi caddaa qaanti hari mayso?

Lama dhererin jawaabtii libaaxa oy ku dheehan tahay quursi iyo dhoollaatus.

Libaax:" War tuurteer haddii aad tagtoo toba, ka soo qaaddo
teer kale haddii aad tagtoo toban ka soo qaaddo,
Qunuf qaanuf qaar dambe xumow gara adaa qaatay
Anna qaallanaan loo dhashiyo ragannimaan qaatay.

Micidayda qoolaab haddaan qararac kugu siiyo
Wallee xaarku waa quban haddaan qoomo uuskaaga,
Oo kolna qaalinkaagii caddaa qaanti hari mayso!

Markuu intaas yiri buu inta dhabi dhistay oo halaaqo afka laba taako kala geeyey isaga dhaqaaqay dhinac isagoo leeg leegsanaya, oo aad mooddo inuu leyahay: "Bal car yaa isoo raaca oon wax ka sitaa".

TAKARA FAW FAW

Beri baa waxaa jiri jirey xaas reer miyi ah oo ka kooban nin, naag, wiil iyo gabar ay dhaleen. Reerku wuxuu ahaa xaas aad isu jecel oo isku duuban, nolol wanaagsanna way ku noolaayeen oo xoolo in ku filan bay lahaayeen.

Maalintii dambe ayaa naagtii duumo la bukootay oo inkastoo wax walba lagula kacay biskoon weydey. Dabadeed waa dhimatay ninkii iyo carruurtiina tiiraanyo iyo cidla' ku dhaaftay.

Ninkii oo naagtiisii uu jeclaa ka samri waayey ayaa wuxuu ku tashaday inuu xiskiino u doonto ciddii ay ka dhalatay, maxaayeelay, wuxuu aamminsanaa in naagtiisa walaasheed ma ahane ayan naag kale carruurta si kal iyo laab ah u xannaanayseen.

Taas ka sokow, wuxuu ninku niyadda ku hayey in dabeecaddii wanaagsanayd oo uu naagtiisa ku bartay, ay ka soo jeeddey kalana timid cideheeda.

Labada reer waxay kala degganaayeen dalal kala

fog, sidaas samadeed, buu ninkii reerkiisii la guurey oo ula hayaamay meeshii degmada xididkiis loogu tilmaanay.

Wuxuu geeddi dheer ku sii jiraba, berigii dambe ayuu reerkii naagtiisu ka dhalatay soo ag degey. Kaddib markii lays waraystay, buu gabadhii naagtiisa ka yarayd weydiistey inay carruurta la koriso. Iyadoon hadal lagu soo celin baa isla mar ahaantii gabadhii la siiyey. Ninkii gabadhii la siiyey markuu guriga la yimid buu wan buuran u gawracay oo qal yiri, isagoo dantiisa weyni tahay inuu tijaabo ka qaado oo uu ku ogaado bal inay jiraan meela ay ka reacday walaasheed iyo in kale.

" Jiif iyo dhogorlaha ma rabo", bay ugu jawaabtey. Isagoo yaabban oo garanla' waxay naagtu u danleedahay buu isagoo ku dayaya yiri:

"Haddaadan hilibkiisa doonahayn, geenaydaas inoo qal". Isla mar ahaantii bay geenyadii ku booddey.

" Naa geenyadayda ii daa, la qali mahayee!",buu yiri ninkii oo naxsan.

Waxaa jirtey in reerka naagtiisu ka dhalatay dadqalato noqdeen; kaddib markii abaar xumi ku dhacday oo ...

xoolihii dhaafeen, ninkuse u warla'aa waxaa ay ciduhu ku dambeeyeen markii uu u soo guur doontay.

Gabadhuu guursaday sansaankeeda markuu ka yaabay baa shaki iyo tuhun ku dhasheen.

Waxaa kaloo iyana tuhunkiisa sii xoojiyey markuu carruurta cidaha xeer awoowgood ah dab uga diray oo loogu jawaabey "Soo dhacoo qaado", mar alla markay yiraahdaan: "Awoowe/ ayeeyo, dab na siiya".

Naagtii(oo caga jiid ah) intay wankii hilbihiisa bislaynaysey, ayaa ninkii carruurtii gooni ula faqay oo ku yiri:" Maandhooyinow, sansaanka aayadiin u ma bogin oo iskuma halleyn karnee soo jeeda habeenka gelinkiisa hore, anigu haddaan seexanayaa, si aan u soo jeedo gelinka dambe, ka digtoonaada naagtaas haddaad lulmo iska dareentaanna isla mar ahaantaas i kiciya".
Intaa markuu yiri buu odaygii iska seexdey.

Ilmihii waxay soo jeedaanba, mar dambe ayey luloodeen oo waa carruure iyagoon aabbohood toosin gam'een.

Mar alla markay naagtii ogaatey in la wada hurdo

bay odaygii gaurac ugu jiiddey oo hilbihiisii iyo kuwii wanka isku shiishayoo shubtay.
Waagu markuu baryey, carruurtiina toostay bay awalba dhiilley qabeen, markay aabbahood arki waayeen, su'aaleen naagtii:" Mee aabbahayo? Xaggee buu jiraa?".
"Wer ma naas baad ka nuugtaan aabbihiin, maxaad hadalkiisa ugu dholalaysaan?". Shir buu aadey oo waa ka imaan doonaaye, arigaas soofiya oo raaca", bay naagtii ku jawaabtey.

Galabtii ayay carruurtii arigii keentay. Intayan guriga tegin baa aayadood ka hortagtey oo ku tiri:
"Ordoo guriga tega, anaa ariga la sii joogayee, oo markaad tagtaan haamaha qaba dheer dhaafa qaba dhuub ka gudba, bura yarna dhaafa oo bura dhogof hilbaha ku jira cuna".

Carruurtii markay gurigii yimaadeen bay haamihii looga digay aabburka ka qaadeen, war mise waxaa ku jira qabadhuub?
Hilba dad baa ku jira, Faarax iyo Faaduma awel bay dhiille qabeen haatanna way yaqiinsadeen in naagta aayadood ahi dad qalato tahay,aabbahoodna ay qalatay, hilbihiisiina kuwa haamaha ku jira yihiin.

Surrucaad iyo baqdin bay la hogteen, gabadhii oo magaceedu Faaduma ahaa baa ilmo indhihii buuxisay dabadeedna inta qarsan weydey af labadii yeertay:
"Alla ba'ayeey aabboow ku mec, alla aabbahay meeyeey!?".

Walaalkeed baa markii salalkii iyo musannowga Faadumo u adkaysan waayey, wuxuu ku sasabay erayadaan:
"Abbaaye macaan, aamus, boohintu waxba inoo soo celin maysee. Waa inaan ku fekernaa sidaan uga baxsan lahayn, haddii(aayadeen) ay habaryarteen doonayso inay innaganna qalato.

"Haddii ay aabbaheen qalatay innagana ina dayn mayso", bay Faadumo tiri, iyadoo ilmadii iska tiraysa.
"Waa tijaabinaynaa hadday rabto inay ina qalato", buu Farax yiri, "Waxaan ku dhuumanaynaa aqalka muskiisa dambe, markay ina weydo haddey tiraahdo:" Alla meeye ilmahaygii aan ariga raacsan lahaa", waynu u soo baxaynaa. Haddise ay tiraahdo "Alla meeye carruurtaan midba maalin qalan lahaa", weynu ka cararaynaa.

Carruurtii waxay isku qariyeen guriga dulcedkiisa dambe. Hadhow baa aayadood timid oo markay ilmihii arki wey-

day tiri:" Alla ba'aye meeye ilmahaan midba maalin duban lahaa?".
Mar alla markii erayadaasi dhegohooda ku dheceen bas Faarax iyo Faadumo far iyo suul isku taageen iyagoo leh "Qumanyo waa na kan, qumanyo waa na kan".

Dadqalatadii way ka daba qaadatay iyadoo ku habaartamaysa:" Qodax qaydarey shab dheh, mas qooqanow qab dheh", "qodax qaydarey shab dheh, mas qooqanow qab dheh....".

Ilmihii waxay ku soo beegmeen meel qodax badani daadsan tahay, Faadumo ayaa qodaxi cagta ka muudey, naagtii baa soo gaartey, sayte Faadumo:" Habaryarey aan walaalkay Faarax Baricadde kuu soo qabtee, qodaxda iga bixi".
Say waa ka yeeshay. Markay qodaxdii ka bixisay siina deysey bay ka carartay iyadoo leh" Gumanyo calaalkay kuu soo qaban maahayo"; walaalkeedna ka daba tagtey.

Naagtii carruurtii bay ka daba qaadatay iyadoo sidii u habaartamaysa. Wax la ordoba, Faarax bay la heshey habaarkii oo mas qooqani lugta isaga duubay. Sidii Faadumo buu isna yiri:" habaryareey, aan walaashay kuu soo qabtee,

maska iiga tuf!". Say waa ku tuftay. Isna sidii oo kale buu ka cararey inta ku ballaan furay. Waxay is cavrsadaanba, waxaa carruurtii ka hor timid bad aan laga gudbi karin.

" Badeey meel noo bannee, balaayaa na wadatee!" bay ku tuugtameen carruurtii. Baddii baa jid u banneysay iyadoo digniintaan siinaysa:" Halkaas mara oo wasakh ha igu ridina, haddii kale waydin leqayaa". Nasiib wanaag, carruurtii badbaado ayay uga gudbeen baddii. Waxaa dabadeed timid dadqalatadii oo markii badduu ka hor timid iyana tiri:" Badeey meel ii bannee beerkaygii baa iga cararayee". Say meel bay u bannaysay digniintii carruurtoo kalena siisay.

Dadqalatadii markay meel dhexe marayso baa injiri baddii uga (dhacday) faniintay meeshaana biyihii ku hafiyeen oo cuneen.

Faarax iyo Faadumo markay baddii ka gudbeen bay tageen dhul cidla' ceersila' ah, ugaarta iyo nafleyda kalese ay ku badan yihiin. Meel la aado oo kale ma jirine halkoodii bay ku nagaadeen oo geed waabteen, dabadeedna qaraabasho iyo ugaarsi ku dhaqaaqeen, si ay ku noolaadaan.

Waxay caado ka dhigteen in maalintii wiilku ugaarsi aado gabadhuna geedka gurigoodii noqday joogto. Mar alla markay aragto walaalkeed oo ugaar cayrinaya bay waxay oran jirtey:" Cawley jajab, jajab".

"Cawley jajab, jajab".

Waxay sidaa ku noolaadaanba, maalintii dambe, iyadoo wiilkii ugaarsi ku maqan yahay bay Faadumo aragtay laba nin oo xaggii geedka u soo socda. Isla mar ahaantii bay deg deg geedkii u fuushay. Nimankii say u soo socdeen bay geedka harkiisa fariisteen iyagoo sheekaysanaya. In yar dabadeed bay Faadumo candhuuf ku soo tuftay midkood, suuye: "Roob baa da'aya'. " War been badnid a, cirkaba daruuri kama muuqatee', buu kii kale yiri isagoo cirka daawanaya. In yar kaddib baa misana Faadumo candhuufo soo tuftay oo labadoodiiba gaarsiisay. Kor bay nimankii eegeen mise gabar quruxsan baa geedka saaran!

Labadaa nin oo mid dadqal ahaa midna fiqi ahaa baa mid walba wuxuu niyaystey in gabadhu gacantiisa soo gasho. Fiqiga oo ahaa nin doobnimo ku raagey, wuxuu rabey inuu guursado gabadha, dadqalkuna inuu hilbaheeda cuno buu doonahayey.

Inkastoo labada nin midba muraad gooni ah watey, misana kuma kala boodine waxay ku heshiiyeen in gabadha loo daayo labadooda kii ay doorato. Sidaa baa dadqalkii go'iisii fidsaday fiqigiina masallihiisii, gabadhiina laga codsadey key rabto in ay u soo degto.

" Labadiinna kii xoog badan oo kan kale ka adkaada baan u soo degayaa", bay gabadhii ku xujaysey. "Naa maandhey diriri maynoo saaxiib baan nahaye, mid kayo u soo deg", buu yiri dadqalkii oo indhaha ku gubaya.

Faadumo markay garatay inayan sina uga fakan karin bay masallihii ku soo booddey. Waxaase dhacday in fari taabatay go'ii dadqalka.
Dadqalkii oo samrine wuxuu weydiistey in fartii go'iisa taabatay loo gooyo. Fiqigii baa tiisii u gooyey, maxaa yeelay, far iyo ka badanba Faadumaa kaga cuslayd oo kale qaayo weyneyd.
Maalintaa intii ka dambeyseyna waxaa lagu magacaabi jirey fiqi farey. Halkaa ayaa fiqi farey gabadhii kula dhaqaaqay oo ku guursadey.

Duhurkii goor ey tahay baa Faarax oo laba sagaaro

sitaa geedkii yimid, mise walaashii ma joogto.

Markuu gabadhii waayey buu wuxuu yiri:
"Ilaahow haddaan walaashay waayey, Cantalyaa iga dhig! Cantalyaa bakhtiguu cunaaye, xuunsho iga dhig! Xuunsho xaarkey cuntaaye, shimbiraha kii u khayr roon iga dhig!".

Baryadaas Ilaahay waa ka aqbalay oo wuxuu u gaddoomey gallayr.

Waa dambe baa faarax oo gallayr ahi wuxuu dool ku yimid degmo ay deggan yihiin fiqi farey iyo Faadumo oo carruur badan isu dhalay.

Maalintii dambe baa carruurtii Faadumo dhashay oo geel la jooga, waxay yimaadeen geed gallayrku saaran yahay iyagoo hilbo ay siteen cunahaya.

"Dhashii Faadumo farlacageey, abtigiin sida alla u galay baan ahaye, hilbaha wax iga siiya".
Markay waxba siin waayeen buu yiri gallayrkii "Dhashii Faadumo farlacageey, dhalbaas, dhalbaas".

Ilmihiina waxay ugu jawaabeen "Gallayr manjo guduudow, galleyr baas gallayr baas!".

Markii carruurtii ay hooyadood u tageen bay uga sheekeeyeen wixii dhacay. Faadumo intay soo qaadatay qumbe subag ah bay carruurtii ku tiri:" I geeya meeshaad gallayrka ku aragteen". Markii loo geeyey bay waxay tiri:
" Gallayrow haddaad walaalkay tahay, soo deg oo qumbahaan subagaa soo dhex gal".
"Soo degi mahayo oo awalba waa adigii i nacay oo cidla' iiga tegey, haatanna baalal baan leeyahay oo meeshaan doonaan u duulaa", bay jawaabtii gallayrku ahayd.

" Walaalow soo deg, walaalow sidaas idkuma nacaan kumana kala tagaane".
Gallayrkii waa soo degey oo qumbihii dhex galay.
"Haddaad walaalkay tahay sharqan aan kugu garto samee, markaad subagga laysato", bay tiri Faadumo.

Cabbaar hadduu qumbihii ku jirey baa waxaa la maqlay quruf quruf qumbaha ka dhex yeeraysa. Dabookay ka qaaday, mise gallayrkii walaalkeed buu isu rogey oo noqday!

Mar kale ayay Faadumo nasiib u yeelatay inay walaalkeedii ay jeclayd aragto oo indhaha ku muursato, kaddib markii ay wax badan caloolxumo, tiiraanyo, hilow iyo samirla'aan ku noolayd. Ayaandarro, faraxaas iyo sareedadaasu ma noqon mid waara sidaan arki doonno mar dhow.

Faadumo wiilkeedii curadka ahaa iyo walaalkeed durbadiiba wey saaxiibeen, fardafuulka iyo tabaha dagaalka ayay isla baranjireen oo ku beretami jireen. Waxaase aalaaba badin jirey oo ku horreyn jirey taas Faadumo walaalkeed. Taasina waxay dhalisay in Faadumo ninkeedii Fiqi Farey wiilka seeddigiis ah nac iyo colaad u qaado.

Maalin dambe ayaa xoolihii la aroorshey oo fiqi farey, wiilkiisa iyo Faarax kexeeyeen.
Markii ceelkii la tegey ayaa geenyadii fiqi farey biyaddiiddey kaddib markii xoolihii kale cabbeen.

Geenyadu waxay sidaa yeeli jirtey markay u baahato beer dad.
Fiqi farey oo awalba Faarax necbaa, baa wuxuu ku tashaday inuu wiilka khatal ku dilo dabadeedna geenyadiisa beerka ugala baxo.

Warankiisii buu inta meel qotomiyey wiilashii inay ka bootimaalaystaan ku amray. Markii wiilkiisu ka boodayo, waranka ayuu hoos u dhigayey, markii Faarax ka boodayana kor ayuu ugu taagayey, ilaa uu markii dambe caloosha ka suray, oo halkaa wiilkii ku geeriyoodey, dabadeedna geenyadii beerka looga baxshey.

Fiidkii markii xoolihii intii hore la soo hoyiyey, ayaa Faadumo waxay bilowday iney weydiiso qof kastoo yimaada: "Mee walaalkay Faarax?".
"Geelii buu soo wadaa oo la imaan doonaa", baa loogu jawaabay. Wax yar dabadeed baa geeli yimid, sayte misna:
"Meeyey walaalkay?".
"Arigii buu soo wadaa". Arigii kolkuu yimid.
"Mee walaalkay?".
"Awrtii buu soo dheelmayaa".

Wax sidaas lagu sasabo, markii dambe ayaa Faadumo loo sheegay in walaalkeed waran laga bootimaalaysanayey ku dhintay.
Faadumo oo awalba dhiillo qabtey kana warhaysey in fiqi farey Faarax neebaa, baa garatay khayaanada lagu diley

walaalkeed.
Maalintaas iyo intii ka dambaysey, Faadumo hadal dambe lagama maqal.

Waxay ku tashatay inay walaalkeed u aarguddo. Uur bay lahayde, waxay sugtey intay ka bila dhammaysato.

Maalintii dambe ayay foolatay oo gabar dhashay. Mandheerteedii bay inta soo qaadatay, kidiftey oo oodkac ka dhigtay. Takar bay xabbad walba ku duubtay dabadeedna isku shiishay. Fiqi farey bay habeenkii oodkacii siisay. Dibbiro iyo uurweynaad buu ka qaaday, kaddib markuu oodkacii cunay. Dabadeed markuu ogaadey inuu mandheer cunay buu ismoodey inuu uur leeyahay. Si uu yeelo iyo meel uu is dhigo ayuu midna garan waayey.
Xanuun iyo surracaad intuu la rafanayey hadba hal takar ah baa dabadiisa faw ka soo oranaysey, illeen takarta oo lagu yiqiin naf adkaan, qaar baan dabkii karin oo aan shiillimaadkii wax yeelin.

Fiqi farey uurweynaadkii buu u dhiman doonaa, erayadii hadal ugu dambeeyeyna waxay ahaayeen:

Takara faw faw    sidee naaga u dhalaaneey!
Takara faw faw    soddohay waa sagaaleey!
Takara faw faw    sagaalkaba iigu yeerooy!
Takara faw faw    sabeen ugub igu sadqeeyooy!
Takara faw faw    sidee naaga u dhalaaneey!?

QAYBTA III

# TARJAMADA SHEEKA-XARIIR RUUS AH
( Translated from Russian fairy tales )

WAXAA TARJUMEY:

Jaalle Dahabo Faarax Xasan

## TUSMADA SHEEKOOYINKA


SHIMBIR - KAAH........................... 1 - 17

FAARAX IYO SUUBAN....................... 18 - 32

CEEBLA CAQLIBADAN ...................... 33 - 49

" KARIIR" .............................. 50 - 62

CAMALOW................................. 63 - 78

"FAADUMA-XAY"........................... 79 - 101

# SHIMBIR-KAAH

Waa baa waxaa jiri jirey boqor la oran jirey Burhaan. Boqorku wuxuu lahaa saddex wiil oo kan ugu yar lagu magacaabo " Olol". Boqorku wuxuu lahaa beer qurxoon oo dhir cosob ah iyo ubax jaad walba leh ay ku beeran yihiin.

Beerta dhexdeeda waxaa ku yiil geed " Tufaax " ah oo miro dahab ahi ka raaracaan.

Maalin maalmaha ka mid ah baa boqorkii wuxuu dareemay in mirihii dahabka ahaa ee geedka Tufaaxa ah ku yiil sii yaraanayaan.

Wuxuu gartay in meesha tuugo ku jirto, sidaas daraaddeed wuxuu diray ilaaliyeyaal si ay tuugga u soo qabtaan. Waxaase dhacday inay wax ka qaban kari waayeen arrintaas. Boqorkii aad iyo aad buu u calool xumaaday, biyo iyo baad toona ma dhadhamin jirin sidii Tufaaxii dahabka ahaa looga xaday. Carruurtiisii waxay isku dayeen inay aabbohood ka farxiyaan oo illowsiiyaan xatooyada.

" Aabbe, waxba ha is caloolxumayn " bay ku yiraahdeen, annagaa ilaalinayna beertee ".

Wiilasha kii u weynaa baa wuxuu yiri:" maanta iyo caawaba anaa ilaaliye ka noqonaya beerta ".

Markuu intaa yiri buu beertii aadey. Maalintii oo dhan buu gees walba ka eegayey. Wax badan buu socday waxaase dhacday inuusan cidna arag.

Siduu u socsocdey buu daaley, markaasuu is yiri cawska cosobka ah wax yar ku naso, kolkaasuu daal daraaddi kobtii ku gam'ay. Subaxii dambe ayaa boqorkii wuxuu ku yiri: "kaalay halakan oo ii sheeg haddii aad akhbaar wanaagsan ii waddid. Ma garatay ninka tuuggu yahay?" "Maya, aabbe, waa igu wallaahi inuusan tuug caawa beerteenna imaan, Maxaayeelay, il ma'aan guduudin habeenkii oo idil, cidina soo ma gelin meeshaas".

Habeenkii xigey waxaa ilaaliye ahaa wiilkii dhexe oo isaguna sidii kii hore iska seexday, subaxii dambena s sheegay inuusan qofna arag. Waxaa la soo gaarey kalkii wiilka yar, Olol beertii aabbihii habeenkuu ilaalinayey, ma fariisan mana seexan. Markuu wax yar oo hurdo ah iska dareemaba, wajiga ayuu cawska dhadadu saaran tahay marsanayey si uusan u seexan.

Habeenku markuu labo isu dhigay buu wuxuu ku arggaggaaxay iftiin ka dhalaalaya beerta dhexdeeda. Iftiinkii waa sii weynaadey, ilaa uu beertii oo dhan kaahiyey. Olol wuxuu isha saaray "Shimbir-kaahaysa" oo geedkii tufaaxa

ahaa mirihii ku yiil afkeeda dhuuban qubqub ku siinaysa. Yarkii geedkii buu degdeg u fuulay oo shimbirtii buu qabo is yiri. Dabadeedii buu ku dhegey, waxaase dhacday inay shimbirtii ka fakatay oo duushay. Baal keliya ayaa Olol gacantiisa ku haray.

Waagu markuu beryey ayaa Olol aabbihi u tegey.

"Maandhe ma qabatay tuuggii?" boqorkii baa weydiiyey.

"Maya, aabbe", bay ahayd jawaabtii yarku,"Ma qaban tuugii, waxaanse ogaadey cidda uu yahay". "Eeg aabbe" ayuu yiri, oo jeebka uga soo bixiyey baalkii shimbirta ka haray, "Tuuggu wuxuu kuugu soo dhiibay baalkaan rahaamad ahaan".

Boqorkii wuxuu qaatay baalkii, maalintaas iyo intii ka dambayseyna wuxuu bilaabay inuu cuno oomatidii uu ka go'ay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa boqorkii maankiisa waxaa ku soo dhacday Shimbir-Kaaha, kolkaas buu wuxuu u yeeray saddexdiisii wiil oo ku yiri:" Maandhoowyoow, fardihiinna kooraysta oo ku soo wareega Adduun-Weynaha. Waxaa hubaal ah inaad maalin heli doontaan Shimbir-Kaaha, haddii aad meel walba ka doontaan".

Wiilashii hadalkii aabbohood bay u wada Qushuuceen, oo fardohoodii waa ay wada koorqaysteen, dabadeedna waa ay dhoofeen isla markiiba. Wiilkii weynaa wuxuu qaaday dhabbe, kii ku xigeyna wuxuu cagta saaray dhabbe kale, Ololna mid saddexaad.

Cidina ma sheegi karto haddii Olol wax badan socdey iyo haddii kale, waxaase dhacday, maalin waqtigu xagga kulul yahay inuu isagoo aad u daallan faraskii ka degtey, si uu xoogaa u nasto, faraskiina intuu dabray buu cawska u sii daayey, si uusan uga fogaan. Ma sheegi karno haddii uu waqti dheer hurday iyo haddii kale, laakiin, markii uu baraarugey wuxuu ogaadey inuusan faraskii joogin. Faraskii ayuu doondoonay, wuxuu doondoonaba, ugu dambaystii wuxuu helay raqdiisii: lafo la feentay keliya ayaa ka haray faraskiisii!

Olol halkaasuu muraaraddillaac la fariistay. Sidee buu safarkii dheeraa u wadi karaa isagoon faras haysan?

" Waa hagaag, haddii aad weydo waxaad rabtid, waxaad ka badin weydaa la yeelaa" buu naftiisa ku sasabay.

Wuxuu ka badin waayey inuu lugihiisa ku socdo.

Wuxuu socdaba, wuxuu daal iyo murugo kula dhacay caws doog ah oo indhaha iyo taabashadaba u roon meel uu ku badan yahay. Naxdin iyo murugo daraaddood indhihiisu kuma raaxaysanayn abuurta jaadka walba leh oo ku meegaarsanayd.

In yar buu madaxa kor u qaaday. Muxuu arkay oo hortiisa taagan? Mise waa Dhurwaa "Ciiro-Boos".

" Maxaad meesha la fadhidaa, ood la murgaysan tahay, ina boqorow?" Ciiro-Boos baa weydiiyey.

" Maxaan u murugoon waayey, Ciiro-Boosow, mar haddaan geenyadaydii waayey.

Ciiro-Boos: Anigaa cunay geenyadaadii, aad baanse uga xumahay. Bal ii sheeg waxa meeshaan cidlada ah ku keenay? Xaggee baadse u socotaa?".

Olol: Aabbahay baa wuxuu i faray inaan adduunweynaha ku soo wareego oo ka doono "Shimbir-Kaah".

Ciiro-Boos: "Oo hadda soo ma heshay? Hagaag, waxaad ogaataa inay geenyadaadii kuu geyseen Shimbir-Kaah hadday kula socoto 3 sano. Anigoo qur ah baa og meesha Shimbir-Kaah jirto. Mar haddii aan geenyadaadii anigu cunay, adigaan si daacadnimo ah kuugu adeegayaa.

Soo fuul dhabarkayga oo i xagso.

Olol wuxuu fuulay dhabarkii Ciiro-Boos oo sidii gamuun la jaray ula xiimay. Intay cirka iyo dhulka dhexdooda duulayeen, waxaa il milicsi ku dhaafayey kalo biyo ah oo cirka midabkiisa leh, toomo cosob ah, buuro dhaadheer. Ugu dambaystii waxay yimaadeen daar uu darbi dheeri ku wareegsan yahay "Si fiican ii dhegeyso, Olol", buu Ciiro Boos yiri, "Xasuusana waxaan ku leeyahay". Darbigaas dheer fuul. Waxaad ka cabsataa ma jiraan, sababtoo ah, waxaynu nimid saacad waa naagsan oo ilaaliyeyaashu wada hurdaan. Qol ku yaal burjiga daarta, waxaad ku arki doontaa dariishad uu suran yahay qafas dahab ah. Qafaskaas waxaa gudihiisa ku jira Shimbir-Kaah. Shimbirka soo qaad oo ku qari baalkaaga hoostiisa, waxaanse kaaga digayaa inaadan taaban qafaska dahabka ah!".

Olol darbigii buu fuulay, dabadeedna wuxuu arkay burjigii iyo qafaskii dahabka ahaa oo ay ka dhex muuqato Shimbir-Kaah. Wuxuu soo qaatay Shimbirtii oo hoosta gashaday, laakiin wuxuu indhaha ka qaadi waayey qafaskii dahabka ahaa. "Alla qurux badanaa qafasku !", buu is yiri. "Sidee baan uga tegi karaa shay sidaas u qurxoon!".

Wuxuu illoobcy digniintii Ciiro-Boos.Mar alla markuu taabtay qafaskii ayaa waxaa meel walba ka yeeray sawaxan, xagga siiri baa ka yeeray, halkoona reemayaal diririg leh, dabadeedna waxaa hurdadii ka toosay ilaaliyeyaashii oo dhan oo inta durbadiiba Olol gacanta ku dhigay boqorkoodii Afrax horgeeyey.

" Kumaad tahay, maxaadse doonaysey ood halkaan u timid?" buu weydiiyey Boqor Afrax.

" Waxaan ahay Olol, ina Boqor Burhaan", bay jawaabtii yarku ahayd. " Ceeb baad dhigtay! Ma qaadan karo wiil Boqor dhalay oo tuug sidiisii wax u dafaya!".

"Adiga ruuxaaga kuguma habboona inaad Shimbir-Kaahaaga beerahayaga inay tufaaxa ka xadaan u soo dirtid", sidaa waxaa yiri Olol.

"Haddii aad si asluub leh iigu sheegi lahayd, aabbahaa Boqor Burhaan madaxiisaan kugu siin lahaa. Haatanse adduunkoo dhan baan ku faafinayaa magac xumada aad cidda u soo jiiddey. Ama maya,haddii aad yeemada aad cidda u soo jiiddey. Ama maya,haddii aad yeeshid waxaan ku iraahdo, waan kuu dambi dhaafayaa. Boqortooyo uu boqor Bay u taliyo waxaa joogo faras bulush dahab ah leh oo boqorku leeyahay. Waxaan kaa doo-

nayaa inaad ii keentid faraskaas, aniguna waxaan hadi-yad kuu siinayaa Shimbir-Kaah iyo qafaskeeda".

Yarkii isagoo murugaysan buu wuxuu u tegey Ciiro-Boos.

"Waxaan kaaga digay inaadan taaban qafaska", buu yiri Ciiro-Boos oo ciishaysan, " maxaad saaxiibkaa warkiisa u maqli weydey?".

" Aad iyo aad baan uga xumahay sidaan wax yeelay, waxaanse kaa codsanayaa inaad ii dulqaadato markaan keliya".

" Haddii aad ka shallayday, waa yahay. Haatanna soo fuul dhabarkayga, anigu hadalkaygii ka noqon mahayo. Dadka adduunkoo dhammi waa isku wada raacsan-yihiin in ballankii la qaado, la xajiyo oona la oofiyo".

Ciiro-Boos wiilkii buu la boodey markuu intaa yiri. Inay wax badan socdeen iyo in kale ma sheegi karno, laakiin waxay ka soo daahireen daartii faraska saynta dahabka ah lehi joogey.

"Darbigaa dheer kor, Olol, inta ilaaliyeyaa-shu hurdaan" buu yiri Ciiro-Boos, iskana jir, markaad xorada fardaha gashid, faraska oo keliya soo wado wax

kalena ha taaban xakamihiisa kulay ku tahay".

Olol wuxuu tafay derbigii daarta, tartiibna wuxuu ugu gudbey xerada fardaha ilaaliyeyaashii oo hurda, oo hoggaanka ayuu soo qabsaday Bulush Dahab. Laakiin wuxuu isha ku dhuftay xakamihii faraska oo uu ka ag dhaqaaqi waayey. Wuxuu ka samaysnaa dahab ay ku kudan yihiin dhagxaan qaali ah. Wuxuu ahaa xakame aad iyo aad ugu wanaagsan faraskaas.

Inta is celin waayey buu olol gacanta la aadey xakamihii; waxaase dhacday mar alla markuu taabtay xakamihii in sawaxan ka yeeray daarta dhexdeeda. Siiri baa meel walba ka yeeray, xaggana reemayaal baa ka diryaamay, dabadeedna ilaaliyeyaashii oo dhan baa isla sara kacay. Waxay durbadiiba gacanta ku dhigeen Olol oo Boqor Bay horgeeyeen.

" Yaad tahay, xaggee baadse ku jeeddaa?" baa boqorkii weydiiyey.

Olol: "Waxaan ahay Olol, ina Boqor Burhaan."

Boqor: "Wiil boqor dhalay oo fardo xadaya!".

Ceeb badanaa! Nin shaqaale caadi ahi kuma dhaceen taasoo kale. Waase kuu dambi dhaafayaa, Olo-low, haddii aad oofiso farriintaan ku fari doono".

Boqor Dalmar wuxuu leeyahay gabar magaceeda la yiraahdo Madiina Qurxoon. Soo xad oo ii keen gabadhaas, aniguna waxaan hadiyad kuu siinayaa faraskayga iyo xakamihiisa".

Olol oo aad iyo aad uga tiiraanyaysan wixii dhacay baa Ciiro-Boos u tegey.

" Waan kaaga digay inaadan u dhowaan xakamaha" buu yiri Ciiro-Boos oo ka xumaaday Olol dhega adayggiisa. " Maxaad u xusuusan weydey digniintii?".

" Aad iyo aad baan uga xumahay, Ciiro-Boos, waxaanse kaa codsanayaa inaad i masaamaxdid".

" Inaad ka xumaato waxaad dhigtay oo koliyihi waxba kuu tari mayso. Hoheey! Bal soo fuul dhabarkayga".

Ciiro-Boos, Olol buu la xiimay. Waxay yimaadeen Boqortooyadii Dalmar.

Beertii daarta boqorka ku tiil ayaa Madiina Qurxoon joogtey iyadoo ay maaweelinayaan jaariyadayaasheedii.

" Markaan waxba kugu hallayn mahayo oo anaa shaqaynaya" buu yiri Ciiro-Boos. " Waxaad dib ugu no-

qotaa jidkii aynu ka nimid, anigaa kaa daba imaanayee".

Olol wuxuu ku laabtay waddadii ay soo mareen, Ciiro-Boosna wuxuu ka boodey derbigii, oo dalaq buu yiri beertii. Wuxuu ku dhuuntay geed shishadiis, dabadeedna sulux buu ku soo yiri meeshii ay Madiina Qurxoon iyo dumarkeedu joogeen.

Cabbaar haddii la joogey bay yartii cayaar iyo wareega caddaysi bilawday. Siday u wareega caddaynaysey bay i adoo wareersan waxay ku dhacday gabdhaha meel ka shishaysa. Ciiro-Boos inta haf soo yiri buu gabadhii daf siiyey oo dhabarka u ritey, dabadeedna kala booday derbigii dheeraa oo far iyo suul isku taagey. Olol oo sii haya jidkii ay isaga iyo Ciiro-Boos ka yimaadeen ayaa Ciiro-Boos oo Madiina Qurxoon sidaa gurada uga soo dhacay.

Yarkii farax iyo filan-Waa daraaddood baa indhihii la soo baxeen.

" Adiguna i soo fuul oo ku dhaqso, haddii kale waa nala qaban doonaa" buu yiri Ciiro-Boos.

Ciiro-Boos dhabbihii buu kula dhacay Olol iyo Madiina Qurxoon. Xiin iyo il milicsi bay waxay ku

dhaafeen kalo biyo ah iyo toomo cosob ah.

Haddii ay wax badan jidka ku soo jireen iyo haddii kalo lama oga, waxaase dhacday inay yimaadeen Boqortooyadii Boqor Bay.

" Maxaad Ololow la aammusan tahay oo ku helay, lana murugaysan tahay?" buu Ciiro-Boos weydiiyey.

" Sidee baan ku hurayaa inaan murugoodo, Ciiro-Boosow! Qalbigaa lay jeexayaa haddaan Madiina Qurxoon ka tago. Markaan soo xusuusto yarta oo aan ku doorinayo faras, beerkaa la ii tallaabayaa!".

" Loqma baahna inaan gabadha faraska ku doorsanno. Meel baynu ku qarinaynaa, aniguna waxaan isu rogayaa Madiina Qurxoon intaan qori isku dhufto(is mariyo). Ii gee markaas Boqor Bay anaa og sidaan wax yeeli lahaa e".

Sidaas daraaddeed Madiina Qurxoon waxay ku qariyeen Mundul ayda ka dhisnaa, Ciiro-Boosna intuu qori is mariyey buu wuxuu isu rogey gabadhii oo halkan taagan. Olol baa kolkaas wuxuu u geeyey boqorkii, oo aad ugu farxay kuna mahadiyey hadiyadda qaaliga ah oo loo keenay.

" Olol waxaan mahad kaaga celinayaa aroosadda yaabka leh oo aad ii keentay", buu yiri Boqorkii, " Haatanna faraskaygii, xakamihiisii iyo koorihiisiiba adaa iska leh oo wado".

Olol wuxuu fuulay faraskii oo Madiina Qurxoon u tegey. Wuxuu la fuulay faraskii oo la cararay.

Isla markaa boqor Bay wuxuu mashquul ku noqday xafladdii uu ku aroosi lahaa Madiina Qurxoon.

Maalintaasi waxay ahayd iid boqortooyadoo dhan.

Habeenkii markii la gaarey waqtigii la seexan jirey ayuu gabadhii gurigeystey. Laakiin markuu is yiri la seexo sariirta, meeshii uu aroosaddii ka filanayey, waxaa ka hor yimid dhurwaa gafuur dheer! Boqorkii intuu argagaxay buu sariirtii ka soo boodey, Ciiro-Bossna durbadiiba wuxuu ka boodey dariishadda oo dibedda ayuu ku dhacay. Isla markiibana wuxuu ka daba tegey Olol iyo Madiina Qurxoon oo jidka sii haya.

Wuxuu yiri markaas " Olol, maxaad la murugaysan tahay oo kaa ba'an weli?".

" Maxaan la murugoon waayey, sow faraskaan

saynta dahaba loh inaan Shimbir-Kaah ku doorsado qasab iguma aha?".

Iska illow taas, anaa kuu jooga oo gacan ku siino "buu ku yiri Ciiro-Boos.

Kaddib waxay yimaadeen boqortooyadii Boqor Afrax.

" Qari faraska iyo Madiina Qurxoon", buu ku amray Ciiro-Boos, "Waxaan isu rogayaa, intaan qori is mariyo, Sayn dahab, kolkaana waxaad ii geysaa Boqor Afrax.

Saas bay faraskii iyo gabadhii ugu qariyeen meel jiq ah, Ciiro-Boosna isu beddelay Sayn dahab. Olol kolkaas buu boqorkii u geeyey. Boqorkii aad buu ugu farxay faraska loo keenay, ballankiisiina wuu oofiyey, oo Shimbir-Kaah iyo qafaskeedii dahabka ahaa buu Olol gacanta ka saaray.

Olol wuxuu ku laabtay kobtii uu uga tegey Madiina Qurxoon iyo Sayn dahab, gabadhii buu faraskii inta la fuulay dalkiisii wajiga saaray iyo aabbihi.

Isla waqtigaas boqor Afrax wuxuu isku dayey inuu faraskii Sayn dahab ahaa fuulo. Markuu kooraha

cagta saaray buu arkay Ciiro-Boos. Isagoo naxdin la suuxsan buu dhulka ku faniinay, Ciiro Boosna caguhuu wax ka daycy, isla markiibana wuu ka daba tegey Olol iyo gabadhii oo sii socda. Markaas baa Ciiro-Boos yiri: "Waa inaan is maca salaamaynnaa, maxaa yeelay, halkaan baan idiinka harayaa: mar haddaan xilkaygii gutey".

Olol faraskii buu inta ka degtey, saddex jeer Ciiro-Boos u sujuuday isagoo ku mahadinaya.

"Ha oran nabadgelyo intaad jirtaan, maxaa yeelay, waxaa suurowda inaad maalin ii baahatid", buu yiri Ciiro-Boos.

" Maxaan uga baahan doonaa?" buu is weydiiyey Olol "Wixii aan rabey oo dhammi waa ii hagaageene".

" Wuxuu ku dhacay faraskiisii Sayn dahab isagoo ay gadaal ka fuushan tahay Madiina Qurxoon oo gacanta ku haysa qafaskii Shimbir-Kaah.

Waxay socdaanba, waxay yimaadeen dalkiisii, markaas buu Olol is yiri wax yar halkaan ku nasta oo ku contoeya.

Wuxuu sitey cad hilib ah oo shiilan oo isaga iyo Madiina Qurxooh kala goosteen durdur halakan ahna biyay ka cabbeen. Dabadeedna waa jiffsadeen si ay

in cabbaar ah u nastaan.

Hurdaa Olol la tagtay daal aawadi, markuu dhacay kaddib baa waxaa u yimid walaalihi oo farda fuushan. Waxay ku soo wareegeen dalal badan iyagoo raadinaya Shimbir-Kaah, gacmo maran bayse la soo noqdeen. Markay arkeen in Olol wax walba soo helay bay ku heshiiyeen inay dilaan walaalkood si ay Shimbir-Kaah, Madiina Qurxoon iyo faraskii Sayn dahab iyagu ugu shir tagaan.

Wiilkii bay dileen, faraskii, Madiina Qursoon iyo Shimbirtiina way la tageen.
Gabadha waxay u sheegeen haddday eray ku tiraabto inay dila hayaan.

Meeshii bayna wiilka maydkiisii uga tageen, isagoo raqdiisa tukeyaal iyo haadi ku ag wareegayaan.

Yaa yimid isagoo ordahaya: Ciiro-Boos, waa uu soo orday oo tuke iyo ilmihiis dhab siiyey oo wuxuu ku amray: " duul oo haddiiba ii keen biyaha nolosha iyo dhimashada, haddaad doonayso inaan ilmahaaga kuu sii daayo". Tukihii waa haadey - muxuu kaloo samayn karey? -

In waqti badani ka soo wareegay iyo in kale ninna ma sheegi karo, laakiin ugu dambeyntii tukihii wuxuu keenay, biyihii dhimashada iyo nolosha. Ciiro-Boos biyihii dhimasho buu markii hore ku firdhiyey nabarradii Olol uu u dhintay; oo isla markiiba biskoodey dabadeedna kuwii nolosha oo soo nooleeyey wiilkii.

" Allah, waa maxay hurdo aan seexday!" buu yiri Olol.

" Haye", buu Ciiro-Hoos yiri, "intaan ka war hayo weligaa ma aad toosteen; maxaa yeelay, walalahaa baa ku dilay, oo kaa qaatay waxaad lahayd oo dhan".

" Dhaqso soo fuul dhabarkayga", buu yiri Ciiro-Boos.

Meeshii bay ka boodeen, oo ka soo daba ordeen walaalihi. Markay soo gaareen baa Ciiro-Boos labadii wiil inta ku boodey hilbohoodii kidfay oo ku firdhiyey kobtii.

Olol markaan si kal iyo laab ah buu u sagootiyey Ciiro-Boos, ugana mahad naqay siduu u caawinay.

Dabadeed wuxuu aadey gurigoodii isagoo Madiina Qurxoon faraskii la fuushan, oo Shimbir-Kaah aabbihi

e geeyey, isaguna la haray gabadhii.

Boqor Burhaan oo faraxii ka batay baa Olol wuxuu ka badiyey su'aalo uu ku su'aalayo wax walba.

Olol wuxuu aabbihi u sheegay sida wacan oo Ciiro-Boos u kaalmeeyey iyo diliddii walaalihi ay dileen isagoo hurda. Wuxuu u sheegay siduu Ciiro-Boos u jarjaray labadiisii walaalood.

Markii hore boqorku aad buu u naxay oo uga xumaaday siday wax u dhaceen, laakiin durbadiiba wuu ka biskoodey.

Olol halkii baa Madiina Qurxoon loogu aqal dhisay, maalintaa iyo intii ka dambayseyna waxay ku noolaayeen cimri dheeri iyo sareedo waaartay.

## FAARAX IYO SUUBAN

Waa baa waxaa duur jiq ah agagaarkiisa degganaa reer sabool ah; oo ka kooban: oday, naagtiisii, wiil iyo gabar, oo hooyadood dhimatay, lana kala yiraahdo Faarax iyo Suuban.

Ninku wuxuu xaaskiisa ku dhiqi jirey qoryo uu duurka ka soo guro, oo tuulada u dhow uu u iib geyn jirey, wixii lacag laga helo. Waa dambe ayaa waxaa dhacday abaar xun oo ninkii xaaskiisii u heli waayey waxay ku noolaadaan.

Habeen isagoo murugaysan oo garan la' siduu wax yeeli lahaa buu naagtiisii wuxuu ku yiri: "Sidee dhibaatada jirta ka yeellaa? Sidee ugu hellaa ilmaha waxay ku noolaadaan? "Naagtii waxay ugu jawaabtey:"Berri aroortii carruurta aan ku habaabino ayda(duurka), dab baynnu u shidi doonnaa mid walbana waxaan siin doonnaa xabbad rooti ah, dabadeedna aan ka dhuumanno si ayan mar dambe inoo dhibin, maxaa yeelay, wixii yar oon hellaa ina kuma wada filla".

" Taas weligey yeeli maayo" buu ku yiri ninkii, "Sidee iiga suuragashaa inaan ilmahayga cidla'

uga tago. Maya, taas qalbigeed ma lihi. Bahallada uma loogi karo dhashayda".

Markaasaa naagtii waxay tiri: " Haddaba waa hubaal inaan afarteennuba gaajo u wada dhimanayno. Haddaad iga diiddey taladaan soo jeediyey, waxaa kuu ee inaad qabrigii laynaku aasi lahaa noo qoddo, maxaa yeelay, waa hubaal inaan nolol dambe jirayn".

Naagtii siday saygeedii ugu waddey oo ugu waddey bay ugu dambaystii oggolaysiisay inay carruurta habaabiyaan, isagoo weli arrinta iskula hadlaya "Sidee qalbigu ii siin karaa inaan dhashayda lumiyo......" Carruurtii iyaguna habeenkaas hurdo ma ladin gaajo daraaddeed, waayo waxay maqleen waxyaabihii ay iskula hadleen aabbahood iyo aayadood.

Gabadhii, oo magaceeda la oran jirey Suuban, baa iyadoo booyaysa waxay walaalkeed ku tiri: "Yaa inoo cid ah?" "Ha booyin Suuban, waynu heli tabtii aan nafteenna ku badbaadin lahayne, waxba ha ka biqin, intaan noolahay". Mar alla markii ay gam'een odaygii iyo naagtiisii; baa wiilkii soo kacay oo inta duleedka dambe ka baxay wuxuu jeebka ka soo buuxsaday quruurux cadcad, oo markii dayaxa iftiinkiisu qabtay sidii dab u birbiraaya;

dabadeed wuxuu ku soo noqday meeshii isaga iyo walaashii jiifeen oo ku yiri: "Abbaaye gacalo, ha walwaline seexo; Alla waa inoo sahlayaaye". Oogga waabberi ayaa naagtii ilmihii hurdada ka jaftay iyadoo ku leh;"Toosa waxaynnu kurteen aadaynaa ayda oo qoryaan soo guraynaa". Kolkaasay jab rooti ah midkiiba siisay iyadoo leh:"Hooya rootigaan hana iska dhammaynina cunno kale heli maysaane".

Yartii baa rootiga maradeeda dacalkeeda ku laabtay, illeen jeebka walaalkeed waxaa ka buuxey quruuruxiiye. Halkaas bay ka jarmaadeen oo wejiga saareen aydii jiqda ahayd. Kolkay cabbaar sii socdeen baa Faarax-yare hadba dib u soo jeedaaliyaa, dabadeed waxaa gartay aabbihiis oo weydiiyey:" Faarax, maxaad hadba dib u eegaysaa oo u harayssa?" "Dadka ha ka harine la soco". "Aabbe", buu yiri yarkii, "Waxaan eegayey Mukulaalkaygii oo iga salaamaya guriga saqaafkiisa".

Naagtii baa waxay tiri kolkaas,"waxaasi Mukulaal ma aha ee waa shucaaca qorraxda soo baxaysa oo qabatay guriga saqaafkiisa, daayeeryohow aan wax kala garanaynin". Faaraxse wax kale gadaal kama jaleecayn, ee quruuruxii buu bilaabay inuu hadba mid dhabaaha dhigo,

si ay guriga ku soo aqoonsadaan markii odayga iyo habartiisu ka dhuuntaan.

Kolkay ayda dhexdeeda marayaan baa aabbihii yiri:" Suuban iyo Faarax tagoo qoryo soo gura, anigu dabkaan inoo sii shidayaaye". Carruurtii xaabay meeshii ka soo buuxiyeen, kolkaasaa dabkii ololkiisu cirka taabtay. Dabadeed naagtii baa waxay ilmihii ku amartay inay dabka agtiisa seexdaan oo halkan ku suugaan ilaa iyo inta ay ka soo noqon doonaan waalidku.

Faarax iyo Suuban waxay iska fariisteen dabka agtiisa. Ilaa duhurkii waxay dhegaysanayeen godinta aabbahood uu geedaha ku jarayey, kolkaas bay gamaanyoodeen iyagoo is leh idin kama foga odaygu.
Waxay maqlayeen waxay ahayd dabaysha geedaha qallalan ruxaysey, foorida abqada iyo yoocada ka ka yeeraysey. Waxay soo baraarugeen goortii aasku madoobaaday. Yartii baa cilcillowga iyo cidladu intay argagixiyeen af labadi iska yeertay oo tiri:" Sidee uga baxaynaa aydaan cidlada ah". Walaalkeed baa aammusiyey isagoo leh:"Waxaynu dhawraynaa ilaa iyo inta dayaxu meel sare ka gaaro, markaas baynu quruuruxii ku aqoonsanaynaa jidkii guriga ina geyn lahaa.

Goortii dayaxii meel sare gaarey buu Faarax walaashii gacanta qabtay, oo wuxuu kula dhacay dhabbihii quruuruxa uu ku daadshey oo dayaxu iftiimiyey. Habeenkii oo dhan bay socdeen. Kolkii waagu soo dhow yahay bay waxay yimaadeen aqrigii aabbahood. Albaabkii kolkay garaaceen baa waxaa ka furtay naagtii aabbahood oo leh:" Waa ilmihii jinni la tagga ahaa. War xaggee baad ka baxdeen? Waxaan is lahayn waa dambe la arki maayee". Aabbihii kolkii uu dareemay in ilmihii yimaadeen buu aad iyo aad u farxay, maxaa yeelay, walwal iyo walbahaar buu la seexan kari waayey habeenkii oo dhan.

Waqti dheeri kama soo wareegan waagaas kolkii abaar kaloo culusi geyiga ka dhacday. Habeenii dambaa carruurtii waxay maqashay aayadood oo leh, "Wax la cuno oo dambe lama hayo aan ahayn xabbaddaa rootiga ah. Waa inaan ilmaha ayda ku habaabinnaa iyo meel ayan ka soo noqon karin mar dambe".

Odaygii oo naxsan baa wuxuu yiri:" Waxaa wanaagsan in carruurtaada lala qaybsado dhib iyo wanaag intaba". Odaygu wuxuu ahaa hayeeshaale aan go'aan lahayn, oo wixii loogu taliyo aan diidin, xumaan iyo samaanba, inkasta oo uusan raalli ka ahayn.

Kolkii odaygii iyo naagtiisuba gam'een,baa Faarax wuxuu damcay inuu sidiisii quruuruxii dahabka ahaa oo cadcaddaa u soo arnursado. Ayaandarro, naagtii baa hortii albaabkii xiritaankiisa aad u dhuujisay oo wuu furi waayey. Dabadeed markuu dib ugu noqday qolkii ay hurdeen, isaga iyo walaashi, buu yartii ku bilaabay sasabaad isagoo leh, " Abbaaye, ha walwaline seexo, Ilaah baa inoo jeeda oo inaga bixin doona dhibaatadaane".

Aroortii hore ayaa naagtii carruurtii hurdada ka kicisay, oo siisay laba rooti, oo kuwii hore ka sii yaryar. Intii ay ayda u sii socdeen baa Faarax rootigii jeebkiisa ku burburiyey, dhawr daqiiqo kolkay socdeen buu jabal jidka ku ridayey, intuu hadba istaago. "Faaraxow, maxaad hadba u istaagaysaa ood goonyahaaga ka eegaysaa?" Baa aabbihiis ku yiri. "Aabbe waxaan eegayey qoolleydaydii oo guriga saqaafkiisa iga soo salaamaysa", baa yarkii ku jawaabey.

"Ma aha qoolleydaadii", naagtii baa tiri, "Waxaa weeye fallaaraha qorraxda oo laamayeeriga qabtay". Faarax dan uma geline hawshiisii buu iska watay.

Waxay socdaanba, waxay gaareen ayda dhexdeeda

meeshii ugu jiqsanayd, kana fog meeshii maalintii hore ee carruurta la geeyey. Kaddib waxaa loo shiday dab ay kulaalaan, oo naagtii waxay ku tiri: "Halakan fariista oo nagu suga, intaan qoryaha soo gurayno, waxaan idiin soo noqonaynaa caawa oon qurigeenni u noqonaynaa".

Harkii kolkii la gaarey Suuban rootigeedii bay walaalkeed jab ka siisay, suu kiisii jidkii buu ku dadiyaye. Waxay sugaanba, casarliiqii kolkay tahay bay carruurtii luloodeen, oo dabadeed meeshoodii ku gam'een. Waxay hurdada ka tooseen goor fiidkii ah, cidina uma imaan. Sideedii bay Suuban u boydey, kolkaasaa Faarax bilaabay inuu sasabo. "Waxaynu dhawraynaa inta dayaxu meel sare ka gaarayo, si uu inoogu istiimiyo rootigii aan jidka ku soo daadiyey, dabadeed gurigeennii baynu tegaynaa, sidii kal hore", buu yiri Faarax.

Dayaxii markuu iftiin fiican uu yeeshay bay ilmihii jidkii dib ugu noqdeen, mise gabal rooti ah laguma arko, maxaa yeelay kumaankunka shimbiraha ah ee duurka ku nool baa cunay. "Dan haw gelin", Faarax baa walaashi ku qaboojiyey, "Waynu helin tabtii aan uga bixi lahayn dhibaatadaane".

Habeenkii oo dhan bay warwareegayeen, maalintii ku xigtay, habeenkii dambana, sidoo kale, laakiin aydii bay dhanna uga bixi waayeen. Gaajo ayay la go'een, say cunno waxaa ugu dambaysey jabkii rootiga ahaa iyo halal rooxo ah, oo ay ka gurteen ayda. Daal iyo gaajo daraaddood bay geed hoostii iska seexdeen.

Maalintii saddexaad subaxeedii; weli way warwareegayeen, iyagoo sidoodii u habowsan. Waxay dareemeen inay ayda ku dhimanayaan haddii ayan helin cid gacan siisa. Duhurkii markay tahay bay carruurtii waxay arkeen(Shimbir cad) gallayr geed laantii ku jooga oo hees macaan qaadaya. Cabbaar bay dhegaysteen shimbirkii oo heesaya, dabadeed kolkuu heestii dhammeeyey buu inta baalasha bafbaf ka siiyey ayuu carruurta horteeda u duulay, say waa dabagaleen ilaa ay ka yimaadeen aqal yar oo dushiisa shimbirkii ku degay. Kolkay u soo dhawaadeen bay waxay garteen in aqalka darbiyadiisu ka samaysan yihiin Kimis, saqaafkuna macmacaan, dariishaduhu iyagu waxay ahaayeen sonkornabaad. Markaasaa Faarax wuxuu yiri:" Haddaynu iidaynaa", oo kolkaas ka soo jabsaday inyar saqaafkii guriga, si uu u hubiyo waxay ka samaysan tahay. Suuban waxay jeclayd macmacaanka oo iyadu waxay ryqsatay cad saqaaf ah.

Afka markay la aadeen bay waxay maqleen cod aad mooddo reer aakhiraad oo yiri: "Yaa aqalkayga xagxaganaya?" Carruurtii oo aad mooddo inuu dhiiggii ka istaagey baa meeshoodii ku qallalay. Dabadeed albaabkii baa furmay, oo waxaa ka soo baxay uun qarmumihii hore inuu ka haray aad mooddo. Hadday dhab u sii jeedaaliyeen waxay ula ekaatay habar dhammaatay oo duuduub badan. Waxaa wejigeeda ka taagnaa san qabka afka qudunquutada oo kale ah, oo aad mooddo inuu laallaado. Habartu waxay ku tukuboysey ul dheer oo xoog badan, kolkay dibadda u soo baxday bay duqdii waxay tiri:" Oh, ilmaha fariidka ahow yaa halkaan idin keenay? Soo dhowaada belaayo idin arki mayso e". "Gurigaygu waa gurigiinnii oo kale"; kolkaasay inta carruurtii gacanta qabatay, waxay gelisey aqalka oo hordhigtay cunno ayan weligood maalintaas ka ka hor, ku riyoon: macmacaan, caano, canbe, laws iwm. Kolkay dhergeen, waxaa loo diyaarshay laba sariirood oo qurux badan, oo dhiinsooleyaal cadcadi ku goglan yihiin.

Labadii ilmood waxay la noqotay inay Jannadii ku jiraan oo waa filan waayeen baraarahaas Ilaahay ugu deeqay.

Duqdii waxay ilmaha tustay jecayl iyo saaxiibtinnimo, laakiin waxay ahayd "Dadqalato", markii qof gacanta u soo galo, intay karsato ayey hilibkiisana cuni jirtey.

Dadqalatada waxaa lagu yaqaan indho guduudan oo aan meel dheer wax ka arag, laakiin sida xoolaha qaarkood bay meel dheer wax ka urshaan oo waa dareemaan markii insi agtooda marayo.

Markay Suuban iyo Faarax gacanta ku dhigtay bay raynrayn daraaddeed la qososhay oo uurka ka tiri: "Mar hadday gacantayda soo galee, igama fakan doonaan".

Oogga waabberi intaan carruurtu toosin ka hor, bay duqdii soo kacaday oo eegtay iyagoo hurda. Waxay isha ku dhufatay camankooda buurbuuran oo iskula hadashay "Baryaqaad wanaagsanaa". Dabadeed gacanteedii seedaha ahayd bay Faarax ku qabatay, oo u qaadday qeeg yar oo guriga agtiisa ku yiil, kaddibna albaad aan la furi karin ku dadabtay. Halkaa oo hadduu ka qayliyo iyo haddii kaleba ayan dan ka gelin.

Dabadeed waxay hurdada ka joftay Suuban oon wax kala ogayn oo ku tiri:" Kacoo biyo soo dhaami oo walaalkaa cunto u diyaari. Kolkuu naaxo baan qalanayaaye". Yartii markay hadalkaas maqashay bay af laba-

di yeertay, laakiin waxba uma ay tarin boohintu. Cuntaba cunta intay ka macaan tahay baa Faarax loo karin jirey, si durbadiiba loo naaxiyo. Yartu waxay cuni jirtey waxyaalihii isaga ka soo hara oo keliya. Subax walba dadqalatadu intay edegga u dhowaato bay waxay oran jirtey:" Faarax, fartaada soo taag aan taabtee haddii aad cayilan tahay iyo haddii kale", dabadeed yarku wuxuu soo taagi jirey laf ay duqdu u qaadatay wiilka fartiisii; kolkaas bay is oran jirtey muxuu yarku u naaxi waayey; Cunnadu xaggee bay ka martay".

Afar toddobaad kolkay soo dhaafeen weli Faarax wuxuu la ahaa caato qori ah. Duqdii intay samri weydey bay waxay goosatay inayan dib dambe u dhigan ee halkaa warka ku qalato.

Yartii, Suuban, bay u yeertay oo ku tiri "Maqal, dhaqso biyo soo dhaami, Faarax ama catto ha ahaado ama ha buurraado, berri baan qalanayaaye!".

Suuban oo harga waraabe loo ridey baa isku dayday inay soo aroorto, markaas bay uurxumo daraaddeed ilma indhaheeda ka soo qubatay iyadoo iskula hadlaysa, "Ilaahow adaa noo maqan; bal intaan ayda wareegayney haddii bahallo iska kaaya cuni lahaayeen labadayadaba

wax dhan bay ahaan lahayd".

" Isla hadalku waxba kuuma tarayo e, ha is daalin" bay ku tiri dadqalatadii oo maqashay ereyadii yartu iskula hadlaysey.

Aroortii hore bay Suuban inta digsi weynaadey biyo ku shubtay dabka saartay sidii duqdu fartay. " Marka hore rooti baan ku dubi doonaa", duqdii baa tiri. "Waxaan shiday foornadii, burkiina waan cajimay". Kolkaas bay Suuban inta u riixday meeshii foornadu ku shidnayd oo olol ka holcayo bay waxay tiri, "Gudaha gal, oo fiiri haddii ay si fiican u shidan tahay oo rootiga lagu guri karo iyo inkale".

Duqdu Suuban waxay la maagganayd inay khatashoş oo markay foornada iyo dabka dhexgasho ay inta irridda ka xirto; dabadeed gabadha iyo wiilka oo mid karsan yahay midna foornaysan yahay ku cunto halkaa. Nasiib wanaag, yartu way dareentay sirta duqda. Kolkaas bay waxay tiri "Ayeeyo ma aqaan sida loo isticmaalo foornada, ee i tus sidaan wax yeeli lahaa". "Naa doqon yahay miyaadan u jeedin siday irriddu u weyn tahay.Eeg aniguba waan geli karaa e", kolkaas bay qaarka hore la gashay foornadii.

Suuban intay is yaraysay oo xooggeedoo dhan isu geysey bay si lama filaan ah habartii ugu riixdey foornada gudaheeda, oo isla markiiba albaabkii ayey qab ku siisay oo dusha kaga xirtay markay gudihii ku hubsatay. Allah, maxaa cabaad iyo jagagac ka yeeray dadqalatadii oo dhamaadii durbadiiba soo kojisay! Suuban dani kama geline intay fure la orodday bay walaalkeed ka furtay albaabkii edegga iyadoo farax daraaddi hadalkii keeni weydey.

Mar dambe baa codkii u furmay oo ay tiri "Fa---Fa---Faarax, abboowe xor baynu nahay". Faarax edegii buu balow ka soo yiri oo walaashi ku boobay,oo meel walba ayuu ka dhunkaday farax daraaddi.
Intay baqdin gooyeen bay waxay la ahayd haddii belaaya kastaa ka hortimaaddo inayan waxba ka tari karin. Waxay galeen gurigii dadqalatada oo ay baareen, dabadeed waxay ka heleen sanaadiiq yaryar oo dahab, dheemman iyo dhagxaan kaloo qiima badan ka buuxaan.

Faarax baa wuxuu yiri markaas "Kuwani waa dhaamaan quruuuruxii" oo jeebkiisa ka buuxsaday."Aniguba in baan ka qaadanayaa", bay tiri Suuban inta kurdaddeeda dacalkeeda ku gurtay.

" Waa inaan dhaqso uga fogaannaa guriga dad-qalatada iyo aydan uu ku yaalba" baa walaalkeed soo jeediyey. Dabadeed degdeg bay uga baxeen guri baaskii. Waxay ordaanba, waxay yimaadeen meel ay ku taal kal weyn oo biyo ah. "Kama gudbi karno biyaha kasha", waxaa yiri Faarax, wax looga gudbana looma jeedo". "Huurina lama arko", bay tiri Suuban; "laakiin eeg, waxaa biyaha dhexdabaaalanaysa booloboolo cad oo weyn, haddii aan tuugno waxay ila tahay inay oggolaanayso inay kasha naga gudbiso". Markaas bay u yeertay oo tiri:

"Boolo-boolo buubtay
canka biyo ku sidataay,
carruurteeda siisataay,
dhabarkaaga cad nagu qaad,
biyaha naga tallaabsii,
waaq, waaq waaq".

Boolobooladii kolkaas bay xaggooda u soo dabaalatay. Faarax baa dusheeda ku boodey oo dabadeed Suuban u yeeray inay la fuusho booloboolada. Suuban waxay u sheegtay walaalkeed inay wanaagsan tahay in midba mar fuulo boolaboolada, si ayan culays ugu noqon. Sidaas bay midba mar uga gudbisay biyihii.

Halkaas bay socodkoodii ka bilaabeen iyagoo ku tala jira inay gurigoodii mar labaad ku noqdaan. Aydii waxay la noqotay sidii wax ay yaqaanniin oo cabsi dambe na gelin. Waxay socdaanba, aqalkii aabbohood bay meel dheer ka arkeen. Orod bay isku sii daayeen oo iyagoon war waayo oran bay aabbohood gurada uga dhaceen.

Duqii, oon weligi qoslin sidii carruurta loo habaabiyey, baa wuxuu ku sigtay inuu farax aawadi la suuxo. Naagtiisiina isla sanadkii bay dhimatay. Suuban iyo Faarax waxay jeebabkooda ka soo farraqeen jawhartii ay guriga dadqalatada kala yimaadeen oo odaygii intay gacmaha qabsadeen la boodboodeen iyagoo leh "Aabbe faqriga waynu fogayn! Aabbe faqriga waynu .....!". Maalintaa intii ka dambaysey, reerkii urursanaan iyo farxad baa aayatiinkiisii noqday.

CEEBLA CAQLIBADAN

Waa hore, hore ayaa waxaa jiri jirey boqor carruur ka leh saddex wiil. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa boqorkii wiilashiisii uu isugu yeeray markii uu arkay inay qaan gaar yihiin.

" Maandhooyinow intaan weli dhallinta yarahay ayaan jeclahay inaan arko idinkoo guursaday, oo carruur leh aan indhaha ku nuursado", buu yiri boqorkii. Jawaabtii ilmuhu waxay ahayd:
"Aabbe, haddii mucurtaadu taas keliya tahay, haddee noo ducee, noona sheeg dumarkaad nala rabto inaan guursanno".

" Waa hagaag, maandheyaal, midkiin kasta waa inuu soo qaataa qaanso iyo fallaar.
Midkiin kastana meel ha ku gano fallaarta, meel alla meeshay ugu dhacdo ayaa u khayr ah oo uu naagtiisii ka helayaa loo qoray".

Wiilashii waxay u guuxeen ra'yigii aabbohood; iyadoo mid kasta uu sito qaanso iyo fallaar bay soo bannaan baxeen oo yeeleen sidii odaygu faray.

Wiilashii kii u weynaa fallaartiisu waxay

ku dhacday dayd nin beereey uu leeyahay, waxaana soo baxday gabadhiisii.

Wiilkii dhexe tiisii waxay ku dhacday nin ganacsato maalqabeen ah gurigiisii, gabadhiisii baana gacanta ku dhigtay fallaartii.

Wiilkii u yaraa carruurta fallaartiisii siday u bidday baa la garan waayey meeshii ay ku dhacday.

Yarkii wuxuu u qalab qaatay inuu baadigoobo fallaartiisii meeshay ku dhacday. Wuxuu doono, iyo wuxuu doondoonaba, wuxuu aakhirkii u yimid balli yar, muxuu arkay oo balliga gawgiisa ka soo jeedda?
Rah fallaartiisii afka ku haysa! Yarkii oo magaciisa la oran jirey Raage baa rahdii ku yiri:
" Raheey, raheey ii soo celi fallaartayda".
Rahdiina waxay ku jawaabtey:
" Waan kuu soo celin haddii aad i guursanayso!".
" Maxaad ula jeeddaa? Sidee baanse rah u guursan karaa?".
" Waa inaad i aroostaa, maxaa yeelay, saami baa iigu kaa dhacay anar Ilaahna lama diidi karo".

Raage aad iyo aad buu u calool xumaaday, laakiin wuxuu qaban karey oo kale ma jirin. Sidaa darteed wuxuu iska qaatay rahdiisii, oo gurigii ayuu la soo aadey.

Saddex aroos iyo saddexdoodii xafladood baa boqorkii diyaariyey: Wiilkii weynaa waxaa loo guri geeyey gabadhii beeraleygu dhalay, wiilkii dhexena gabadhii ninka ganacsatada ahi dhalay baa loo aroosiyey, miskiinkii Raage ahaana waxaa loo aqalgeeyey rahdii.

Markii waqti door ahi ka soo wareegey maalintii xafladda aroosyada ayaa boqorkii wiilashiisii isugu yeeray oo yiri:
" Waxaan doonayaa inaan tijaabo ka qaado naagihiinna, si aan ku ogaado midda ugu farsamo badan uguna gaarisan. Naag kastaa waa inay shaar daabacan soo diyaarisaa berri meeshii waagu ka beryo. Kiinnii naag fiicnaada ayaa boqortooyada dhaxalkeeda leh".

Wiilashii amarkii bay qaateen oo waa ay ka tageen aabbohood. Raage gurigii markuu yimid buu meel iska fariistay isagoo murug madaxa la laallaadinaya. Rahdii baa iyadoo kowrablaynaysa u timid oo weydiisey: "Raage, maxaa ku helay ood la murugeysan tahay?".

" Aabbahay wuxuu kaa doonayaa inaad berri aroortii shaar gacmaha iyo qoorta ka daabacan u diyaarisid", buu Raage ugu jawaabay.
"Ha walwalin, Raage, waaberyada barkhaadkiisuu leeyahaye; haatanna kacoo sariirtaada seexo", bay Rahdii ku tiri.

Raage sariirtiisii buu iska seexday isagoo

walaacsan, Rahdiina daydka xaggiisay u jowrablaysay, waxay iska rogtey haraggii rahda oo oogada uga dahaarnaa oo waxay isu beddeshay Ceebla Caqlibadan, gabar wax qurux ku gaaraa aysan jirin.

Sacabbaday isku dhufatay oo qaylisay: "Kaalaya, hablahaygiiyow, dhaqsadoo shaqeeya! Waxaad ii toshaan shaar la mid ah kuwii aabbahay isticmaali jirey, berri arportiina waa inaan helaa isagoo diyaar ah".

Subaxii markuu Raage hurdada ka toosay, wuxuu arkay Rahdii oo boodboodaysa iyo shaarkii oo miiska saaran isagoo ku duuban xaashi midabyo qursoon. Raynrayntii isagoo ay ka badatay buu shaarkii inta qaatay la aadey aabbihi, oo isla markaa ku shuqlanaa hadiyaddii labada wiil ee waaweyn. Kan weyni wuxuu soo bandhigay shaarkii naagtiisu diyaarisay. Odaygii markuu fiirfiiriyey wuxuu yiri:"Shaarkaani wuxuu ku fiican yahay nin beerrey ah inuu xirto".

Wiilkii dhexe ayaa isaguna kiisii aabbihi soo hordhigay, boqorkiina wuxuu ka bixiyey faalladaan: "Shaarkaani wuxuu ku fiican yahay in suuliga lala galo".

Markaas kaddib Raage ayaa soo bandhigay shaar-

kii naagtiisa Rahda ahi toshay isagoo ay ku daabacan yihiin dahab iyo qalin.

Boqorkii markuu aad u eegay buu wuxuu yiri: " Kani waa shaar loo qaadan karo xafladaha!. Labadii wiil ee waaweynaa guryohoodii bay ku noqdeen iyagoo leh:" Waxaa caddaatay inaan qalad ahayn markaan ku qosollay Raage naagtiisa. Rah ma ay aha ee waa sixirrey".

Mar kale ayaa boqorkii inammadiisii isugu yeeray.

"Dumarkiinna u sheega inay ii soo dubaan rooti berri subaxii aan ku quraacdo: Waxaan rabaa inaan ogaado tan ugu cunto macaan".

Raage gurigii ayuu ku noqday isaggo ka welwelsan sidii ay naagtiisu tijaabadaan uga soo bixi lahayd. Rahdii baa markaas weydiisey:
"Maxaad qabtaa, Raage ood ka fekeraysaa?". "Wax kale ma aha e, waxaa lagaa donayaa inaad rooti aabbahay u dubtid uu berri subax ku quraacdo", buu ku jawaabey Raage.
"Ha is calool xumayn. Waa beryaba barkhaadkiisuu la imaane", bay Rahdii ku tiri Raage.

Wiilasha waaweyn labadii naagood oo u dhaxdey waxay soo direen habar, si ay u soo ogaato waxa Rahdu samaynayso iyo siday rootiga u dubeyso. Rahduse waa ay garatay waxa dantoodu ahayd. Waxay cajintey bur oo inta tannaarta daboolka sare ka qaadday ayey ku tuurtay burkii oo xargagan. Duqdii markay intaa aragtay bay orod isku taabatay oo uga warrantay naagihii sidii Rahdu wax yeeshay. Iyagiina sidii oo kale bay burkii u dubeen.

Rahdii markii duqdii jaajuuska ahayd ka tagtay bay dibedda u soo boodboodey isuna beddeshay Ceebla Caqli-badan, dabadeedna gacmaha isku dhufatay oo tiri: "Kaalaya, gabdhahaygiiyow, dhaqsadoo hawl ku dhaqaaqa. Meeshii waagu ka beryo diyaariya rooti cad oo jilicsan, sidii kii aan guriga aabbahay ku cuni jirey oo kale".

Subixii dambe ayaa Raage burdada ka soo baraarugay, wuxuuna indhaha ku kala qaaday rootigii oo diyaar miiska ku ah, isagoo dusha kore ka xardhan sidii go' la daabacay oo kale; magaalooyin derbiyo dhaadheer iyo albaabyo mardimaysen leh baa laga arkayey muugga rootiga lagu xardhay.

Raage aad iyo aad buu u farxay. Rootigii buu wuxuu ku duubay mara yar oo daabacan, oo markaas aabbihi hor dhigay oo isna markiisa farax iyo sareedo wajigiisa ka muuqdaan. Isla markaa baa labadii walaal oo waaweynaa iyana keeneen rootigoodii.
Wuxuu ahaa bur cajiman oon qaab iyo qurux toona lahayn oo inta tannaarta lagu tuuray buusbuusmay loona sameeyey sidii ay habartu ka soo warisay Rahda.

Boqorkii wuxuu markii hore ka qabtay rootigii wiilka weyn, markuu in yar eegay buu wuxuu amray in loo geeyo shaqaalaha guriga. Dabadeed wuxuu qabtay rootigii wiilka dhexe, oo uu isna sidii kii hore ayuu u gudbiyey shaqaalaha guriga.

Markii Raage kiisii soo hor dhigay, boqorku wuxuu yiri: "Rootigaani waa mid ku habboon in la cuno maalmaha iidaha!".

Markuu intaa yiri, buu boqorkii wiilashiisa iyo afooyinkooda ka casumay xaflad uu doonayey inuu dhigo maalintii xigtey.

Mar kale ayaa Raage gurigiisii ku noqday isagoo tiiraanyaysan oo gorodda laallaadinaya.
Rahdii baa ka hor timid iyadoo kowrablaynaysa oo wey-

diisey:" Dhaaq, Dhaaq! Maxaa ku helay Raage ood la murugaysan tahay? Ma aabbahaa baa hadal xun ku yiri?". "Rahey, Rahey!", buu yiri Raage, "Waxaan u murugoon waayey. Boqorkii wuxuu igu amray inaan ku geeyo xaflad weyn oo uu dhigayo berrito. Sidee kuu hor geyn karaa dadkaas faraha badan oo ka qaybgelaya xafladdaas?". " Ha walwalin Raage, keligaa baa tegi doona meeshaase, aniguna waa ka daba imaan doonaa". Waxaad maqli doontaan dambam iyo diririg onkod oo kale ah. Ha ka biqin, hadday ku weydiiyaanna waxaad ku tiraahdaa:" Waa Rahdaydii oo sanduuqeedii ku soo boodboodaysa".

Raage xafladdii buu keligi aadey, walaalihina waxay yimaadeen iyagoo la socda afooyinkoodii oo say u labbisan yihiin aad ka yaabayso oo indhohoodu kuulan yihiin, labada canna wax sii dhalaalinaya marsaday. Meel bay safteen iyagoo ku qosqoslaya Raage araggiisa.

" Maxaad uga soo kacday aafadaadii?", bay weydiiyeen, "Waxaad ku soo qaadi kartey masar yar!". "Xaggee baad ka heshay naagta saa u qurxoon?". "Waxaan u malaynayaa inay muddo badan kugu qaadatay heliddeedu".

Raagase dheg jalaq uma siin hadalladaa xun xun ay hadba ku tuurayeen.

Boqorkii, wiilashiisii iyo afooyinkooda iyo martidii oo dhammi waxay fariisteen miis dheer oo ay ku sharraxan tahay maro xariir ah oo daabacan. Markii in yar la joogey baa waxaa soo yeeray diririg iyo dambam oo ay dhulka iyo daartiiba la gariireen. Martidii waa argagaxday oo kuraastii ka sarakaceen. Kolkaas baa Raage wuxuu yiri:" Ha biqina martida sharafta leheey, waa afadaydii oo ku soo kawrablaynaysa sanduuqeedii e". Markuu intaa yiri Raage baa waxaa hortooda ka muuqday gaari qurxoon, kuraastiisana harag qaali ahi ku dahaaran tahay oo ay jiidayaan lix faras oo cadcad. Waxaa gaarigii ka soo degtey Ceebla Caqli-badan,oo qabta goo garad cirka midabkiisa leh, oo xiddigo birbirayaa ku daabacan yihiin. Waxay madaxa ku sidatey bil kaahaysa. Quruxda ka muuqatey erayo lagu tilmaamo lama hayn, waxayse ahayd wax cajiib ah oo indhuhu inay halacsadaan ku habboon.

Ceebla waxay gacanta qabsatay Raage oo la aaddey miiska xaggiisa. Martidii halkii bay cuntadii ku jeesatey iyagoo faraxsan. Ceebla glaaskeedii bay

sharaabkii ku cabtey, dabadeedna intii ka hartay bay ku shubtay kurdaddeeda gacanteeda bidixda oo ballaaran. Waxay cuntay hilib boolaboolo oo kolkaas lafihii waxay ku riddey gacanta midig.

Naagihii labada wiil ee waaweyn waxay ku daydeen Ceebla siday yeelaysey iyagoon garan waxay u dan leedahay.

Cuntadii iyo cabitaankii baa dhammaaday, oo waxaa la gaarey waqtigii ciyaarta. Ceebla intay Raage gacanta qabsatay bay bilawday inay cayaarto. Markay dhowr tillaabo qaaddaba waxay ku dhufaneysey wareegacaddeys, dadkoo dhammina isha ayey ka raacayeen hadba saantay qaaddo, iyagoo ay ka muuqato yaab iyo bogaadin.

Waxay wareejisay kurdadda gacanteeda bidix; mise waxaa hortooda ka muuqata kal biyo cirka u eg ay ceegaagaan, waxay misana wareejisey gacanta midig, dabadeed waxaa ka soo dhacay boolaboolooyin cadcad oo kashii biyaha ahayd kor sabbeeyey. Boqorkii iyo martidiisii yaab iyo dhabannahays baa ka soo haray.

Labadii naagood oo wiilasha kale u dhaxay iyana wayaartii bay dhinac ka galeen, oo waxay billaa-

been inay yeelaan sidii Ceebla Caqli-badan wax yeeshay. Kurdadda gacanteeda bidix bay wareejiyeen, saa waxa ka soo firdhay hilbihii ay ku gureen, dabadeedna tan midigta oo lafo midi wejiga boqorka ku dhacday baa ka soo daatay.

Boqorkii aad iyo aad buu u carooday, dabadeed wuxuu amar ku bixiyey in labada naagood indhihiisa hortooda laga wado.

Isla daqiiqaddaas Raage wuxuu ku orday gurigiisii. Wuxuu guriga dhexdiisa ka helay xuub(harag) rah, dabadeed inta soo qaaday haraggii buu wuxuu ku tuuray dabka oo gubey.

Ceebla waxay ku soo noqotay gurigii, isla markiibana waxay tawday haraggeedii raheed. Intay muraaraddillaacday bay iyadoo dhafoorka gacmaha ku haysa meel iska fariisatay oo tiri:" Alla, Raage, maxaad samaysay! Haddii aad sii koran lahayd saddex maalmood oo kale, xilahaagii baan si dhab ah u noqon lahaa, haatanse nabad gelyo. Waxaad iga soo doontaa ood iga heli doontaa 7da Dhul iyo 7da Cir dhexdooda meesha uu ku nool yahay Kooshin-Madhinte".

Markay Ceebla intaa tiri bay waxay isu rogtey shimbir oo dariishadda ka duushay. Raage wax badan buu arammi la booyey. Dabadeed intuu afarta qibladood midba mar u sujuudey buu meeshii ka hor timid foolka saaray oo naagtiisii Ceebla Caqli-Badan goobisteeda bilaabay.

Ma sheegi karno hadduu meel fog tagey iyo hadday wax badan ku qaadatay, kabihiise waa ay ka dhammaadeen, dharkiina oogadiisuu ku madmaday, koofiyaddiina roob iyo bus baa midabkeeda dooriyey. Waqti kaddib ayuu wuxuu la kulmay oday dhacay oo harag iyo lafo isa saaran ka soo hareen.

" Maxaad sheegtay?, fariidow", buu yiri duqii, "Maxaad doonaysaa, xaggee baadse ku socotaa?". Raage wuxuu u la sheekeeyey dhibaatooyinkii haystey iyo wixii ku dhacay.

" Maxaad u gubtey haragga rahda? Adigu ma aad ahayn qofkii xiran lahaa ama tuuri lahaa. Miyaadan ogeyn inay Ceebla ahayd gabar ka waqli badisay aabbaheed, taasina intay dhibtay duqa buu yartii habaaray oo u rogey rah intii saddex sano ah.

Hooyoo qaado kubbaddaan dunta ah. Dunta caaraddeeda intaad qabatid dabagal meel alla meeshii ay kula aaddo."

Raage duqii yaraa buu ku mahdiyey, wixii uu farayna waa ku dhaqaaqay oo wuxuu raacay kubbadda dunta ahi meeshay u dilindilootay. Barxad bannaan isagoo maraya buu wuxuu la kulmay maroodi, dabadeed intuu shiishay buu wuxuu is yiri dilk laakiin maroodigii wuxuu ku hadlay cod dadeed oo yiri:" Ha i dilin, Raage, waxaa ruurowda inaad mar uun ii baahatide".

Raage waa ka naxay hadalkii Madax kutida(Maroodiga), markaas buu iska daayey oo ka gudbey. Intuu socodka hayey wuxuu arkay shimbir badeed madixiisa dushiisa duulaysa.

Wuxuu bilaabay inuu shiisho, laakiin shimbirtii cod insaan bay waxay ku tiri:" Ha i dilin, Raage, ii baahan doontidaa maalin lama oga e".

Raage wuxuu iska daayey shimbirtii oo waa uu ka gudbey. Waxaa dabadeed ka horyimid bakayle ordahaya. Kolkaas buu shiishay durbadiiba, markuu toogan lahaa baa bakaylihii cod dadeed, wuxuu ku yiri: "Ha i dilin, Raage, maalin ii baahan doontidaa la oga e".

Isagana, Raage, waa iska daayey oo wuu ka gudbey. Dabadeed wuxuu yimid bad buluug ah, oo xeebteeda bacaadka ah uu dhacadiido yaxaas-badeed neefsanaya.

" Ii naxariiso, Raage", buu yiri yaxaaskii "Igu celi baddayda!".

Raage yaxaaskii buu inta kor u qaaday, badda ku tuuray, kaddibna socodkiisa ayuu iska watay isagoo qaadaya badda xeebteeda.

In waqti dheeri ka soo gudbey iyo in kale lama sheegi karo, laakiin kubbaddii dunta ahayd waxay la gashay kayn jiq ah oo uu ku dhex yaal mundul yar oo ku taagan dooro lugaheed la wareeganaya.

" Mundulow, mundul yar u istaag sidaad ahaan jirtey, wajigaaga i soo aaddi, dhabarkaagana ayda xiji", buu yiri Raage.

Mundulkii wajigiisii buu Raage u soo jeediyey dhabarkiina wuxuu xijiyey ayda. Raage irriddii buu (mundulkii) ka galay. Waxaa indhihiisu qabteen Baaba-Yaaga oo dhacadiid u jiifta dabka agtiisa, sankeeda dheerina taabanayo aqalka saqaafkiisa, karbaashna ag yaal.

" Maandhe, maxaa halakan ku keenay?", bay weydiisey Baaba-Yaaga. "Maxaa kaa maqan oo aad raadinaysaa?. Kaalay maandhe, agtayda soo fariiso oo hadal, waa ku baryagaa!".

" Marka hore cunto iyo biyo i sii, duqyahay haragga ahi, biyo kulul oon ku mayrtana ii diyaari, dabadeedna waxaad doonto i weydii", buu Raage ugu jawaabey.

Baaba-Yaaga, qumanyo, biyihii bay u qandicisay, cunto iyo cabitna way siisay, dabadeedna sariirta ayey u gogoshay oo seexisey. Markaa kaddib buu Raage ugu sheekeeyey naagtiisii Ceeblo Caqli-badan ee uu goobayey.

" Waxbaan ka ogahay meeshay jirto", bay tiri Baaba-Yaaga, "Kooshin Madhintaa haysta, waana culus tahay sidii looga fakin lahaa, maxaa yeelay, lagana jibakeeni karo. Dhimashadiisu waxay ku jirtaa cirbad caaradeed, cirbadduna ukun gudeheed, ukuntuna boolaboola calooshood, boolabooladuna bakayle, bakayluhuna dhulman buu ku jiraa, dhulmantuna waxay saaran tahay yaaq uu ilaalinayo Kooshin Madhinte".

Raage habeenkii wuxuu ku baryey gurigii Baaba Yaaga, oo waagu markuu baryey u tilmaantay meesha uu ku yaal yaaqu.

Inuu jidka wax badan sii hayey iyo in kale cidina ma oga, laakiin ugu dambaystii wuxuu yimid geedkii yaaqa ahaa; Halkaa ayaa geedku gowriiray isagoo laamihiisa dabayshu ruxayso? Fiinta u sarraysa waxaa saarnaa dhulman weyn oo aan la gaari karin. Sidii loo joogey baa waxaa yimid maroodigii oo inta geedkii xoog u ruxruxay dhulka ka soo rujiyey.
Dhulmantii dhulkay ku soo dhacday burburtayna, waxaa markaa ka soo dhex baxay bakayle aan la gaari karin, waxaa ku soo baxay bakayle kale oo ka orod badiyey. Intuu qabsaday buu fiin firirtay hilibkiisii ka dhigay. Markaassa waxaa ka soo dhex baxday boolaboolo isla markiiba duushay oo cirka taabatay. Laakiin intaan ilmilicsi ka soo wareegan baa shimbir badeeddii korkeeda ka timid oo nabar xoog leh ku dhufatay boolaboolladii dabadeedna ka riddey ukuntii ay afka ku sidatey oo badweynta ku dhacday. Raage boohin buu la dhacay markii ukuntii badda ku dhacday.
Sidee buu uga dhex heli karaa ukun badweyn ku dhacday? Sidii loo joogey baa waxaa la arkay yaxaaskii oo xeebta u soo dabaalanaya isaggo afka ku sida ukuntii.

Raage ukuntii buu jebshey oo kala soo baxay cirbad. Markaas buu wuxuu isku dayey inuu caaradda ka jebsho. Markuu wax yar loodiyaba Kooshin Madhinte waa sii dhadaycy isagoo galgalanaya. Taasisc wax uma tarin sababtoomah. Raage cirbadda caaraddeedii wuu jebshey, Kooshin Madhintana dhulkuu is garaangariyey isagoo mayd ah.

Raage wuxuu kaddib tegey daartiisii caddayd. Waxaa ka hor timid Ceebla Qaqli-badan oo ordaysa oo dhunkasho ku boobtay.
Raage iyo Ceebla Caqli-badan waxay ku noqdeen gurigoodii halkaas oo ay nolol wanaagsan iyo sareedo ku waareen.

K A R I I R

Waa baa waxaa jiri jirey oday gaboobey,odaygu saddex iil buu lahaa. Wiilasha labada weyni waxay ahaayeen kuwo la jecelyahay oo had iyo jeer xiran ji-rey dhar quruxsan. Waxay ahaayeen inammo toolmoon oo ku habboon inay xaasas yeeshaan, laakiin wiilka ugu yar wuxuu ahaa mid nacasnimadii ka badatay. Wuxuu iska agfadhiyi jirey meesha dabka lagu shido, sidaas darteed baa waxaa loogu yeeri jirey "Dambasyaal", magaciisa runta ahise wuxuu ahaa "KAMADARE".
Wuxuu dibedda u bixi jirey markuu gocoso dhulka ka qodanayo oo koliyah.

Kolkii odaygii sariirtii uu ku dhiman lahaa ku aruuray buu wiilashii inta u yeeray la dardaarmay.

" Maandhooyin, markaan dhinto waa inaad i xustaan oo midkiin kasta qabrigayga hal habeen korkiisa ku dhafraa, iina keenaa rooti aan cuno", buu yiri odaygii.

Maalintii dambe ayaa odaygii dhintay oo la soo aasay. Habeenkaa waxay ahayd in wiilka weyni odayga qabrigiisa rooti geeyo oo u soo jeedo inta waagu ka

beryahayo. Waxaase dhacday inuu ka wahsaday ama ka cabsaday inuu qabriga dul fariisto.
Sidaa darteed buu Kamadare wuxuu ku yiri:
"Haddii aad caawa i beddesho oo odayga qabrigiisa tagto, waxaan kuu soo iibinayaa kubbad aad ku cayaarto".

Kamadare wuxuu oggolaaday hadalkii walaalkii. Wuxuu tegey qabrigii aabbihi isagoo roti u sida. Markuu meeshii(duugta) tegey buu wuxuu dul fariistay qabrigii oo dhawray waxa soo socda. Markii habeenku labo isu dhigay baa dhulkii bilaabay inuu gariiro. Dabadeed inta dhombalmay baa waxaa ka soo baxay godkii aabbihi oo aragti laga naxo leh.

" Waa kuma? Ma curadkaygii baad tahay? Iiga warran sida dalkii lagu yahay. Eeydii weli ma ciddaa, uubatadu ma muusannowdaa, ilmahaygiise ma booyaan?", buu weydiiyey odaygii.

" Waa aniga aabbe, wiilkaagii baan ahay. Waa lagu nabdoon yahay dalkaagii".

Odaygii wuxuu cunay rootigii Kamadare u keenay ilaa uu ka dhergey, dabadeedna wuxuu ku noqday qabrigiisii? Kamadare gurigoodii buu isaga noqday,

intuuse jidka ku soo jirey hadba berrin gocoso ah a ayuu u fariisanayey. Markuu guriga ku soo noqday ayaa walaalkii curadka ahaa waydiiyey:" Aabbeheen ma aragtay?". "Haa, oo arkay", buu jawaab ku siiyey.

" Rootigii aad u geysey ma cunay?". "Haa, waa uu ka dhergey".

Maalintaasi saas bay ku dhammaatay. Waxaa la gaarey waqtigii curadxigeenku odayga qabrigiisa ku soo jeedi lahaa. Isna sidii kii hore ayuu wahsaday Hadama baqay. Sidaas aawadeed buu Kamadare ku yiri:"Haddii aad i beddesho caawa, waxaan kuu tolahayaa laba kabood, nacnacna waan kuu gadin". "Waa yahay, anaa caawa tegaya aabbe qabrigiisa", buu Kamadare yiri.

Wuxuu qaatay rooti oo qabrigii intuu tegey, dulfariistay, dabadeedna dhawray. Habeenbarkii baa dhulku gariir bilaabay, qabrigii afkiisuna kala dhaqaaqay oo odaygii ka soo baxay.

" Waa kuma? Ma curadxigeenkaygii baa? Ii sheeg sida dalkii lagu ahaa. Eeydii ma cidaa, uubatadu ma muusannowdaa, wiilasheydiise ma booyaan?", buu weydiiyey odaygii.

" Waa niga aabbe, wiilkaagii baan ahay,dalkiina waa lagu nabdoon yahay", buu Kamadare ku jawaabey.

Dabadeed odaygii rootigiisii buu cunay ilaa intuu ka layn waayo, dabadeedna qabrigiisii ku noqday. Kamadare gurigii buu ku soo noqday isagoo intuu jidka soo hayey hadba gocoso meel u fariisanayey.

" Aabbe rootigii aad u geysey ma cunay?" "Haa, waa ka dhergey", buu yiri Kamadare. Habeenkii saddexaad waxay ahayd kalkii Kamadare qabriga odayga tegi lahaa. Kamadare wuxuu walaalihi ku yiri: " Laba habeen oo isku xigta baan anigu qabrigii aabbeheen tegey. Haatan waa kalkiinnii ee taga caawa,anigu waan nasanayaaye".

" Alla maya, walaale, adigaa u bartay shaqadaas e, orod oo caawana tag". " Waa yahay. Haddaan cid kale aadayn, anna tegin". Rooti buu inta qaaday qabrigii aabbihi dulfariistay. Habeenku markuu labo isu dhigay baa dhulkii gariiray, qabrigii afkiisii baa kala tegey, dabadeedna odaygii ka soo baxay. "Waa kuma? Ma wiilkaygii saddexaad baa? Iiga warran,sidee lagu ahaa dalkii? Eeydii ma cidaa, uubatadu ma muusannowdaa, ilmahaygiise ma booyaan?.

" Aabbo waa aniga, wiilkaagii Kamadare. Dalkii waa lagu nabdoon yahay", buu ugu jawaabey wiilkii. Duqii rootigii buu cunay oo ka dhergey. Markuu laystay rootigii buu wuxuu yiri:" Aabbo, waxaad tahay wiilka keliya oo dardaarankaygii oofiyey. Kama aad biqin inaad timaaddo qabrigayga saddex habeen oo isku xigta. Haatan inta bannaanka u baxdid waxaad tiraahdaa: "Kariir, i maqal oo yeel waxaan ku iraahdo!

Faraska hortaada soo istaagi doona dhegtiisa midig ka gal oo dhegta bidix ka bax. Markaad sidaa yeesho waxaad isu rogi doontaa wiil xoog iyo qurux badan. Dabadeed waxaad fuushaa faraska, meeshaad doontanaad".

Kamadare wuxuu qaatay xakame odaygu siiyey, oo aabbihi buu ku mahadiyey, dabadeedna gurigii buu ku laabtay. Kolkuu yimid baa walaalihi weydiiyeen: "Aabboheen ma aragtay, Dambasyaal?".
"Haa, waan arkay", buu yiri.
"Rootigii wax ma ka cunay aad u geysey?.
"Haa, waa uu ka dhergey. Wuxuuna igu yiri ha iman mar dambe qabrigayga".

Waxaa dhacday in boqorka magaaladaas u tali-

yaa uu isla waqtigaas daartiisa isugu yeeray inta dhallinyaro madaxbannaan oon xaasaska lahayn.
Wuxuu doonayey inuu gabadhiisa nin uu u guuriyo kala dhexbaxo. Gabadhu waxay ahayd mid dhibaato iyo xujooyin badan. Waxay amar ku bixisay in degdeg loogu dhiso daar ka kooban 12 dabaq. Dabaqa ugu sarreeya ayay doonaysey inay fariisato oo ka soo jeensato dariishadda. Dabadeed dhallinyaradii laysugu yeeray halkaa bay waxay u sheegtay inay ka guursanayso, aabbaheedna siinayo boqortooyadiisa nuskeed ninkii isagoo faraskiisa ku jooga soo gaara ilaa dariishadda ay ka soo jeeddo oo markaas dhabanka ka dhunkada.

Warkaasi wuxuu ku soo duulay dhegihii labadii wiil, oo ay Kamadaro walaalaha ahaayeen, oo halkaa ku tashaday inay nasiibkooda ka wardoonaan.

Fardohoodii bay subag iyo fuud siiyeen,si fiican bay kooraha ugu dhuujiyeen, iyagiina waxay xirteen dharkooda kuwii ugu qurxoonaa, si yaable markay isu dhiseen baa Kamadaro oo dabka ay fadhiya wuxuu ku yiri:" Walaalayaalow aan idin raaco, aniguna aan nasiibkayga eegeed".

" War dhaandhaanyohow dabkaaga af fadhi", bay ugu jawaabeen walaalihi.

" Haddii shirkaas lagugu arko waa lagugu wada qoslahayaa. Markaad dabka fadhigiisa ka daashid, gocoso doono", bay hadalkii ku dhammeeyeen iyagoo qoslahaya.

Labadii walaalood fardohoodii bay fuuleen, inta koofiyado madaxa jiq ku siiyeen bay sidii gamuun la jaray isa siidaayeen iyagoo siigo kaliya reebaya.

Markay cidladii uga tageen walaalihi, baa Kamadare soo qaatay xakamihii aabbihi siiyey, oo inta dibadda u baxay sidii odaygu faray u yeeray:" Kariir, Kariir, i maqal oo yeel waxaan ku leeyahay", ayuu ku dhawaaqay.

Maxaa la arkay? Wax qurux faras loo dhammeeyey baa isagoo ordahaya hortiisa isa soo taagey. Dhulkii cagihiisa hoostooda ahaa baa gariirey, sanka labadiisa dul olol baa ka yimid, dhegihiisuna qiiq sidii daruuro cirka isqabsaday bay sidii showlad markab u soo deynayeen.

"Maxaad igu amraysaa, Kamadare?", buu yiri

faraskii, Kamadaro luquntii faraska buu salsalaaxay, xakamihii buu goliyoy, dabadoodna intuu dhogta midig ka galay buu tan bidixda ah ka baxay.
Sidaa markuu yoolay buu wuxuu isu rogoy inan qurux-diisa qorrax soo baxaysa la moodo oon wax loo dhigo la arag. Faraskii buu fulay oo madashii dhallinta dhan laysugu yooray buu qabtay iyo daartii boqorka.

Kariir waa la boodoy, isagoo ni-ni-ni leh, oo la dhoxulay, sidii gamuun la jaray, buuro dhaadheer, xiinna ku dhaafay aqalladii iyo geedihii.

Wuxuu yimid gurigii boqorka oo dhallinyaro jaad walba leh daydkiisa ballaaran ka buuxaan.
Waxaa iyana halkaa ku tiil daartii 12ka dabaq dhisma-hoodu ka koobnaa oo moosha ugu sarraysa dariishaddooda ka soo jooddo gabadhii boqorku dhalay.

Boqorkii ayaa dabaqa kowaad dariishaddiisa soo istaagoy oo ka soo hadlay isagoo leh:
"Dhallinta fariidka ahooy, nin alla ninkii idinka mid ah oo awood u yeesha inuu isagoo faraskiisa ku jooga dhabanka ka dhunkada gabadhayda oo mooshooda fadhida wuxuu isku darsanayaa iyada oo loo guuriyo iyo boqor-tooyadayda barkood oo la siiyo".

Tartamayaashii midba markiisuu isku dayey inuu dhunkado gabadhii boqorka isagoo faraskiisa ku jooga, laakiin eyaandarro, dariishaddu aad bay uga fogayd dhulka oo booddo laguma gaari karin. Kamadare walaalihi iyaguna markooday isku dayeen laakiin sidii kuwii ka horreeyey, guul Alla kama raacsiin.

Waxaa la gaaray Kamadare tijaabadiisii. Kariir buu inta xakamaha u dhuujiyey, labada cirbood dhag ku siiyey, oo sidii gamuun la jaray kor ula booday isagoo minini ka yeerayso. Wuxuu gaaray dabaqa saddexaad markii laga soo tiriyo meesha gabadhu fadhidey. Mar labaad buu isa sii daayey, Waxaa u haray hal tijaabo oo keliya, haddii uu gafana, soo bari bay ahayd.

Kariir buu cirbaha inta ku dhuftay, xakamaha u sii daayey isagoo sanka labadiisa dul olol ka soo daynaya, dhegahana qiiq bul-bul ka leeyihiin. Dariishaddii gabadha markuu la siman yahay buu dhunkasho ka saaray labada bushimood korkooda. Iyaduna isla markiiba waxay ku dhejisey calaamad ay ku aqoonsato.

Dhallintii meesha tubnayd isku mar bay isla qayliyeen oo yiraahdeen:" Qaboo jooji", laakiin Kamadare iyo faraskiisii ilmilicsi bay ku dhaafeen oo ku

libreen daruuro siigo ah.

Waxay tageen meel fog oo bannaan. Dabadeed Kamadare inta faraskii ka degey buu dhegtiisa midig ka galay oo tan bidix ka baxay. War mise waa ninkii-sii hore! Faraskii buu fasaxay, isna gurigiisii ayuu aadey, isagoo jidka hadba gocoso u fariisanaya.

Markuu gurigii yimid isagoo wajiga calaamad-dii ku sita, buu sidii caadadiisu ahayd dabka agtiisa jiifsaday.

Dabadeed waxaa yimid labadiisii walaalood oo uga sheekeeyey wixii ka dhacay daarta boqorka. Ha-dalladoodii waxaa ka mid ahaa:" Tartamayaashu way fa-ra badnaayeen, badidoodna waa toolmoonaayeen. Laakiin waxaa ku jirey mid dadkii oo dhan wax dheeraystay. Faraskiisii bahalka ahaa buu inta la duulay gabadhii dhunkasho dhag ku siiyey. Waa la arkay markuu soo or-dahayey, mar uu tegeyso ninna ma oga".

" Waxaa dhici karta inuu qofkaad sheegay-saan aniga ahaa", buu yiri Dambasyaal.

Walaalihi inta is xanaajiyeen bay yiraahdeen: "Doqonyohow nacnacda jooji! Dambaskaaga dul fadhi oo

gocosadaada cun".

Kamadare wuxuu daboolka hore ka qaaday calaamaddii ay gabasha boqorku ku dhejisey, dabadeed waxaa aqalkii oo dhan kaahiyey kaatunka faskiisii. Markii gurigii iftiimay bay walaalihi argagaxeen oo yiraahdeen: " War maxaad samaynaysaa nacasyohow? guriga ha gubin!".

Maalintii dambe ayuu boqorkii dadkiisii oo dhan casuumad isugu yeeray. Kamadare walaalihi iyana waxay isu diyaariyeen inay casumaadda ka qaybgalaan.

" Walaalayaalow aan idin raaco", buu weydiistey Kamadare", Maxaad tiri? Ma waxaad doonaysaa in la ugu maadsado? Dabkaaga ag fariiso oo gocosadaada cun", bay ugu jawaabeen walaalihi.

Labadii walaalood waxay koorаysteen fardahoodii oo dabadeed qabteen casumaaddii, Kamadare isna wuu ka dabaqaatay isagoo lugaynaya. Markuu gurigii boqorka yimid, wuxuu iska fariistay meel gooni ah.

Gabadhii boqorku waxay bilawday inay ku soo dhex wareegto dhallinyarada, si ay ku garato ninka u calaamadaysan. Waxay mid walba mar siisay koob sharbeed ah, iyagoo isla mar ahaantaas si gaar ah uga eo-

gaysa mid kasta indhaha baalashooda.

Dhammaantood, Kamadare maahane, mid mid bay wejiga uga eegtay. Markay Kamadare u soo dhowaatey bay naxday, maxaa yeelay aragiisu ma fiicnayn, timohoo aan shanlaysnayn, dharkiisoo barbbaro dufan ah ku sharxan yihiin, iwm. " Kumaad tahay? Xaggeese ka timid? Waa maxay waxa isha baalkeeda kaaga dhegsan?", bay weydiisay gabadhii.

" Waa aan kufay oo nabar baa iiga dhacay ... isha", buu Kamadare ku jawaabey.

Gabadhii markuu intaas yiri bay ka soo fujisay calaamaddii isha kaga dhegganayd Kamadare, gurigii baa isla markiiba kaah qaaday.

" Tani waa walaamaddaydii!", bay tiri ina Boqor, éWaa kan ninkii i aroosi lahaa!".

Boqorkii baa soo dhowaadey si uu u arko ninkay gabadhiisu doorataу.

" Alla maya, kani nin kuuma noqon karo", buu yiri aabbeheed markuu Kamadare eegay, "Waa nin aan micne lahayn, dhar uskag badanna qaba".

Kamadare baa wuxuu boqorkii ku yiri:" Boqorow ii oggolow inaan wejiga soo mayrto", boqorkiina waa ka yeelay isagoo aan wejigiisa wax raja ahi ka muuqan.

Kamadare inta dibadda u baxay buu ku dhawaaqay erayadii aabbihi baray:" Kariir, i maqal o yeel waxaan ku farayo!". War maxaa la arkay! Kariir oo duulaya baa hortiisa isa soo taagey. Dhulkii cagahiisa ka hooseeyey baa gariirey, sanka labadiisa dul olol buu ka sii daayey, daruuro qiic ahina dhegihiisa ayay bulbul ka lahaayeen. Kamadare intuu fuulay faraskii buu dhegta midig ka galay kaddibna dhegta bidix ka baxay, wuxu dabadeedna isu rogay inan aad iyo aad u qurux badan oo wiil loo dhigo aan ifka lagu arag.

Dadkii meesha isugu yimid hugun baa ka dhex yeeray markay Kamadare arkeen.

Hadal dambe laguma lumin halkaa, dabadeed Kamadare iyo Ina Boqor waa laysu guuriyey, xaflad weynna waa loo dhigay arooskoodii.

# C A M A L O W

Waa baa waxaa jiri jirey nin waayeel ah oo carruur ka leh saddex wiil. Wiilasha laba waxay ahaayeen diricyo dabada buulkeeda cad, kan saddexaadse, Camalow, wuxuu ahaa doqon aan dabka ka leexan. Labada hore waxay ahaayeen hawldhabeen had iyo jeer shaqaynaya, Camalowse guriga iyo dabka agtiisa kama fogaan jirin maalin oo dhan, adduunka waxa ka dhacayana dhug iyo dhaayo toona uma lahayn.

Maalin baa labada waaweyni waxay aadeen magaalo tuulada ay degganaayeen in door ah u jirta, si ay dhar iyo alaabo kale uga soo iibsadaan.

Maagohoodii, (ay guriga uga tageen), baa Camalow waxay ku yiraahdeen:" Camalow, kacoo biyo noo soo dhaami". "Yeeli mahayo!", Camalow oo jiifa dabka agtiisa baa ku jawaabey. "Camalow haddii aadan biyo soo dhaamin, walaalahaa hadiyad kuu keeni mayaan". Markaasu yiri:"Waa yahay haddaas", oo Camalow baa iska oggolaaday inuu u soo dhaamiyo.

Camalow intuu laba baaldi iyo ul soo qaatay buu webi tuuladooda agmara aadey. Labadii baaldi mar-

kuu buuxshay buu biyaha midkood wuxuu ka dhex arkay kalluun yar oo sabbaynaya. Camalow gacantuu biyihii dhexgashey oo kalluunkii dhab soo siiyey oo yiri: "Maanta qadadaydu waa diyaar", laakiin waxaa cod dadeed la soo baxay kalluunkii oo yiri:" Iska kay daa, Camalow, maalin baan kuu abaalgudi doonaaye". Camalow isagoo qoslahaya buu wuxuu yiri:" Sidee baad iigu abaalgudi kartaa adigu? Abaalkaan kaa heli karaa waa anigoo kuu geeya dumaashiyaashay oo ay ii ka bisleeyaan.Anigu kalluunka hilibkiisa waan jeclahay".

Kalluunkii baryootankiisii buu ku noqday isagoo leh:" Iska kay sii daa, Camalow waa ku tuugayaaye, aniguna waxaan kuu yeeli wax kasta oo aad iga dalbatid". " Waa yahay", buu ku jawaabay Camalow, "Marka hore waa inaan tijaabiyaa haddii aad awood leedahay iyo haddii aad dhagar ku socotid".

"Ii sheeg wax alla waxaad doonto" buu yiri mallaygii.

" Waxaan rabaa inay labadayda baaldi gurigii tagaan keligood iyadoo aan dhibic biyo ahi tifiq ka dhihin".

" Waa yahay Camalo", buu yiri kalluunkii,

mar alla markaad wax iiga baahatid waxaad oran doontaa oo keliya:" Burhaanta Kalluunka, yeel waxaan ku weydiisto! Wax kastoo aad dalabtana waad heli doontaa" isla mar ahaantaas.

Camalow markii uu intaa maqlay buu isagoo aan waqti kale isaga lumin wuxuu yiri:"Kalluunka barakadiisa, yeel waxaan ku leeyahay! Baaldiyayohow gurigii sadab3.

Waxaa dhacday in baaldiyadii kaligoo iska socdeen iyagoo qof aan la arkayni sido, buurkana ka sii degaandegeen.

Camalow kalluunkii buu biyihiisii ku celiyey oo markaas ka daba tegey baaldiyadii oo sii socda.

Baldiyadii oo biyihii ka buuxaan baa tuulada sii dhex maray, dadkii halkaas deggan waa ay ku yaabeen markay arkeen Camalow iyo baaldiyadiisa oo sidaba socda.

Baaldiyadii say u sii socdeen bay waxay tageen mundulkii Camalow.

Waqti dheeri kama soo wareegin maalintaas, markii, Camalow, dumaashiyaashiis misana yiraahdeen:

"Camalow, maxaad la jiiftaa? Kacoo qoryo aan shidanno noo soo gur'. "Anigu yeeli mahayo", buu ku jawaabay. "Haddii aadan yeelin wixii aan kuu dirno, walaalahaa hadiyad kaaga keeni mayaan magaalada".

Camalow isagoo ka xun, inuu ka koco dabka uu kulaalayey diirrimaadkiisa macaan, buu wuxuu soo xasuustay kalluunkii iyo burhaantiisa, markaas buu yiri: "Tagoo, qoryo la shito soo gur. Faasow, qoryo idinkuna guriga, soo gala oo debka shida".

Markuu intaa yiri baa faaskii ka soo booday meel hoose oo uu ku qarsoonaa, oo bilaabay inuu laamaha qallalay ee geedaha soo jaro, oo isu soo ururiyo. Dabadeed qoryihii baa keligood guriga yimid, oo isa safay dabka agtiisa, iyadoo hadba labo qori madaxa la gelayso meeshii dabku ka baxayey.

Maalintaa waqti dheeri kama soo wareegin markii Camalow dumaashiyaashiis yiraahdeen:" Camalow, qoryihii waa ay dhammaadeen. Duurka tagoo soo gur kuwa kale".

Camalow, oo ciil daraaddi cunihii la bararay, baa wuxuu yiri:" Maxaad halka ka samaynaysaan idinku, haddii aydaan qoryihiinna soo guran aqoon?". "War maxaad

sheegaysaa ood u dan leedahay Camalow? bay yiraahdeen dumarkii.

" Annagu halkaan uma joogno inaan duurka qoryaha ka soo gurno". "Sidoo kale, aniguba qoryo gure ma ahi", buu yiri Camalow isagoo careysan oo wejigiisana kanaaq ka muuqdo.
"Haddabe hadiyad heli maysid ee ogow", bay dumarkii hadalkoodii ku dhammeeygen.

Camalow wuxuu sameeyo markuu garan waayey buu inta dabkii ka kacay dharkiisii xirtay kabahiisiina illaday. Wuxuu soo qaatay xarig iyo faas oo gaari faraska dhex fariistay dabadeedna ku dhawaaqay erayadaan:" Fura albaabka, naagayohow!". "War maxaad gaariga ka dhex samaynaysaa, nacasyohow? Faraskiiba weli kuma aad xirinc".

" Waa ka maarmi karaa farska", buu yiri Camalow isagoo hadalkiisa ay kalsooni ka dhadhamayso.

Markay albaabkii ka fureen buu Camalow wuxuu hoos u yiri: "Kalluunka burhaantiisa, yeel waxaan ku leeyahay! Duurka aad kaligaa, adigoon faras ku jiidahayn!".

Maxaa dhacay! Gaarigii koligiis buu inta albaabka ka baxay ayuu kaunta xaggeeda u dulùlubtay isagoo aan ishu qaban karin orod intuu ka qabo.

Markii kaynta loo socdo waxaa la sii mari jirey magaalo yar, sidaa darteed gaarigii dad badan buu maalintaa dhaawacay intuu jidadka magaaladaas sii marayey: Markay dadku arkeen waxay lahaayeen:" War qabtaay!". Laakiin Camalow dheg uma jalaqsiin hadalladooda, wuxuu ku degdegayey inuu kaynta tago oo durbadiiba qoryaha guriga u soo diro, si uu dabadeed dabka qoryuhu samayn doonaan u kulaalo.

Markuu ka nti yimid buu inta gaarigii joojiyey wuxuu yiri:" Barakada Kalluunka, yeel waxaan ku leeyahay! Faasow qoruo soo jar, qoryow idinkuna gaariga gudihiisa isku aruuriya oo isku xirma".

Maxaa la arkay! Faaskii geedihii qallallaa buu jarjaray oo dhandhambalay, dabadeed qoryihii waxay mid mid ugu boodeen gaariga gudihiisa, oo si habsan bay isu aruuriyeen. Camalow wuxuu markaa faaskii weydiistey inuu geed weyn oon la qaadi karin salkiisa u soo gooyo.

Kolkaas buu gaarigii oo buuxa dushiisa inta ku fariisa

tay wuxuu ku dhawaaqay:" Barakada Kalluunkaan kuu baryeye, yool waxaan ku leeyahay! Gurigii dogdog u tag, gaariyohow!".

Gaarigii orod buu isku taabtay. Sidii markii hore, Camalow dad badan buu intuu jidka sii socdey dhaawacay. magaaladii uu sii marayey dadkii degganaa oo dhammi waxay u soo wada bannaan baxeen inay daawadaan, qabtaanna ninka wata gaariga, isagoon faras jiidayn oo keligii iska dulalubanaya oona dadka hardiyaya. Way qabteen oo gacanta ayey ku dhigeen; oo inta gaariga ka soo jiideen bay dileen, iyagoo cay iyo habaar isugu daraya.

Camalow markuu arkay inuu gacanta ugu jiro buu gawsaha isago isku haya wuxuu yiri:"Kalluunka barakadiisa, yeel waxaan ku leeyahay! Qoryow inta kala furantaan, mid mid u uleeya dadkaan!".

Qoryaha xariggii ku xirnaa baa furmay, dabadeed qoryihii waxay u kala duuleen midig iyo bidix, oo dadkii bay dhafoorrada ka tumeen. Kolkaasay dadkii baqa dhabarka la wada dhigeen. Dabadeed Camalow guriisii intuu tegey buu dabka agtiisa iska jiifsaday.

Intii waqtiya markii la joogey baa dalkii

oo idil waxaa ku fiday waxyaalihii Camalow samaynayey. Boqorkii dalka u talinayey baa markaas wuxuu soo diray askari oo ku amray inay gurigiisa keenaan wiilkaas caanka ku noqday arrimahaas yaabka leh.

Askartii boqorku soo diray waxay yimaadeen tuuladii Camalow, mundulkiisii bay galeen, oo waxay ku yiraahdeen Camalow:" Ma digaa wiilka la yiraahdo Camalow?. "Camalow oo dabka agtiisa jiifey baa yiri: "Muxuu idinka qabaa Camalow, ma deyn baad ku leedihiin?" "Dhaqso oo labbiska isku boob, waxaa lagu geynayaa guriga boqorka oo lagaa doonayo". "May, tegi mahayo anigu guriga boqorka", buu ku jawaabay Camalow.

Askartii xanaaq iyo filanwaa bay wejiga la kaduudeen, oo inta midkood iskala jiidey dharbaaxo buu Camalow wajigiisa farba meel ku dhigay. Camalow wuxuu hoos u yiri:" Barakada Kalluunka, yeel waxaan ku weydiiyo! Qoryow ka shaqaysta askarigaan".

Qoryihii isku xirnaa baa inta kala furtay midba markiisa soo duulay oo wajiga nabar kaga dhiftay askarigii Camalow dharbaaxay. Markuu kaasi xanuunsaday bay gurigii degdeg uga wada baxeen oo ku noqdeen meeshii laga soo diray.

Boqorkii yaab iyo filanwaa baa ku dhacay markuu ogaadey in askartiisii wax ka tari weydey Camalow. Wuxuu markaas u yeeray ninkii ugu sarreeyey ciidammadiisa oo ku amray:" Waa inaad degdeg ku keentaa gurigayga wiilka Camalow la yiraahdo, haddii kale madaxaan kaa goynayaa".

Kii ciiddammada u sarreeyey, baa wuxuu soo iibiyey sabiib, nacnac iyo macmacaan kala duwan oo u qaatay tuuladii Camalow degganaa. Wuxuu dabadeed soo galay mundulkiisii. Waxaa markaas joogey Camalow dumaashiyaalkiis. Sarreeye Gaas, wuxuu weydiiyey haweenkii inay la socodsiiyaan waxyaabaha Camalow jecel yahay. Waxay markaas u sheegeen in:" Camalow jecel yahay in si raxmad iyo xushmad leh loola hadlo". Haddii sidaa loola hadlo, wax kasta oo la weydiisto waa uu yeelaa, siiba haddii laga ballanqaado wax uu jecel yahay, sida macmacaanka, macawis uu guntado iwm.

Sarreeye Gaas; wuxuu siiyey Camalow alaabtii uu siday; oo wuxuu ku yiri markaas:"Maandhow maxaad dabka u ag fadhidaa? Ina keen aynu tagnee guriga boqorka". Maya, anigu aadi mahayo guriga boqorka", buu Camalow ku jawaabey.

" Camalow, haddaad boqorka gurigiisa tagto, wuxuu ku siin doonaa macawis qursoon, laba kabood iyo koofiyad".

Camalow markuu cabbaar fekerey buu wuxuu yiri:" Waa yahay, marka, waan tegayaa boqorka gurigiisa, waa se inaad iga hormartaa, aniguna waan kaa daba imaan doonaa".

Markii Sarreeye Gaas tegey, Camalow in door ah ayuu ka dambeeyey isagoo dabka agtiisa ku diirsanaya. Dabadeed wuxuu ku dhawaaqay:" Barakada kalluunka yeel waxaan ku leeyahay! Birjikay tag guriga Boqorka!".

Maxaa dhacay? Burjikadii oo qaxmaysa baa mundulka irriddiisa ka dustey oo isku dhigtay jidka guriga boqorka aada. Isla markaas waxaa dariishadda gurigiisa taagnaa Boqorkii oo arkay burjiko keligeed soo cararaysa oo gurigiisa soo gelaysa. Wuxuu markaas isagoo yaabban yiri:" Waa maxay waxaasu?". "Waa Camalow oo burjikadii uu kulaali jirey wata oo guriga yimid kaddib markaan u yeeray", buu yiri Sarreeye Gaas.

Boqorkii dibadduu u soo baxay oo inta Camalow ka hortegey buu ku yiri:" Camalow, dad badan oo kaa sheeganaya baa ii yimid. Waxaa la sheegay inaad

dad badan dhibaato iyo daqarro gaarsiisay". "Maxay iyagu jidka uga xireen gaari faraskayga?", bay jawaabtii Camalow ahayd.

Intii boqorka iyo Camalow wada hadlayeen, waxaa dariishadda qolkeeda Camalow ka daawanayey gabar uu boqorku dhalay oo magaceeda la yiraahdo Xiddo. Camalow markuu Xiddo isha ku dhuftay buu u bogey hannaanka iyo quruxda ka muuqata gabadha, markaasuu wuxuu hoos u yiri: "Barakada Kalluunka, yeel waxaan ku leeyahay! Gabadha Boqorku idan Alla ha i jeclaato".

Wuxuu Camalow intaas ku daray:" Burjiko, gurigii ku noqo!".

Burjikadii isla markiiba iyadoo heehaabaysa bay gurigii Camalow isku sii deysey. Kolkay gurigii tagtay meeshii ay oolli jirtey bay qummaati u fariisatay, Camalowna waa uu fariistay, sidii caadadu u ahayd.

Isla mar ahaantaas waxaa ka dhacay gurigii boqorka muusannow iyo boohin. Xiddo ayaa jacayl ay u qabto Camalow daraadiis boohin la dhacday. Waxay aabbeheed u sheegtay inayan la'aantiis noolaan karin, in loo guuriyo Camalow ma ahane inayan daawo kale lahayn. Boqorkii aad bay u walaacisey gabadhiisu go'aankay qaa-

datay. Sidaa darteed, wuxuu Sarreeye Gaas ku amray:"
"Camalow dogdog iigu keen, isagoo nool ama dhintay, haddaad doonayso inaad ifka ku noolaato".

Sarreeye Gaas, wuxuu soo iibiyey nacnac, xalwo iyo waxyaalo kaloo macmacaan, dabadeed wuxuu aadey tuuladii Camalow oo kolkuu tegey galay mundulkiisii. Wuxuu markaas ku bilaabay Camalow sasabaad iyo soo dhoweyn gaar ah isagoo u hadiyaynaya alaabtuu sidey. Camalow wuxuu ka dhergey alaabtii loo keenay oo markaas hurdo la dhacay.

Sarreeye Gaas, markii Camalow suuxay buu gaarigiisii ku ritey oo la aadey daartii Boqorka.

Boqorkii wuxuu amar ku baxshey in loo keeno fuusto weyn oo laba qof qaadda. Kolkii loo keenay buu fuustadii afka ka gooyey oo Xiddo iyo Camalow inta gudeheeda ku ridey oo biro xoog leh afka uga wareejiyey ku alxaamay, dabadeedna bad weynta ku tuuray.

Markii Camalow uu in door ah barmiilka ku jirey buu hurdadii inta ka toosay waxba arki waayey.

" Xaggee baan joogaa? buu yiri Camalow,
"Camalow, naftaydiiyow, noloshoennu waxay ku sugan ta-

hay khatar iyo ciribxumo. Waxay nagu xireen barmiil qafilan oo badda ayey nagu tuureen", bay Xiddo ku tiri Camalow. "Waa kuma qofka ila hadlayaa?" buu weydiiyey Camalow, "Waxaan ahay Xiddo, gabadhii Boqorku dhalay". Camalow markuu ogaaday qofka meesha kula jira iyo waxa ay ku sugan yihiin buu hoos wuxuu u yiri: "Kalluunka barakadiisa, yool waxaan ku leeyahay! Dabayley isu soo aruur oo barmiilkaan u riix xeebta engegan!".

Maxaa dhacay? Dabayl baa meel walba ka timid iyadoo fooryaysa, baddii waa kacday, barmiilkiina wuxuu ku dhacay xeeb bacaad qurxoon. Waxaa markaas ka soo baxay Camalow iyo Xiddo oo weydiisey:"Maggee baan degi doonnaa, Camalow? Inooga dhis mundul meelahakan".

" Anigu dhisi mahayo mundul", buu ku jawaabey Camalow, laakiin Xiddo way bariday oo tuugtay Camalow, oo ugu dambaystii wuxuu yiri:" Kalluunka Barakadiisa, yool waxaan ku leeyahay! Dhis daar weyn oo saqaf dahab ah leh!".

Intaan erayadu afkiisa ka soo dhammaan baa daar saqaafkeedu dahab yahay hortooda ka soo baxday

oo lig isa siisay. Waxaa isla markiiba isku meegaarshay beer cagaaran oo ubax badan iyo shimbiro hees macaani ka buuxaan. Camalow iyo Xiddo waxay galeen daarta gudahooda, oo waxay durbadiiba ka soo jeesteen dariishada shishadeed, Xiddo waxay markaas tiri:"Alla, Camalow, miyaadan intaa ka qurux sanaan karin?" Camalow fakar iskuma shuqline wuxuu yiri markaas:" Barakada kalluunka,yeel waxaan ku weydiisto! Ii rog inan toolmoon oo dheer.

Waxaa dhacay dabadeed? Camalow wuxuu isu rogey inan dheer oo toolmoon oona aad u qurxoon isla markiiba.

Isla waqtigaas, waxaa dhacay in boqorkii majabaxsi u soo tegey meesha daarta Camalow iyo Xiddo ay ka dhisnayd. Wuxuu arkay wax uusan qaadan karin, daar yaab leh baa idan la'aan dhulkii boqortooyadiisa laga dhisay.!

" Yaa awood u yeeshay inay ka dhistaan daar dalka boqortooyadayda?" buu isweydiiyey boqorkii.

Wuxuu isla mar ahaantaas diray ergo soo ogaata cidda dembigaa gashay.

Ergadii Boqorku waxay tageen daartii,oo wa-

xay dariishad hoosteed ka waraysteen cidda iska leh guriga saqaafkiisu yahay dahabka.

" U sheega Boqorka inuusan ogaanayn cidda doggan meeshaan, haddii uusan imaan halakan isaga laftiisu", buu ku yiri Camalow ergadii.

Boqorkii sidii Camalow soo faray buu yeelay, markuu daartii Camalow iyo Xiddo lahaayeen yimid baa waxaa ka hortegey Camalow oo ku soo dhoweeyey guriga. Wuxuu ku fariisiyey kursigiisii oo cunto iyo cabitaan cayn walba leh bay soo hor dhigeen. Boqorkii markuu dhergey buu, isagoo yaabban wuxuu yiri:" Kumaad ahayd, maandhe?". " Ma xusuusan tahay Camalowgii gurigaaga yimid isagoo burjiko fuushan?", buu yiri Camalow,"Ma xusuusantahay ninkaad gabadhaada barmiilka kula qafishay oo badda kula tuurtay? Waxaan ahay ninkaas isaga ah. Haddii aan doono, boqortooyadaado dhan dab baan ku shidi karaa oo mar keliye ayaan baabi'in karaa".

Boqorkii aad iyo aad buu u naxay, kolkaasuu wuxuu bilaabay inuu baryo Camalow oo masaabax weydiisto.

" Gabadhayda iyo boqortooyadayda isku darso oo aniga iska kay daa", buu boqorkii oo qarqarayaa yiri.

Dabadeed waxaa la dhigay xaflad weyn oo noo-ceeda aan adduunka meel laga sameeycy la arag. Xaflad-daas ayaa Camalow wuxuu ku guursaday Xiddo, taliskii boqortooyadana si raami ah ugala wareegay aabbaheed. Nolol farax iyo sareedo ku dheehan tahay bay ku waa-reen ilaa iyò intay ka dhinteen.

FAADUMA-XAY

Waa aan dhoweyn oo hore, baa waxaa jiri jirey oday iyo habar is qabi jirey iyo gabadhooda, Faaduma-Xay. Waxay aqal ka lahaayeen mundul yar oo tuulo ku yaal, oloshooduna way fiicnayd oo degganayd.

Laakiinse, waxaa dhacday in habartii aad u bukootay, ayna garatay in waqtigii ay dhiman lahayd yimid.

Gabadheedii Faaduma-Xay bay u yeertay oo inta siisay caruusad waxay kula dardaarantay sidatan: "Dhegeyso oo yeel waxaan ku leeyahay, maandhe. Xannaan neo caruusaddaan hana tusin qof Alla abuurtay. haddii wax xumi kugu dhacaan, caruusadda cunno sii, dabadeedna weydiiso waxaad u baahato. Way ku waanin, gacanna waa ay kugu siin sidaad dhibaatadii kula soo gudboonaata uga bixi lahayd".

Duqdii markay dhunkasho macasalaamayn ah dhunkatay yartii baa naftii deysey.

Odaygii duqdu ka dhimatay waayo badan hadduu mallluunsanaa buu ayaantii dambe guursaday mar labaad. Sababtuu uu guursaday waxay ahayd inuu Faaduma-Xay aayo xannaanaysa u yeelo, ayaandarro, waxaase dhac-

day in naagtuu guursaday ku soo baxday aayo xun,oo cadow aan jiir naxa lahayn ah ay noqotay.
Naagtu waxay lahayd laba gabdhood oo saqajaan ah, oo aan lagu raalli gelin karin wax kastoo loo sameeyo. Hooyadood wax kastay sameeyaan raalli bay ugu ahayd kuna jeclayd, sasabaad iyo salaaxidna ugu dari jirtey. Laakiin Faaduma-Xay way u darrayd, weligeedna uma oggolaan jirin inay mar qur ah ka fariisato hawlaha guriga.

Faaduma-Xay dhibaato iyo qahar bay ku noolayd, intaa waxaa u sii dheeraa, canaanta, qaylada iyo gurrada sabab la'aanta ah oo ay ku hayeen gabdhaha iyo hooyadood. Mar kastana waxay u diri jireen shaqooyin ayan qaadi karin, iyagoo ku xadgudbaya kuna qaylinaya iyo canaanta dhgoheeda ku dhacaya ee afkooda ka soo baxaya ayaa wax walba ka darraa. Waxay uga dan lahaayeen dhibkaas ay ku hayeen in ay yarta korriimadeedu xumaato, qorraxduna wajigeeda gubto oo markaas ku soo baxdo gabar foolxun oo wixii arkaaba ka naxaan oo bahal ah.

Maalintaas oo dhan marna kama fuqi jirin magaceeda oo way u yeeri jirtay had iyo jeer, iyadoo ha-

barta iyo gabdheheedu midiba mar oranayso:" Faaduma-Xay, furuq ku dilye, ku mee? Dhaqsoo qoryo soo gur, hana is kala jiidin sidaadii oo naf is geli! Kacoo dabka shid! Durka cajin! Alaabta mayr! Lo'da soo lis! Guriga nadiifi dabadeedna alaabta hagaaji oo u kala dhigdhig si habsan! Dhaqso yay sidaadii sannad kugu qaadane!".

Wax kastoo la faro Faaduma-Xay way fulin jirtey, isla mar ahaantaas iyadoo ku dadaalaysa inay qof walba raalli geliso.

Maalinba maalinta ka dambaysaso quruxdeedu way sii kordhi jirtey. Qofkastoo daawada Faaduma-Xay, waxaa aragtideedu ku beeri jirtey farax iyo bogaadin. Quruxdeeda erayo lagu tilmaami karo ma jirin. Dhibaatooyinka culculus waxaa ka saari jirtey caruusaddii hooyadeed kala dardaarantay.

Aroortii marka waagu beryo Faaduma-Xay waxay hore lisi jirtey lo'da, dabadeed caruusadda intay caano siiso bay waxay oran jirtey:" Caruusadeey caanahakan dhan, aan dhegahaaga ku shubee shibaatooyinka i haysta".

Caruusaddu markay caanaha dhanto, bay hawlihii yarta laga doonayey oo dhan degdeg u fulin jirtey,

iyadoo isla mar ahaantaas shcekooyin macaan ku illowsiinaysa dhibaha iyo welwelka haysta.

Faaduma-Xay waxay iska fariisan jirtey geed hoostiis iyadoo ubax ku falfalaadaysa, oo ku xirxiraysa galaanka labadeeda tin, intayna kor qaadinna beertii ubaxa waa la carra rogey, biyihii oo la soo dhaamiyey, dabkii oo shidan iyo beertii oo waraabsan .

Hawlaha oo idili markay dhammaadaan bay alamtu waxay Faaduma-Xay wejiga uga firdhin jirtey biyo tahliil ah oo midabkeeda marba marka ka dambeeya sii dhalaalinaya siina qurxinaya.

Maalin goor ay tahay casarliiqii ayaa odaygii reerku isakaga tegey oo u safray magaalo ka fogeyd cidda. Wuxuu gurigii uga tegey naagtiisii iyo saddexdii gabdhood.

Habeenkii markii la gaarey baa dabayl iyo roob uffo badni yimaadeen. Gudcur maaroruuglo ayaa dibadda is qabsaday. Mundulka cidduna wuxuu ku yiil kayn jiqa agteed, kaynta waxaa dhex deggenayd Baaba-Yaaga, habar dadqalato iyo sixirrey ah oo aan dadka hilibkiisa laga soo gaarin.

Habeenkaas Faaduma-Xay aayadeed waxay gabdhaha u qaybisay hawlo: Middii hore waxay u dhiibtay derin caw ah oo la falkinayo, tii labaadna waxay ku qaybisay inay maro daabacdo, Fadduma-Xay waxay ku qaybisay cudbi dun laga soohayo. Markay hawlahaas gabdhaha u kala dhiibtey bay faynuustii demisey, oo musbaax gaas yari ku jiro gabdhihii uga tagtay, dabadeedna waa ay iska seexatay. Cabbaar haddii gabdhihii shaqeeyeen baa musbaaxdii inta gaaskii ka dhammaaday dantey. Gabdhihii naagtu dhashay baa waxay yiraahdeen:"Sidee baan mugdiga ugu shaqaynaynaa haddii musbaaxdii dantey? Waa in middeen gurigii Baaba-Yaaga tagtaa oo faynuus istiin badan innoka soo qaaddaa".

" Anigu tegi mahayo", bay tiri tii weyneyd, "anigu derin baan falkinayaa oo iftiin badan uma baahni".

" Anigu tegi mahayo", bay tiri tii kale iyana, "irbaddaydu waa dhalaalaysaa oo waa arkaa meeshaan ku mudayo".

"Faaduma-Xay, waa inaad adigu tagtaa guriga dadqalatada oo nooga soo qaaddaa faynuus, dhaqso!" oo gabadhii dibadda bay u riixeen.

Faaduma-Xay waxay afka saartay kayntii oo habeenka mugdigiisu ku habsadey, dabayshuna geedaha xoog u ruxayso oo uga sharqaminayso. Yartii baqdin daraaddeed bay boohin la dhacday oo la soo baxday alamteedii "Alameey, alamtayey, waxay walaalahay ii dirayaan gurigii Baaba-Yaaga inaan nal ka keeno, Baaba-Yaagana waa dadqalato lafaha iyo hilibka dadka kala fiiqaysa, ee ila tali, maxaan yeelaa?", bay Faaduma-Xay tiri iyadoo fiqfiq leh.

" Dan haw gelin", bay ugu jawaabtey alamtii, "Waxba ku gaari mahayaane, intaan kula jiro wax dhibaato ah arki maysid".

"Mahadsanid, waad i qaboojisay alamtaydiyeey" iyadoo leh bay Faaduma-Xay kayntii aaddey.

Kaynta goonyaheeda ahi waxay ula ekayd derbiyo dhaadheer oon laga gudbi karin, cirkana dayax iyo xidiigo toona kama muuqanin. Yartii way iska socotay iyadoo gariiraysa gacantana ku haysata alamteedii. Say u socotey bay waxay aragtay nin faras ku jooga oo ka gudbey, wuxuu ku duubnaa dhar gidiigiis cad, faraskiisu waa caddaa, xakamihiisuna waxay ka samaysnaayeen lacag birbiraysa oo mugdiga aad uga muuqata.

Waaberigii baa soo kaahay. Faaduma-Xayna ciddiyihii cagaha(suulasha hore) baa kurtummadii, ay hadba ka kor dhacaysey, ka jejebiyeen, timeheeda galaaman waxaa dul saarraa dhibco biyo ah oo dhadadu ku reebtay. Dhaxanta iyo dhadadu waxay gacmeheeda ku reebeen qoyaan iyo qabow lafaha gaaraya. Siday u socotay baa waxaa misana horteeda maray oo gudbey nin kale oo faras ku jooga; Wuxuu qabey labbis guduudan, faraskiisuna waa guduudnaa xakamihiisuna guduud buu ahaa.

Qorraxdii baa soo baxday oo qandicisay Faaduma-Xay, kana qallajisay dhadadii timeheeda dul saarrayd. Yartu marna ma ay joogsan oo maalintii oo dhan socod bay haysey.

Qorraxdhicii markay tahay bay waxay ka soo dul dhacday jid bannaan(berrin) oo yar oo dhul sarreeya ah. Intay istaagtey bay Faadumo hareeraheeda eegtay, kolkaas bay waxay aragtay mundul yar oo meel halkoo ah ku yaal. Xayndaabka aqalka ku wareegsani wuxuu ka dhisnaa lafo dad oo dusha sare madaxyo uga teedsan yihiin. irriddu waxay ka samaysnayd luga dad lafahood, faseexaduhuna lafo gacmeed, qufulkuna isagu wuxuu ahaa ilko afbadan oo la is dhaafshey si aan dhib yari loogu

dhaafin.

Faaduma-Xay aragtidii waxyaalahaas bay aqalka hortiisa kula qallaashay. Iyadoo sidaas ah baa si lama filaan ah waxaa horteeda maray, oo u muuqday, nin faras fuushan, oo dhar madow qaba, faraskiisa iyo xakamahuba madow yihiin. Wuxuu ag maray albaabka weyn oo waa uu qarsoomay isla mar ahaantaas. Habeenkii baa soo degey(markaas). Markii dhulkoo idili mugdi huwadey baa indhihii madaxyada deydka ku safani wasay bilaabeen inay birbiraan, oo meel walba ku fidiyeen iftiin kan qorraxda la moodo. Yartii baqdin bay la arqartay. Lugihii bay dhulka ka dhaqaajin weydey oo diidey inay ka nuuxsadaan meeshaas beladegtada ah. Si lama filaan ah bay waxay u dareentay dhulkii hoosteeda ahaa oo gariirahaya kalana fuqaya. Dabadeed waxay aragtay Baaba-Yaaga oo duulaysa iyadoo baaldi weyn ku dhex jirta, oo luudi gilgilaysa jidkana xaaqin dheer ku bannaysanaysa. Waxay u soo duushay albaabka weyn xaggiisa iyadoo dabayli ka soo horrayso.

" Hilib insi baa ii uraya! Yaa jooga meesha?", bay tiri iyadoo san dheer taagaysa.

Faaduma-Xay intay habarta u soo dhowaatey

bay salaan la rakoocday i'adoo cod jilicsan ku leh: " Ayeeyo, waa niga, Faaduma-Xay baa la i yiraahdaa. Walaalahay baa feynuus iiga kaa soo diray", bay Faaduma-Xay ugu jawaabtay". "Ma adigii baa? Haddaan ku gartay", bay tiri Baaba-Yaaga. "Aayadaa baan isku cid nahay. Waa hagaag. Intii waqti ah ila joog oo ii shaqee, dabadeedna waxayn arkaynaa wixii la samayn karo". Markay intaa tiri Baaba-Yaaga bay qaylo ku dhufatay: "Qufulow is fur, Albaabowna is ballaq!".

Albaabkii baa fag yiri, dabadeedna duqdii oo Faaduma-Xay daba socota baa gudihii gashay. Albaabka agtiisa waxaa ku yiil geed dheererkiisu nagaar le'eg yahay laamihiisuse duuduuban yihiin, oo mar alla markii qof soo ag marayo intay iskala bixiyaan qorka isku duuba oo qabsada. Faadumo-Xay markii ay ag maraysey buu isku duubay oo ku dhegey" Ha taaban inanta", bay tiri Baaba-Yaaga, anaa soo geliyaye".

Gudihii markay soo galeen baa waxaa ka hor yimid mukulaal oo khaakh ku tiri gabadha oo ciddiyaha inay wajiga uga xuubsato damadday,"Ha xagan inanta, anaa keenaye", bay Baaba-Yaaga ku tiri mukullasha.

Shishay markay u gudbeen baa waxaa wahwah

ku yiri eey,oo afka la soo aadey yarta lugaheeda, dabadeed duqdii baa waxay tiri:
"Ha qaniinin inanta, anigaa guriga soo gashaye.

" Ma aragtay, Faaduma-Xay", bay ku tiri iyadoo eegaysa yarta, " Ma fadududa si la iiga cararaa(fakadaa). Mukulaashayda ayaa ku xaganaysa, eyguna waa ku qaniinayaa, geedkuna waa uu isku kaa duubayaa oo kama fakan kartid, indhahana waa kaa soo bixinayaa, Waxaa intaas ka sii daran albaabku marna kuu furmimahayo oo kama bixi kartid"!

Baaba-Yaaga waxay gashay qolkeedii oo waxay isku kala bixisay sariir caddiir ah.

" Kumee Indhamadow? Kaalay oo cunto na sii", bay ku dhawaaqday habartii.

Gabar suunniyo madow oo aad mooddo inay indhakuul marsatay baa soo orodday, oo Baaba-Yaaga waxay soo hordhigtay: digsi weyn oo sarreen ah, sac nuski, toban jeeg oo caano ah, hal doofaar ah oo hogaysan, 20(digaag) dooro iyo 40 boolaboolo hilibkood, laba toorto oo waaweyn, barmiil khamro ah iyo labo dambiilood oo dhudaar ah.

Wax yar dabadeed Baaba-Yaaga cuntadii la soo hordhigay way ka soo jeensatey. Faaduma-Xay ayay waxay ka siisay xabbad rooti ah oo keliya.

Habartii markay dheregtey bay Faaduma-Xay waxay ku tiri "I maqal, yarey! Jawaankaas meseggada ah waxaad ka guraysàa isha madow, hal hal adigoo u qaadaya. Iskana jir, meeshii waagu ka beryo waa inaad hawshaa dhammaysaa, haddii kale waan ku qalanayaa oo hilibkaaga cunayaa!" Markay intaa tiri bay indhaha isku qabatay oo khuuro bilowday.

Faaduma-Xay xabbaddii rootiga ahayd bay soo qaadatay oo hor dhigtay alamteeda:
"Alameey macaaneey, kaalay oo rootigaan cun, an dhe-haaga ku shubee dhibaatooyinka i hayste. Baaba-Yaaga waxay igu xujaysey hawl culus, dhaar bayna ku martay inay i cunto haddii aanan yeelin waxay iga rabto". Alamtii waxay ugu jawaabtey:" Ha is xumayn hana boo-yine orod oo seexo oo indhaha isku qabso, waa beryaba barkh adkiisuu leeyahayo".

Mar alla markay alamtii ogaatey in Faaduma-Xay gama'day bay cod qurux iyo macaan badan ku dhufa-tay iyadoo erayadaan ku luuqaynaysa:

" Qoolley iyo qudunquuto,......i maqla,
Waxaan ka yaabayaa in ahaqo badani ina
sugeyso. Baalalley, idinka ayay idinku
xiran tahay nolosha Faadumo fiican.
I maqla oo ii jawaaba.
Waa laydiin baahan yahay mid iyo wadarba".

Dabadeed waxaa meel walba ka soo gurmaday haad oo dhan oo u duulaya raxan raxan, in aan isku wada qaban karin carrabkunawada sheegi karin. Waxay bilaabeen inay masaggadii afafkooda dhuudhuuban isha madow uga dhilaan oo u kala soocaan baal iyo badar iyagoo hal-hal u qaadaya. Xabbadaha jufan joonyadda ayaa lagu gurayey baalka iyo ishana darin baa looga tegayey. Hawshii waxay ka soo jeesteen markii kaahawaaberi iftiimay oo uu gudbey faraskii caddaa iyo ninkii ku joogey. Maalin cad bay noqotay, Baaba-Yaagana way toostay iyadoo leh:" Hawshaan kuu diray ma samaysay Faaduma?". "Hooyo wax walba waa diyaar, ayeeyo". Duqdii aad bay u carootay markii yartii xujadeedii ka soo baxday, laakiin hadal ay tiraahdaa meesha uma ool.

" Anigu qaraabsi baan aadayaa, markaan soo noqdana waxaan rabaa inaan arko jawaankaa digirta ah

oo aad kale sukushay qolofta iyo beerka oo laba weel ku kala diyaar ah, haddii kale ogow in hilibkaagu xalaal ii yahay".

Tayfalaq dibadda ayay u baxday oo fooriday, kolkaas baa saab iyo xaaqin dheeri horteeda diyaar ku noqdeen. Saabkii bay dhexgashay xaaqinkiina sidii ay neecawdu biyo tahay oo kale ku wadday saabkii oo cirka iyo dhulka dhexdooda la heehaabtay iyadoo duullimaad ah.

Waxaa gudbey ninkii iyo faraskii guduudnaa, dabadeedna qorraxdii baa soo baxday.

Faaduma-Xay jab rooti ah bay soo qaadatay oo siisay alamteedii iyadoo leh:" Alamtayeey, ii naxariiso, iga bixi dhibaatadaan". Alamtii ced naxariis leh bay ku tiri:" Isu kaalaya doolliyoow meel aad jirtaanba, hawl baa inoo taale!".

Waxaa markaas meel walba ka soo qubtay doolliyo aan la koobi karin oon ili qaban karin, carrabna tilmaami karin oo shaqadii Faaduma-Xay lagu xujeeyey dhammeeyey intaan waqtigii loo qabtay la gaarin.

Habeenka madowgiisii baa arladii ku habsadey.

Gabadhii Suunniyaha madoobayd cashadii Tayfalaq bay diyaarisay oo imaatinkeeda sugtey.
Ninkii iyo faraskii madoobaa baa gudbay, dabadeedna madaxyadii irridda ku teedsanaa. Waxaa bilaabatay dabayl dhirtii ruxday oo laamihii jilicsanaa jajebisay, oo caleemihiina ka daadisay. Dabadeed waxaa timid Tayfalaq oo neecaw xaadda istaajisay ka soo horrayso, oo iyadoon eray kale ku tiraabin weydiisey su'aashaan: "Hawshii aan kuu diray ma dhammaysay, Faadumo-Xay?. "Wax walba waa diyaar, ayeeyo", bay jawaabtii yartu ahayd.

Duqdii aad bay u carootay markay weydey waxay ku marmarsooto si ay gabadha u qalato. Laakiin maxay kaloo samayn kartey haddii xujadii Faadumo-Xay ka soo baxday!." "Waa hagaage, orodoo seexo, anigu waxaan rabaa inaan is rogo e".

Faadumo-Xay meel bay isku lammaanisay,oo ay dhowrtay inay aragto sida habartu isu beddelayso iyadoo gariiraysa. "Suunniyo-Madow, foornada dab dhamac ah ku shid, waxaan doonayaa inaan yarta qasho markaan hurdada ka tooso, dhaqso!", ayey Baaba-Yaaga tiri.

Tayfalaq sariirteedii caddiirka ahayd bay

isku kala bixisay inta taqtad barkatay, wajigana cal-feheedii iska saartay si ay isaga ilaaliso dhuuradheerida.

Kabihii ay wajiga iska saartay waxba uma tarin, oo wax yar kaddib bay bilawday khuuro hawdkii iyo dhirtiiba la gariiraan.

Faaduma-Xay boohin bay la dhacday markay erayadii habarta maqashay oo la soo baxday Alamteedii rootina hor dhigtay iyadoo leh:" Rootigaan cun, Alamtayey macaaneey, aan dhibaatoyinka i haysta dhegahaaga ku shubee. Qumanyadii Tayfalaq waxay doonaysaa inay i qalato oo sidee yeelaa!". Alamtii waxay u sheegtay durbadiiba waxay samayn lahayd siday uga baxdo dhibaatadaas iyadoon waqti kale iska lumin.

Yartii way orodday oo Suunniyamadow u tagtay oo jilbaha qabsatay:" Waa ku tuugaa Suunniyamadow, gacan i sii waxaan doonayaa inaan ka baxsado dadqalatadaan baas intayan hilibkayga cunine.

Markaad foornada shidayso ha ku dhaqsan, ee biyo ku shub qoryaha intaadan shidin ka hor si ay dhib u noqoto qaxintoodu, masarkaygaa abaalgudku qaado haatan wax kaloo ka fiican oon ku siiyo ma hayo e".

Haddaad i fakiso maalin baad abaalkeeda heline".

" Waa yahay, gacalo, waan ku caawinin oo sidaad tiri, qoryahaan biyo ayaan ku shubin intaanan shidin, Tayfalaqna cagahaan u salaaxayaa si ayan hurdada uga toosin caawoo dhan, adiguna carar, oo dhaqso!", bay tiri Suunniyomadow.

" Sow saddexda nin oo fardooleyda ahi i soo qaban mahayaan?", waxaa sidda tiri Faaduma-Xay oo baqdini indhcheeda ka muuqato.

" Alla maya", bay ugu jawaabtey gabadhii "Ninka iyo faraska qaddi waa astaantii maalinta iyo iftiinkeeda, ninka iyo faraska guduudani waa calaamaddii qorraxda, ninka iyo faraska madowna waa habeenka iyo madowgiisa kuna taaban mahayaan".

Faaduma-Xay waxay u roortay irriddii laga baxayey, waxaa kilkaas ku soo baxday mukulaashii oo raafafkii u kala baxsatay si ay wajiga uga xagato. Waxayse yartu u tuurtay cad hilib ah, kolkaas ayayna ka nabadgashay bisaddii. Inta sii socotey waxaa isna ku soo baxay eygii oo haw, haw leh afkiina u kala qaaday inuu qaniino, laakiin Faaduma-Xay waxay u tuurtay lafo uu ku aammusay. Markay irriddii ku dhawaatey iyadoo or-

daysa baa geed dadka qabsada oon laga furfuri karin markuu isku duubo laamihiisii inay gabadha laacaan oo indhaha ka xayuubsadaan isu diyaariyeen, isla marahaantii baase Faaduma-Xay mullaax ku duubtay oo isku xirtay laamihii. Waxay dabadeed u gudubtey albaabkii weynaa oo markuu isku dayey in faseexaduhu dhakab isku yiraahdaan bay waxay meelihii maaraystay marisay dufan, suu waa furmay oo kala dhaqaaqay. Faaduma-Xay sidaas bay uga baxday guri baaskii dadqalatada oo dhex xushay hawdkii oo gudcur ah. Waxaa markaas gudbey oo horteeda maray ninkii iyo faraskii madoobaa dabadeedna mugdigii baa si dhab ah isu qabsaday meel walba oo u bilowmay sidii loo sheegay.

Sidee bay yartu ugu noqon doontaa gurigoodii, iyadoon la arkayn ishii farta laga geliyo?

Maxayse ku oran lahayd oo ugu jawaabi lahayd markay walaalaheed weydiiyaan musbaaxday u direen? Waxay iyana xasuusatay say aayadeed u dili jirtey. Kolkaas bay caruusaddeedii ku boydey oo weydiisey siday wax yeeli lahayd. Dabadeedna ku dhaqaaqday waxay u sheegtey.

Dib ayay gurigii tayfalaq ugu soo noqotay

oo la boodday madaxyadii iftiinku ka soo baxayey oo ul suratay. Sidaas bay gurigoodii ku tagtay, hawdkii jiqda ahaana ku iftiinsatay. Intay Faaduma-Xay jidka ku sii jirtey baa dadqalatadii soo baraarugtey oo inta jimicsatay dibadda u soo kuddey markay ogaatey inayan yartii joogin.

" Ciddiyaha ma ku jeexjeexday Faaduma-Xay markay ku soo ag martay?" bay bisaddii weydiisey. "Maya, waan iska daayey kaddib markay cad hilib ah i siisay. Waxaan kuu shaqaynayey toban sano weligaana wax iima taagin jab rooti ah kolay ku tahay" bay ku jawaabtey bisaddii.

Dadqalatadii hadalkaas kuma kahan ee waxay u tagtay eygii oo ay weydiisey:" Ma qaniintey Faaduma-Xay eygayga aamminka ahow?". "Maya, waan iska daayey, maxaa yeelay, waxay ii tuurtay lafo iyo rooti. Weligay baan kuu shaqaynaayey mar qurana laf iima aad tuurin".

" Geed-bahal, geed-bahalow", bay Tayfalaq, oo hab-hab leh tiri:" Faaduma-Xay indhihii ma ka tuurtay?". "Maya oo waan iska daayey, kaddib markay laamahayga mullaax qurxoon iigu xirtay. Toban sano

ayaan gurigaaga daydkiisa ka dhex baxayey, bal mullaax daaye dhegaati xunna kuma aadan xirin laamaha kala daatay oo si xun u baxay", buu geedkii ugu jawaabey.

Tayfalaq waxay dabadeed u roortay albaabka xaggiisa oo tiri iyadoo qaylinaysa:
"Albaabka, albaabka, Faaduma-Xay irridda ma ku xirtay?"
"Maya, oo wan iska sii daayey, maxaayeelay, faseexda dahay ii dufanaysey; Weligay intaan jirey adigaan kuu shaqaynayey, biyo iyo rinji toonana ima aad marin".

Tayfalaq aad bay u carootay oo dilid ku bilowday eygii iyo bisaddii, albaabkii bay jebisey, geedbahalkiina laamihii bay faas uga jartay. Dabadeed xanaaqii iyo daalkii markay ka bateen bay Faaduma-Xay illowdey oo sariirteeda isku tuurtay.

Faaduma-Xay iyadu gurigooddii, oo mugdi ah, bay tagtay, waxaa markaas ku soo baxay walaalcheed oo qaylo ku bilaabay:" Naa maxaa ku helay ood faynuusta ula soo raagtey?" bay weydiiyeen iyagoo caraysan. "Taniyo goortaad naga tagtay iftiin fiican ma aannu helin, kaan shidannaba isla mar ahaantaas buu damayaa, xitaa kaan doriska ka soo barinay kolay ku tahay. Waxaa la arkaa in kaad keentay noo baxo". Markay intaa yiraah-

deen bay madaxii iftiinka deynayey guriga la galeen, mise madaxu wuxuu indhihii ku fagiijinayaa Faaduma-Xay aayadeed iyo labadii gabdhood ilaa uu dhugasha-dii ku gubey saddexdiiba oo dambas ka dhigay. Gabdha-ha iyo hooyadoodba waxay ku dadaaleen inay iska qari-yaan oo meela ku dhuuntaan, laakiin meeshay galaanba indhihii way u raacayeen.

Subixii dambe ayaa waxaa loo yimid saddex-dii is dhaley oo dambas ah iyo Faaduma-Xay oon waxba gaarin. Faaduma-Xay waxay markaas madixii ku xabaashay guriga meel wax yar u jirta. Isla mar ahaantaas ubax gudguduudan baa qabrigii qariyey, oo korkiisa iyo hareerihiisaba ka soo fufay.

Markii waxyaabahaasi dheceen bay Faduma-Xay garatay inayan gurigaas ku noolaan karin inkaartu ka dhex dhacday. Waxay iska aaddey magaalo u dhewayd gu-riga oo habar guri leh is kala degtey.

Maalma hadday joogtey bay waxay habartii ku tiri " Ayeeyo, shaqala'aanta badan waan ku daalayaa, ee waxaad ii soo iibisaa cudbi aan dun ka sameeyo, suuf xariirkaa wanaagsan". Duqdii suuf xariir bay u soo gadday Faaduma-Xayna, waxay bilowday inay soohdo

Waxay soo saartay dun khafiif ah oo xariir la moodo. Dabadeed waxay duntii ka samaysay maro qurux badan oo xariir u eg, taabaashadana u roon. Maradii bay habartii u dhiibtey, oo waxay ku tiri:"Ayeeyo, maradaan suuqa ku soo iibi oo lacagteeda adigu qaado". Duqdii maradii bay aad u eegtay oo tiri:" Maya, maandhe, suuqa la geyn mahayo maradaan, maxaa yeelay, waa maro ku fiican in boqor xirto. Marka, sidaa awgeed waxay tiri: "Guriga boqorka ayaan geynayaa".

Markay gurigii boqorka tagtay duqdu baa boqorkii laftiisu maradii arkay oo lays tusahayo.

"Immisaad ku rabtaa marada?", buu weydiiyey boqorkii oo ka yaabban quruxdeeda.

" Maradaani waa ka sarraysaa wax la beeciyo, hadiyad baan kuugu keenay oo adigaa iska leh", bay tiri duqdii. Boqorkii aad buu ugu mahadiyey duqdii, dabadeedna wuxuu abaalgud u siiyey lacag badan iyo alaabo kale.

Boqorkii wuxuu waayey qof shaar uga tola maradii xariirta ahayd, sababtoo ah, xariirta qaarkeed qof waliba ma yaqaan tolmadeeda, oo waxaa laga yaabaa in dharka la ba'sho. Sidaa darteed buu amar ku baxshey

in habartii marada keentay degdeg gurigiisa loo keeno. Habartii markii loo keenay buu wuxuu ku yiri:" Adigaa maradaan sameeyey, adigaanna kaa doonayaa inaad shaar iiga samaysid".

" Anigu ma samayn dharkaan, waxaa samaysay gabar Faaduma-Xay la yiraahdo oo gurigayga joogta",bay tiri duqdii. " Waa hagaag, iyada u sheeg marka inay shaar iiga tosho dharkay samaysay".

Duqdii gurigeedii bay ku noqotay oo Faaduma-Xay bay la socodsiisay wixii lays yiri.

Faaduma-Xay waxay dharkii ka soo saartay laba shaar oo ay qoorta, laabta iyo gacmaha uga daabacday dun xariir ah iyo luul isku kudan. Waxaa dabadeed shaararkii qaadday habartii oo boqorkii u geysey.

Faaduma-Xay iyadoo dariishad agteed fadhida oo dun soohaysa ayay aragtay laba nin oo boqorka u adeega oo agtaagan.

" Boqorkii wuxuu kaa codsanayaa inaad gurigiisa timaaddid", bay ku yiraahdeen nimankii.

Faaduma-Xay nimankii bay raacday oo waxay tagtay gurigii boqorka. Boqorkii markuu arkay quruxdeeda

baa filanwaa indhihii la soo baxeen.

" Gabar guruxdaadoo kale leh gurigayga lagama diro, waan ku guursanayaa oo xaaskaygii baad noqon doontaa", markuu intaa yiri buu labadeeda gacmood inta qabtay gurigii la galay Faaduma-Xay.

Boqorkii iyo Faaduma-Xay halkaas bay isku guursadeen. Markii aabbaheed yimidna gurigaa dhinac laga dejiyey. Waxay Faaduma-Xay amar ku bixisay in duqdii iyana guriga loo soo dejiyo oo la noolaato, waana laga yeelay. Alamtiise Faaduma-Xay weligeed jeebkeeda kama saarin oo meeshay tagtaba way u qaadan jirtay.